Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta
**XARUNTA HORUMARINTA MANAAHIJTA**
TEL. 21267
S.B. 7163

جمهورية الصومال الديمقراطية
وزارة التربية والتعليم
**مركز تطوير المناهج**
تليفون ٢١٢٦٧

# SUUGAAN
# DUGSIGA SARE
## Fasalka Saddexaad
## 3

# SUUGAAN
# DUGSIGA SARE
## Fasalka Saddexaad
## 3

## HORUDHAC:

Buuggan suugaanta ah, kii saddexaad ee noociisa, waxa loogu talagalay fasalka 3aad ee Dugsiga Sare. Buuggu waxa uu ka kooban yahay saddex qeybood oo kala ah: Maanso (Gabayo, Geeraarro, iyo Heeso), Sheeko-Gaaban, iyo Riwaayad.

Gogoldhigga buugga koowaad ee Suugaanta Dugsiga Sare waxa ku xusan in buug kasta oo ka mid ah afarta buug ee Suugaanta Dugsiga Sare ku koobnaado casri ka mid afarta casri ee (ku meel-gaadh ahaan) loogu qaybshay taariikhda suugaanteenna. Hase ahaatee, taasi waa ay suurtogeli weyday, iyada oo ay keentay in casriyada qaarkood si isu dheelitiran loogu waayey (tiro iyo tayo ahaanba) ururin xilligaas ku abbaaran.

Qorayaasha waxa ay ku dadaaleen in buuggu noqdo xul ahaan mid israacsan, sidaa awgeedna iyaga oo kana cudur-daaranaya, buuggu suugaan ahaan isuma dheelli-tirna, oo ma wada koobayo qaybaha kala duwan ee suugaanta. Waxase qorayaashu codsi ahaan u jeedinayaan barayaasha maadadan in ay si xikasnimo ah ugu dadaalaan in ay buuxiyaan waxii goldoloolo ah, oo ay geestooda mas'uuliyad culus iska saaraan baadhista, ururinta iyo dhaqangelinta suugaanta, si loo gaadho guulaha iyo ujeeddooyinka.

Xafiiska Manaahijta waxa uu si hagar la'aan ah ugu mahad-naqayaa jaallayaasha hoos ku qoran oo ka qayb galay ururinta, qoridda iyo hagaajinta buuggan:

Xasan Aw Daahir Qaalib
Axmed Maxamed (Qaadi)
Maxamed Cabdiraxmaan
Faysal Xaaji Maxamuud
Maxamed Haybe Kaahin
Cabdullaahi Maydhane

Waxaa iyaguna mahad gaar ah leh Wakaaladda Madbacadda Qaranka oo hawl fiican ka qabatay daabacaadda buugga.

Maamulaha Xafiiska Horumarinta Manaahijta
Xasan Daahir Obsiiye

## MAANDEEQ (TIMACADDE):

Gabaygan waxa tiriyey Gabyaagii caanka ahaa ee la oran jiray Cabdullaahi Suldaan «Timacadde». Timacadde waxa uu gabaygan tiriyey markii gobannimadii la helay ee isku darkii dhacay. Munaasabadda uu gabaygan ka tiriyey waxa ay ahayd iyada oo Amxaaradu ku hanjabtay in ay gobollada xoroobay weerari doonto, waxa uu yidhi:

Gumeysigu hashuu naga dhacay een gurayey raadkeeda
Guyaal iyo guyaal badan hashii gama'a noo diidday
Goobtay istaagtaba hashaan joognay garabkeeda
Guuraa habeennimo hashaan gebi walba u jiidhay
Waxaan soo gucleeyaba hashaan rag isku soo gaadhnay
Gaashaandhiggeedii hashaan galowgu eedaamay
Hashii geeddankeedii rag badan goodku ku casheeyey
Hashaan labada gaalee is-barkani gaydh u diriraysay
Gacmaa lagu muquunshee xornimo nooma ay garanne
Garre iyo guntane maalintay gees isugu boodday
Allaa noo gargaaree markuu shicibku guulaystay
Geeraarradii hashaan anigu googooyey
Galoolkiyo maraagiyo hashaan kidiga gaylaanshay
Gaajiyo harraad badan hashaan ugu garaacaayey
Goortuu sidkeedii go'ay eey galabtii fool qaadday
Ayadoo candhada giijisay oo godol ku sii daysay
Garaad nimaan lahayn bay la tahay waad ka gaagixinne
Annagoon gantaalaha dhaciyo haysan qori gaaban
Hashaan gaadda waynow libaax uga gabboon waayey
Inaan goraya cawl uga tagaa waa wax soo gudhaye.

### WEYDIIMO:

1. Gabyaagu hasha uu sheegayaa waa maxay?
2. Waa maxay macnaheedu; «hashaan rag isku soo gaadhnay?»
3. Galawgu goormuu eedaamaa?
4. Labada gaal isbarkani waa kuwee?
5. Gabayga ka soo saar tuduc sheegaya ragga iyo haweenka iskaashigooda.
6. Yaa loola kala jeedaa (gaadda weynow libaax iyo goraya-cawl?)
7. Soomaalidu xornimada siday ku heshay?
8. Markaad gabayga u fiirsato, maxaad ku garan kartaa in geelu Soomaalidaqiima weyn ugu fadhiyey?

### SHARAXA ERAYADA:

1. Gumeysigu hashuu iga dhacay: gobannimadii gumeysigu iga dhacay, gurayey: daba socday.
3. Goobtay is taagtaba: meeshay istaagtaba
4. Galawgu: waa shimbir dagaalka ka oyda, eedaamay: qayliyey.
7. Geeddankeedii: dagaalkeedii, goodku: waa mas, halkanse waxaa looga jeedaa dugaagga, Labada gaal ee isbarkan: Ingiriiska iyo Talyaani.
8. Gaydh u diriraysey: xoog u diriraysay.
10. Garre iyo guntane: rag iyo haween. Galool, maraa iyo kidi: Saddexduba waa geedo magacyadood.

13.Gaylaansha: googooyey.

14. Ugu garaacaayey: dhirta u jarjaray (13, 14: geela waxaa loo garaacaa ama dhirta loo jarjaraa marka uu dhulku abaarta yahay, arrintaasina way dhib badan tahay, gabyaaguna halkan waxa uu ku muujinayaa dhibtii badneyd iyo halgankii uu gobannimada u soo galay).
21. Gaagixin: markii ay hashu godlato haddii la lisi waayo ama dhibaato loo gaysto caanaha dib bay u soo ceshataa waxaana la yidhaa waa ay gaagaxday.
23. Uga gabboon waayey: uga baqan waayey. Gorayacawl: waa gorayada dheddig, Gabyaaguna waxa uu uga jeedaa Xabashida.

## XUMAANTA QABYAALADDA (TIMOCADDE):

Timacadde isaga oo caan ku ahaa la dagaallanka qabyaaladda mar uu ceebaheeda tilmaamayey waxa uu gabaygan soo socda ka tiriyey Hargeysa 1964:-

Dawladahaan laga qayliyee qaaq wax kaga siiyey
Nin waliba marbuu qaadan jirey qaanso iyo leebe
Qarfo iyo marbuu seexan jirey qalanqal hoosteede
Ha yeeshee quluub wada jirtaa qaniya Sheekhowe
Qalalaase meel lagu lumiyo qaylo iyo oohin
Qorraxdii dhacdaba teennu way kala qaxaysaaye
Qod la riday qudhaanjada gashaa qoob dad waa u halise
Hadduu geed qallalo roobku waa qamac kaliileede
Dirxiga qudhunku uma soo uree waabu quudsadaye
Qasdi jeeray wada yeelatoy qowlka ku heshiiso
Qabyo weeye Soomaaliyey qiiradaadaniye
Qof qalbi la' quraan kii u akhriyey qaaf dheh ku harraadye
Kutaabtaa sidii lagu qarridhay qiil la' aakhoro e
Qayrkii ka hadhe waa ninkii qalay walaalkiiye.

### WEYDIIMO:

1. Gabyaagu marka uu leeyahay (nin waliba marbuu qaadan jiray qaanso iyo leebe) muxuu uga jeeday?
2. Ujeeddada gabyaaga haddii aynu eegno maxaa hore loogu mari karaa?
3. Abwaanku Soomaalidii markaa joogtay muxuu ku canaantay?
4. Muxuu u ekaysiiyey gabyaagu qofka qabaliyadda jecel?
5. Gabyaagu wuxuu si duurxul ah u tilmaamay in uu Soomaalida waanadeeda ku daaley. Waa kee tuduca arrintaa sheegaya?

### SHARAXA ERAYADA:

1. Qaaq wax kaga siiya: wax kaga oohiyey.
2. (Dawlad kasta oo kuwa horumaray ka mid ah, marbaa dadkeedu badaw ahaa, oo hubkay qabeenna ahaa leeb iyo qaanso)
3. Qarfo: debad. Qalaanqal: waa geed magacii, ujeeddaduna waa baaddiye.
4. Quluub wada jirtaa qaniya: waxa looga jeedaa midnimada iyo iskaashigaa awoodda iyo xooggu ku jiraa.
5. Qalalaase: shaqaaqo iyo degganaan la'aan.
6. Qorraxdii dhacdaba: maalin kastaba.
7. Teennu: Soomaalideennu, kala qaxaysa: kala baqaguurtaa.
8. 0Qamac: kulayl, kaliil: dabayaaqada jiilaalka.
10. Qasad: ujeeddo, qawlka: hadalka.
11. Qabyo weeye: way kala dhimman tahay.

    (Ninkii qalbiga wax uga dhimman yihiin, ruuxii doona in uu wax baraa isaga uun baa daalaya ee waxba ma bari karo).
15. Qayrkii ka hadhe: asaaggii ka hadhe.

## DAYAX (QAASIM):

Axmed Ismaaciil Diiriye oo Qaasim ku magac dheer, waxa uu ku dhashay tuulo Siig la yiraahdo oo degmada Hargeysa ka mid ah. Waxbarashadiisa heerka dhexe waxa uu dhammaystay sannadkii 1953ki. Waqtigaas oo uu Dugsiga Dhexe ee Sheekh ka baxay.

Qaasim hal-abuurka waxa uu bilaabay isaga oo fasalka lixaad ee dugsiga dhexe ku jira. Markaas oo uu hees caashaq ahayd tiriyey isaga oo nin gaal ah oo macallin ahaa ku hal qabsanaya:-

«(Please) Bedanow wa baran waayaye,
Bogsiiya mar ma soo bariidshaa?»

Qaasim gabaygan waxa uu curiyey 1964kii. Markaasuna waxa ay ka mid ahayd waqtigii Ummadda Soomaaliyeed ay sida foosha xun u hoggaaminayeen mudanayaashii dadku ay soo dooran jireen. Markaa, gabaygani waxa uu ku muujinayaa, in Ummadaha dunida ku dhaqan qaarkood ay kartidooda ku suurtageliyaan awood aqooneed oo ay kaga gacan sarreeyaan dabeecadda iyo dhibaatooyinkeeda. Taas oo u suutagelisay in ay dayaxa guudkiisa ku degaan, hawada sarena u diraan dayax-gacmeed uga soo warbixinaya bal meeshaasi waxa ay ku sugan tahay. Isla markaa waxa uu tilmaamayaa sida Ummadda Soomaaliyeed loo talo habaabiyey; nimankii madaxda ahaa ee lays lahaa qayrkood bay la baratami doonaan, horumar dhaqso lehna ummadday u horseedina ay dadka Soomaaliyeed dib ugu celiyeen wixii xilligii isticmaarka ay ku jireen. Waxa uu ku soo gebagebeeynayaa in aanay Ummadda Soomaaliyeed sidaa ku waareyne, uu imanayo waqti, inta ay ka gilgilato silica iyo darxumada, ay awooddeeda ku abuuri doonto karti aqooneed oo ay dabaeecadda kaga gacan sarreyso kuna dhaliso nolol barwaaqo ah iyo horumarba.

1. Dayaxaa la kala boobayaa iyo dirirkii cawleede
2. Dabagaabihii laga career dunina yeelkeede
3. Xiddigtii dagaariyo la dhaaf diillintii Gurey e
4. Dibbaa laxaha loo eegayaa sacana waa dhaafe

5. Duqii samada lagu sheegayiyo dide cirjiidhiiye
6. Dabaylaha rag baa kala yaqaan dawga loo maro e
7. Hadba waqalka dihin Ruushku waw doogsin cararaaye
8. Daruuraa la weeraray nin ogi dan ugu faallooye
9. Ha yeeshee dabkeedu ha ba'ee doqoni waa mooge
10. Nin da'diisu meeshaa tagtoo daallan baan ahaye
11. Daab gudimo weli sooma jirin wiilashaan diraye
12. Halka dunida lagu geeddi yahay [illegible] maysaane

13. Ummaddii daryeel weli ma helin daacadda ahayde
14. Sidii bay u dooyeysan tahay damasha waaweyne
15. Sidii buu dugaag uga gurtaa daaqa xoolaha e
16. Sidii bay duddada aar dhiciyo dacow u joogaane
17. Sidii bay dushaa ugu sidaan dumar carruurtiiye
18. Sidii bay degmadu ceelashii ugu darleeftaaye
19. Sidii bay docaa aqalladii uga daloolaane
20. Sidii bay darroorimada iyo daad u geliyaane
21. Sidii baa Dagaalow biyaa loo dawariyaaye
22. Sidii bay u daba-goosi tahay haradii Doolloode
23. Oy weliba dibindaabyo iyo diriri joogtaaye
24. Waa kaa dareersaday Amxaar dayrcadkii dhalaye
25. Dembi kuma hadlaayee ma arag Dawladdaan rabaye
26. Isma doorin gaalkaan diriyo daarta kii galaye
27. Dusha midabka Soomaali baad dugulka mooddaaye
28. Misna laguma diirsade qalbigu waa dirkii Karale
29. Meeshaan dad aan urursho iyo dirir ka eegaayey
30. Iyaba waa darxumo ii hadhee dacar miyaan leefay?
31. Ma dorraato raadkaan dhigaan dib ugu soo laabtay?
32. Sidii aan dayeysnahay miyaan dawgii ka habaabay?
33. Waxba arartu yay ila durkine waxaan ku soo duubay
34. Maruun buu daf oran nabsigii diinku soo sidaye
35. Maruun bay daruur caafimaad dooxa soo rogiye
36. Dirridaa abaarta ah mar buu doog ka soo bixiye
37. Dibjirkiyo marbay reer miyigu daasadaa qubiye
38. Maruun buu digiigixan raggii daallanaan jiraye
39. Uu dabar dambeedkiyo, dhibtiyo diidi keenada e
40. Maruun buu daboolka iska rogi doob la quudhsadaye
41. Dibnihii shakaallaa mar baa doodda loo furiye
42. Markaasaa la deydeyi xaqii naga dahsoonaaye.

**WEYDIIMMO:**

1. «Ha yeeshee dabkeedu ha ba'ee doqoni waa mooge Nin da'diisu meeshaa tagtoo daallan baan ahaye»

    b) Waxaa Qaasim leeyahay doqontu lamaba socoto, waa maxay?

I) «Doqonta yuu ula jeedaa?»

t) Meesha uu leeyahay da'diisii baa gaadhay waa xaggee?

1) «Qor sababaha da'diisu in ay meeshaa gaadho u suurtageliyey?

II) Ka hadal da'diisa cidduu ula jeedo. Isagu cidda uu ka joogo ee uu gabaygan kula hadlayo, iyo waxyaabaha ciddiisa uu ka reebay?

III) Cidda meeshaas gaadhay, horumarka kale ee ay dunida ku abuureen ka hadal.

b) Ka hadal waxyaabaha kuu muujinaya dawladdii Soomaaliyeed ee markaa dalka ka talinaysey in aanay dalka wax horumar ah gaadhsiin.

t) Ka hadal sababaha sidaas ku timid.

3. Saddexda su'aalood ee Qaasim isweydiinayaa, shucuurtiisa waddannimada ah maxay kaaga muujinayaan?

4. «Isma doorin gaalkaan diriyo daarta kii galaye»

9. Dusha midabka Soomaali baad dugulka mooddaaye
Misna laguma diirsade qalbigu waa dirkii Karale»

Si kooban uga hadal tuducyadaasi waxay muujinayaa.

5. Faallo kooban ka bixi toddobada tuduc ee gabayga ugu dambeeya.

6.«Dibjirkiyo marbay reer miyigu Daasadaa qubiye»

**Tuducaan Sharax.**

**SHARAXA TUDUCYADA IYO EREYADA CUSUB:**

1. Dadku waxa ay u tartamayaan dayaxa iyo xiddigaha tegistooda.

2. Laga career: laga teg; laga fogaa.

3. Xiddigihii inoo muuqanayey iyo jiitintii waaq habaarqaba haatan la dhaaf oo kor baa loo ii socdaa.

4. Lo'da iyo axaha labaduba waa xiddigo laga faaliyo.

Waxa uuna u jeedaa labadaba kor baa loo dhaafay.

5. Duqa samada: Awrka cirka, Cirjiidh: xiddigo.

14. Sidii baa dadkii weli shaqo la'aan dhirta la hoos fadhiyaan.

16. Sidii baanay dadkii iyo xoolihii biyo weli u helin.

17/18 Doollo, waa harooyin hawdka ku yaal oo ay Xabashidu dad badan ku laysay.

21. Waa isku mid gumeystihii la eryey iyo raggii beddeley.

22. Karal waxa uu ahaa gaal Ingiriis ahaa oo 18 Sannadood Waqooyiga xukumi jiray.

26. Ma qabyaaladdii aan dorraad ka tegey baan di ugu soo noqday,

## TALLAN BAAN QABAA (KAAHIN FEEDHOOLE)

Nin loo yaqiin Kaahin-feedhoole oo toddobaatan jirey ayaa geelii dhowr beri raacay. Markaa wiil barbaar ah oo geela raaci jiray ayaa dhintay. Maxamed Kaahin-Feedhoole oo cidda la joogeyna waxa uu ugu maqnaa carro, baadi-doon iyo hawlo kale oo fara badan. Odaygii markaa geel raacistii dhibsaday kolkaas buu calaacalay.

Tallan baan qabaa Maxamadow, taawil gooniyaha

Toddobaatan baan jirey haddaan tiroba dheereyne
Haddaan timaha guudkayga sare tini madoobayne,
Tallaabo iyo orodkii ninkaa tiicayaan ahaye
Taws iyo xanuun waa waxaan, dhab ula taahaaye
Tooraha aroortii haddii ay taagga hor u dhaafto
Tartan iyo ninkii orod hayaa, Taani soo roga e
Taaggaas aan leeyahay haddii, tooyo la i raacshay
Ooaanan tudhaaleba sugayn tacaddi mooyaane
Waa talo ilaah leeyahay, laga tallaaabayne

Maxamed gabaygii aabbihii markii uu helay buu gabay jawaab u soo celiyey waxa uuna yiri:

Dabuub gabay haddaan Kaahinow adigu daardaartay
Anna daba-galkeedaan aqaan daadka maansada e
Dibnihii tiraabana rag waa kaga dambeeyaaye
Anigana dabuubtayda maqal waan ku daaficiye
Daalka iyo dhibtaad sheegtiyo dogobta aad jiidhay
Dabayshaad wareegtee harraad ugu dayoobayso
Dadku aabbo waa kula qabaa «Dunida joogaaye»
Duniba nin seexdoo ma jiro doobi dhamayaaye
Darbaa kaa gu'weynoo la mara debedda eeyaaye
Dubbow Nuur Cadduur maalin qudha Deex ka hadhi waaye
Dumarna waa ka haayirey iyo damacii naagoode
Iyana Diiriye iyo Xaashi way daajiyaan Sulube
Dareertiina subaxdii kabtida kama dambeeyaane
Dirka Maxamed Deeq waad ogtahay duudda uu dhalaye
Difisyoone idil waa ninkaa daadiyee qubaye
Mana diro e wow taagan yahay doogiyo abaare
Ma dayaco habeen Haybe Nuur sidigta dawlaabe
Dumar wuxuu ku biirshaba ma jiro rag u dugaashaaye
Degmadeenna«oo idil» haddaan dayey intaan eegay
Duqa geel u faydani ka badan dooggan soo baxaye
Da'daadaa adduunkiyo waddiyo daan-cirroolaha e
Marse haddaanad daariyo lahayn, doonni iyo moodhar
Oo dheef Ilaah kuugu daray waxan dareeraaya
Waa kuu danli'i raaciddeed waxaad ku diidaaye
Marse haddaanan dhaan kuu direyn ceel u dalandoola
Duleeddada ku celi geelu waa dawladdeenniiye
Dubjirkana ka hoy hawsha kale kaaga debec roone

**LAYLIS:**

**GABAYGA HORE:**

1. b) Gabayga ninka tiriyey kumuu ahaa?
   t) Muxuu ka tiriyey?
   j) Tuduca da'diisa uu ku sheegay timaan.
2. b) Dhibaatooyinka uu sheegtay soo koob.
   t) Haddii aad eegto gabayga waxaad mooda in uu odaygu iska samray oo u leeyahay kol haddii ianankii geela iga raaci jiray dhintay, waxba yaanan calaacalin Eebba sidaa gartay e
   j) Tuduca sidaas uu ku sheegay waa kee?

**GABAYGA DAMBE:**

3. b) Gabayga dambe yaa tiriyey?
   t) Sababta uu ku yimid maxay ahayd?
   j) Maxay iskugu toosanaayeen labada nin?
4. Gabaygu waxa uu tilmaamay dad dhowra iyo hawlo ay qabtaan. Si uu ugu sheego ninka uu u diraayey gabayga inaannu keligii da'daa ku hawshoon ayse jiraan dad gedihiisa ah oo iyaba hawshooda. Dadkaas sheeg iyo mid walba hawlahauu qabto.

1. Tallan: murugo, Taawil: faalo.
2. Haddaan: imminkaan.
4. Tiicayaan ahaye: liicayaan ahaye.
5. Taws: cudur.
6. Toore: waa socodka geelu uu is wada dabagalo.
   Taagga: waa meel sare oo dhulka ka mid ah, halkaasna waxaa loola jeedaa fogaansho, tuduca ujeeddadiisu waxa weeye: (geelu marka uu is wada dabaggalo ee uu jiito ama meel fog uu gaadho)
7. Taani: waa hal magaceed waxse loola jeedaa geel oo dhan.
8. Tooyo: waa hal magaceed geelana loola jeedaa.
9. Tudhaale: naxariis, tacaddi: dhibaato.

**JAWAABTII:**

3. Dibnihii tiraaba: dibnihii hadal bilaaba.
5. Dogob: waa qori weyn oo engagan oo dhulka ku dhaca.
6. Dayoobayso: asqoobayso, wareereyso.
8. Doobi: waa dhiilka caanaha lagu shubto.
9. Darbaa kaa gu'weynoo: dadbaa kaa da'weynoo,
   Eeyaa: waa erey qofku markuu waalidkii u yeedhayo uu adeegsdo macnaha tuducu waa: (dadka qaar kaa da'weyn oo badan ayaa xoolaha debedda la wareega.) 10.

Dubbow Nuur Cadduur: waa magac nin, Dhexe: waa hal magaceed.

11. Haayirey: tegey.
12. Sulub: waa hal magaceed, (Diiriye iyo Xaashi waa laba oday oo ahaa Kaahin-feedhoole da'diisa)
13. Kabtiga: degdegga (Diiriye iyo Xaashi geelooda markii uu dareero aroortii kama hadheen si degdeg ah bay u raacaan).
14. Dirka Maxamed Deeq: carruurta Maxamed Deeq. Duudda uu dhalay: dadka badan ee uu dhalay.
15. Difisyoone: waa af qalaad, macnaheedu waa gaas ciidan ah, waxa uuna uga jeedaa dad badan; waa ninkaa daayee qubay: waa ninkaa dhalay.
16. Maxamed Deeq isaga oo intaas oo dad ah dhalay, haddana iyaga xoolaha uma diree isagaa gu' iyo jiilaalba ilaashada.
17. Sidig: waa laba halaad oo nirig qudhihi wada jaqdo. Doolaab: hal magaceed.
18. Rag u duggaashaaye: rag u ciidamaa.
20. Duqa geel u faydhani: duqa geel raaca.
23. Dheef: nafaqo; Waxan dareeraya: xoolaha nool.
25. Ceel u dalandoola: ceel u socdaala.
27. Kaaga debecsane: kaaga fudude.

6. Amiirka: waa eray carabi ah waxaana halkan looga jeedaa neefka qoodha ah, Arax weyn: dhabar weyn.
7. Ahminku: waa neefka xoolaha meesha ama kaalinta uu kaga jironeefka ahminka ahi ayaa uu kaga jiray Nakruuma Afrikaanka).
11. Axmed: waa Axmed Ben Bella; Madaxweynihii hore ee Aljeeriya.
12. Nakruuma: waa Madaxweynihii Gaana ee u horreeyey.
13. Edeggii qoollaa: waa xerada yar ee lagu xereeyo maqasha xoolaha, halkaanse waxa loola jeedaa shirqoolkii Nakruuma loo dhigay.
17. Almso: sida dugagga u guro.
18. Urug weeye: murugo weeye.
20. Ummi: waa eray carabi ah waxaase looga jeedaa, nacab.
22. Ubaxu laacaa: Ubaxu muuqdaa.
23. Waa intihiyeen: waa madhiyeen.
24. Akra: Magaala-madaxda Gaana.
29. Ugayb: eraygu wuxuu ka yimid ugub waxaanu ku tusayaa da' yari.
35. Haddii udubku galo: Haddii si xun loo raro oo uu dheelliyo. U iilanahayo: Jaalle la noqonayo.

## HADDII DUNIDA LAGU WAARAYO:

## (YUUSUF CABDULLE MUUSE)

Nin gabyaa ahaa oo ku magac dheeraa Ina Cabdille Muuse, lana odhan jirey Yuusuf Cabdulle Muuse ayaa gabaygan curiyey. Yuusuf markii uu arkay in uu da' noqday ayaa ay waaya-aragnimadiisa in uu raad ka tago oo dadka uu la sii dardaarmo. Waxaanuu dadka kala sii dardaarmayey waxyaabo nolosha hab-boon ee dunida la xidhiidha. Waxa uu yiri:-

Haddii dunida lagu waarayooy daayin noqonayso
Waxaan laga dileen nebiyadii laysu soo diraye
Asaxaabihii baan degeen daahirka ahaaye
Faadumo iyo dirkeedii ayaan dumug yidhaahdeene
Daahaa ku noolaan lahaa degalladoodiiye
Anse waxaan daliishaday inaan lagu dambaynayne
Dawliilka uun baan arkiye diray arwaaxdiiye
Durdurkii Makaad iyo Xajkaan daalib leeyahaye
Deeblahabkaan geela iyo adhigu waa daleel madhane
Daaraha la wareerayaa waa adduun dumaye
U dadaala diintiyo waqtiga daacadna ahaada
Cabdallaha dushiisiyo ayuu dayro kala sheegan
Darkii odayadii hore xidheen dalawgu yuu goynin
Doqon xaajo waa kaa dilaa dibaddaba u tuura
Shisheeyuhu hadduu idin danqaro dogob u nooleeya
Rag i daaya kaagama tage dab u fagaareeya
Meeshii daleelaa muskaba baahalku doontaaye
Duldhabaha wax loo saarayaa yaan dugaag marine
Is dugsada walaal kala durkaa dagan dharaartaase
Anna duulka aan celinayo iyo daadka aan moosi
Dal shisheeye waagaan tagee idinka duukeeyo
Amase mowdku igu soo dagee dabaqa lay saaro
Dadabtiyo aloolkaan ahaa dib u shallaytooda.

### WEYDIIMO:

1. Fikradda guud ee gabyaagu ma dhismaha nolosha dunida ayey taageereysaa mise tacab loo galo dunida kale (aakhiro)? Maxaad ka qabtaa fikraddiisa?
2. Tacabka nolosha dunida dhismaheeda loogu jiro muxuu gabyaagu ka qabaa?
3. Daaha muxuu ahaa? Ka hadal?
4. «Dawliilka uun baad arkiye arwaaxdiiye», si kooban u sharax tuducdan ujeddada ka dambeysana faahfaahi?
5. Gabyaagu wada noolaanta bulshada halkee ka taagan yahay?
6. Gardarrada shisheeyaha muxuu ka qabaa in lagaga hortago? Ma ku raacsan tahay? Waayo?
7. Kaalintee buu isu haystay gabyaagu in uu jirey dadkii uu la noolaa dhexdooda?
8. Gabyaagu talooyin buu soo jeediyey, caddee inta aad isleedahay nolosha wax bay ka tarayaan iyo inta aan waxba ka tarayn?
9. b) «Dabaqa lay saaro» sharax,

I Ereyga hoos ka xariiqan maxaa loola jeedaa?

II «Dadabtiyo aloolkaan ahaa dib u shallaaytooda»

I Sharax

II Labada eray ee hoosta ka xarriiqan maxay muujinayaa?

**SHARAX:**

3. Asaxaabihii baan degeen: asaxaabihii baan dhnteen
4. Faadumo: waa inantii Nebi Maxamed dhalay, dirkeedii: carruurteedii, damug yidhaahdeen: madheen, le'deen.
5. Daaha: Nebi Maxamed, degelladoodii: guryahoodii.
6. «Waxa ii caddaatay inaan adduunyadan lagu waareyn».
7. Dawliilka: bidhaanta jidhka, arwaaxdii: naftii.
9. Daleel madhan: dhalanteed
10. La meegaarayaa: la dhisayaa
11. Waqtiga: waxa uu uga jeedaa salaadda.
12. Dayro kala sheegan: eed kala sheegan.
13. Darku: waa wadaanta biyaha ceelka lagaga soo dhuro. «wuxuu tuduca uga jeedaa asluubtii fiicnayd ee odayaashii hore idiin dhigeen yaanay beddelmin».
15. Shisheeyuhu: halkan waxa uu ula jeedaa Xabashida hase yeeshee waxa uu noqon karaa ciddii kasta ee dibedda kaga timaada dalka.
16. Idin danqaro: idin taataabto; dogob u nooleeya: dab ku shida.
18. Muska meesha dalleesha ah: waa meesha jilicsan.
19. Duldhabaha: waa oodda badan ee is daba dharartaasi: taag daran dharartaasi.
20. Isdugsada: isku tiirsanaada; dagan dharaartaasi: taag daran dharaartaasi.
22. Idinka duukeeyo: dinka tago.
23. Dabaqa lay saaro: luxudka lay saaro.

## TUSAALE WAALID (CALI MIRE)

Gabaygan waxaa tiriyey ninka la yiraahdo Cali Mire Cawaale oo u tiriyey gabdhihiisa waaweyn oo uu rajeynimo ku soo koriyey.

Ujeeddada uu Cali ka lahaa gabaygan waxa ay ahayd in uu ku waaniyo gabadhihiisa waaweyn in ay xannaaneeyaan carruurta ka yar yar ee haweeneyda uu qabaa ay dhashay; iyo in uu ogeysiiyo in uu dhib badan ka soo maray korriimadooda. Cali waxa uu ka mid ahaa macallimiintii ugu horreysey ee dalku yeeshaywaxa uuna qayb weyn ka soo qaatay waxbarashada dhallinyarada Soomaaliyeed.

1. Da' qofkii noqdaa loo ogaa inuu dardaarmaaye
Gabdhayahow duq baan ahay haddeer aan durdurineyne
Waxaan idinka doonaana waa daacad iyo xooge

2. Carruurtaan duceysneyne way degel xumaataaye
Inaad daadahaysaan ilmahaa idinku doorroone
Haddaydaan dulqaad yeelan waa dibudhac reereede.

3. Idinkuba wax badan baan dartiin daal u soo maraye
Duleed lagama helin xoolihiyo daartaad huruddaane
Dagaal baan u soo galay waxaad duni arkaysaane

4. Dabbaan shiday intaan daango dubay rooti duhur qaatay
Daryeelkiina awgiis xawaash dumar la soo iibshay
Dadaal aan idiin qabo cuntada dacal ku soo laabay

5. Idinkaan dareemine ma yara diifta igu taalle
Allahayow, daraaddiin maxaa «daanno» igu gaartay
Doqon iyo damiin iyo maxaan nacab la daaweystay

6. Dayac ka row intii aan lahaa dacas maxay fuulay
Deriskooda yay mudan maxaan deyn u galay xoog leh
Dadku yuu rajo u garan maxaan dahab idiin siiyey

7. Dabayl iyo kuleyl iyo maxaan dibad idiin meeray
Dihaal anoo qaba maxaan qariyey daalkeyga
Kolkuu diiggu ciyo aawadiin dalag maxaan raadshay

8. Dulbaax iyo baruur iyo maxaan darib idiin keenay
Dermo iyo furaash iyo maxaan gogol idiin daadshay
Dibaaj xariiriyo maxaan diric idiin gooyey

9. Middii dureyda leyl dhexe maxaan daawadow kiciyey
Dugaaggiyo maxaan idinka jirey daallin iyo meel xun
Maxaan idiinka digey xaajo aan idinla diidaayo

10. Duurxul hadal ah naag tiri allow diiq maxaan geliyey
Dulmi idinka oo falay maxaan idinla soo duubtay
Dembi aad samayseen maxaan duulal kale saaray

11. Derejiyo wanaag iyo maxaan samo idiin doonay
Duco iyo maxaan Eebbe-tuug idinku sii daayey
Eeggana dantay aan hadlee waxaan ku soo duubay

12. Daacad iyo werdiga Weynehey docogso mooyaane
Inaan daayo yaa ila gudboon duunyo dhiqiddeede
Bal aan dayo abaal inuu dad galo Daayin baa garane

**LAYLI:**

1. WEYDIIMO:

1. Hooriska koowaad, muxuu gabyaagu kaga hadlayaa? Muxuuse gabdhihiisa weydiisanayaa?
2. Hooriska labaad, yuu ka rabaa in ay gabdhihiisu u dulqaataan? Muxuu dulqaadashadooda ilmaha ugu gaar yeelay?
3. Hooriska afraad, muxuu gabyaagu kaga hadlayaa?

   t) Waqti maad u filaysaa in uu shaqadaas qabtay?

   Maxaa isaga shaqadaas qabashadeeda ku kallifay?

4. Hooriska 5aad, waa ayo dadka uu Cali tilmaamayo ee la daaweystey, ama wax ku darsaday? Sidee baad u malaynaysaa in uu ula daaweystey?
5. Hooriska 6aad, kan 7aad iyo midka 8aad, si kooban uga faalloo adiga oo waxyaalaha gabaygu sheegay oo dhan wada taabanaya.
6. Hooriska 9aad, waa maxay dugaagga, daallinka iyo xaajooyinka uu ka hadlayaa?
7. Hooriska 10aad, si faahfaahsan uga hadal arrimaha uu Cali ku guud marayo.

   t) Yaad u malaynaysaa naagta uu sheegayo ee gabdhaha u duurxushay?

   j) Waa ayo cidda uu dembiga ay sameeyeen saaray ee uu sheegayaa?

8. Hooriska 12aad, muxuu gabyaagu hadalkiisii ku duubay?

   t) Muxuu arrin ku goostay?

   j) Muxuuse hablihiisa ka codsaday?

## GABAY DOOD AH OO NIN REER MIYI AH IYO NIN REER MAGAALO IHI ISKU XIFAALAYNAYAAN

Qodobbada Soomaalidu ka gabaydo ee aad caanka u ah waxaa ka mid ah xifaaladda oo gabyaaga Soomaalidu caan ku yihiin. Gabayada xifaaluhu waxa ay ka yimaadaan dhinacyo badan oo kala duwan. Waxa ay dhex maraan dhallinyarada saaxiibka ah, abwaannada waaweyn, reer miyiga iyo reer magaalaha, haweenka iyo ragga (dhallinyarada ah), mararka qaarkoodna waxa ayba dhex mari jireen degmooyinka. Gabayada noocaas ahi waxa ay qani ku yihiin suugaannimo iyo xeeldheeraan, sidaas darteedna waxa aynu aragnaa in gabayada suugaanteenna ugu ŋiime badani dhinacaas ka yimaadeen.

Gabaygan soo socda waxaa isku xifaaleeyey laba nin oo reer miyi iyo reer magaale ah, waxaana laga soo guuriyey buugga la yiraahdo «Aqoondarro waa u nacab jacayl» ee uu qorey G/le Faarax Maxamed.

**Ninkii reer magaalka ahaa baa ninkii reer miyiga ahaa ku yiri:-**

1. Wallee daacuflow reer miyaan doocna garanaynin
2. Dab la shiday araartii hadduu daamanka isdhaafsho
3. Doqonnimo waa wuxuu cadkiis doc uga muujaaye
4. Haddii roob Ilaah shubo oy duni barwaaqowdo
5. Oo doobi caana ah riyaha looga dalaf siiyo
6. Oo rodol uu doondoon ku helay uga dambeysiiyo
7. Isagiyo duqdiisii markaa dawlad la ismoodye
8. Damdamtiyo hangoolkii ma jiroo diriri maayaane
9. Maantaas ninkii dan u lehow dayso hadalkaaga.

**Markaasaa ninkii reer miyiga ahaa inta uu guntiga dhiisha isaga dhigay jawaabtan ninkii reer magaalka ahaa siiyey:-**

1. Dunuunacaye goortuu qaxwaha dibinta saaraayo
2. Duuf lulaye goortuu kalluun labada daan buuxsho
3. Deyn qaate meeshii nin ragi debec ka maalaayo
4. Duryan xume markuu deego buu dunida hiifaaye
5. Diintiyo wuxuu caayayaa Eebbe daayinahe
6. Dacwad aan la garanayn iyo dafasho baas sheegte
7. Dood iyo dagaal baa nin raga lagu daryeelaaye
8. Deeqdana haddii loogu ladho darajo weeyaane
9. Waxaa dawdara magaaliyo ninkii degelkeed waa joogo.

### WEYDIIMO:

1. Dooddan gabayga ah ee labadan nin dhexmartay, keebaad is-leedahay waa lagu jilciyey? Waayo?
2. Si kooban ninka reer miyiga ah iyo ninka reer magaalka ah isugu qiyaas.

## SHARAX GUUD

**I Gabayga hore tuducyada soo socda sharax:-**

1. Dab la shiday aroortii....
2. Rodol uu doondoon ku helay .....
3. Damdamtii iyo hangoolkii ma jiroo .....

**II Labada nin mid walbaa sagaal tuduc buu tirshay:-**

1. Tuducii kastaba kan u dhigan la doono
2. «Doqonnimo waa wuxuu cadkiis doc uga muujaaye», muxuu gabyaagu tuduc-daas uga jeedaa?

**III Gabayga labaad:-**

1. Erayo adag:

   a) dunuunuc: cabash, hadal cabasho ah.

   duuft)ulaye: duufle, siin badane.

   j) duryan: buuq; deeg: wax la'aan, caydhnimo.

   x) dafash: belaayo, waxyeello.

   kh) dawdar: doqon, meheradlaawe.

## SAADAAL (QAASIM)

Qaasim gabaygaan waxa uu curiyey 1968, mar uu maamulkii waqtigaas aad u dhaliilay. Waxa uuna ku hal qabsaday saaxiibkiis Cali Xaaji Aadan Cilmi oo ciidammada Booliska ka tirsanaa oo ayaamahaas caddaalad-darro tirsanayey; aadna calool xumo weyn u qabay; waxa uuna yidhi:-

1. Cashadii gashaba waagu waa caynad gooniyahe
2. Cadceed soo baxdaba noole wuu ku cibro qaataaye
3. Xiddigaha casaadiyo dayaxa caadka lagu meershey
4. Caamadu waxay moodayaan curasho dayreede
5. Anigaase moorada cakiran kuu caddayn kara e
6. Cilmi felegga way garan raggii caalinka ahaaye
7. Cirsan yeedhkii caawana war buu sheegay Caliyowe
8. Wuxuu yidhi halkuu ku cuyubnaa cirkii soo dhaafye
9. Caawaa la kala soocayaa caabud iyo gaale
10. Carruuraha la dhacay awliyada laga cadheysiiyey
11. Carshigaaba laga soo aqbalay cabashadoodooye
12. Waa cidhib go' duulkii shacbiga cunay wixiisiiye
13. Casha aan fogeyn wax isbeddeli ciidan fara weyne
14. Caaddaa rag koray buu nabsigu hoos u soo celine
15. Caanuhu dhawaan way ka quban ciil dar loo qabo e
16. Inay curaddo kheyr lihi kacaan ciiddan la arkeeye
17. Caynkay maluugtu u egtahay cigay dadweynihiiye
18. Ceeryaamo subaxeed nin moogi, cadarka roob moodye
19. Marse haddii cadceed lagu dhexdaro wayska cidinciide
20. Caloolyow aan kugu raagi hayn ciidda how qodine
21. Cagta ii dhig waa kaa nabsigii soo cadceedsadaye.

**LAYLI:**

I Erayo Cusub:

1. Moorada cakiran: arimaha murugsan, faalka bixi waayey.
2. Cirsan ka yeedh: shimbir habeenkii ciya oo wanaagga looga faashado (meeleeyaha «Ka» tuduca waa laga dhaafay si akhrisku u tooso).
3. Ku cuyuubnaa: ku xidhnaa.
4. Ciriirkii: xiddigii, minkii faalka.
5. Maluugtu: xiddigtu, mooradu.

6. Cigay: nabsigii hel, liibaan hel, ama guulysay.

**Tuduca macnihiisu waa sidatan:-**

«Sida faalku u muuqdo, dadweynuhu dhowaan buu nabsigii ka maqnaa helayaa, oo guul gaadhayaa».

7. Ceeryaamadu subaxdii waxa ay u eg tahay daruur qofka aan meel fog wax ka eeginina waxa uu moodaa roob, hase yeeshee markii ay qorraxdu soo baxdo bay kala carartaa kuwa iminka ina boobayana waa sida ceeryaamadaas oo kale ee waxba inta qorraxdu kuu soo baxayso waxba ha u dheg taagin.

8. Cidinciid: waa shay aan aad u muuqan, oo sida ciirada ama ceeryaanta oo kale ah.

II WÈYDIIMO:

1. Gabyaagu muxuu guud ahaan ka hadlayaa, maxaase gabayga ku dhaliyey in uu curiyo?

2. Labada tuduc ee gabayga ugu horreeya, sidey gabayga dulucdiisa ula haystaan?

3. Tuducda saddexaad ilaa ka tobnaad waxyaalaha ay ka hadlayaan si kooban waxa uga sheeg.

4. Erayadaan sida ay gabaygan ugu jiraan u sharax:

   Caadka — Caamada — Cilmi felegga.

5.
   b) Maxaa looga jeedaa: «wuxuu yidhi, halkuu kū cuyubnaa ciriirkii soo dhaafye'»

   t) Tuduca sharax adiga oo ujeeddada ka dambeysa muujinaya.

6. Cagta ii dhig waa nabsigii soo cadceedsadaye

   b) Waa maxay tuduca dulucdiisu?

   t) Nabsiga soo cadceedsaday waa maxay?

## HUBQAAD (MAXAMED SH. CABDIRAXMAAN)

Sida la ogsoon yahay, taariikhda ummad kasta oo adduunkan ku dhaqani waxa ay leedahay weji xun oo madow iyo mid cad oo wanaagsan. Ummadda Soomaaliyeed taariikhdeeda wejigeeda madowna waxa ka mid ah sidii foosha xumeyd, bani'aadaminimadana ka baxsanayd ee ay gumeystayaashu, caddaan iyo madowba, dalkeeda iyo dadkeedaba u kala qoqobeen una kala googoosteen, iyaga oo aan u aabbayeelin isku mid ahaanta iyo isku tollaanta Ummadda Soomaaliyeed ee ay ka mid yihiin: dhaqanka iyo hiddaha, taariikhda, afka, diinta, abuurka iyo degaanka, waxyaalahaas oo aynaan marnaba garowsanayn, haddii wax kaleba layska daayo, kala qoqobnaanta iyo kala maqnaanta dalka iyo dalka iyo dadka Soomaaliyeed.

Halganka dheer ee dadka Soomaalidu ay midaynta dadka iyo dalka Soomaaliyeed ugu soo jireen, ee waqti aan dheereyn lagu guulaysan doonana, wejiyo badan buu leeyahay. Waxaana ka mid ah guubaabada isdaba-joogga ah ee ay had iyo jeerba abwaannada Soomaaliyeed, ummadda ku baraarujinayaan xoreynta qaybaha Soomaaliyeed ee weli gobannimadadooda gumeystayaasha kula hardamaya.

Guubaabadaas waxa ka mid ah, gabaygan uu curiyey Maxamed Sheekh Cabdiraxmaan, Luulyo 1963, kolkaas oo madaxda Afrika shir ay Magaalada Addis-Ababa ku yeesheen ay Amxaaradu ku diiday dalka iyo dadka ay innaga haysato in ay daw innaga mariso.

Maxamed Sheekh fikraddiisu waxa ay ku soo biyoshubaneysaa qoriga caaraddiisa in qaybaha Soomaaliyeed ee innaga maqan, gumeystayaasha lagaga xoreeyo, mar haddii waddadii nabadgelyada ay gar-maqaatayaasha iyo dhulballaarsadayaashu awdeen.

1. Waayahanba gabay Qaadiyow wayska gees maraye
   Waa taan ka gaabsaday tixdaan goonni la ahaaye
   Xaluumbaa gufaacada waddiyo galuhu keeneene

2. Anigoon badweyntiyo u gelin gaanka iyo moolka
   Guudkaan ka yarasheegayaa gogoldhiggeediiye
   Gunud hadalka yaanay murtidu geesna kaa marine

3. Goor iyo ayaan waxaa hurdada gama'na ii diidey
   Sida aar gantaal qaba waxaan hoosta uga guuxay
   Waxaan ahay nin guriguu lahaa loogu soo galaye

4. Gurijiif abeesadu hadday mici ku gaadhsiiso
   Suntay kugu gantaad waaya badan gogosha taallaaye
   Waxaan ahay gumeystuhu nimuu gooyey boqontiiye

5. Anoo gama'san nacab soo guntaday guudka iga fuulye
   Halkii geelaygu daaqayey gibir ka qaadaane
   Waxaan ahay nin geed lagu xidhoo gaal addoonsadaye

6. Gobannimo ciddii jilicsanayd looga gacan taagye
   Waxaa laysla wada gaadayaa gumuc rasaaseede
   Waxaan ahay nin laga gawracdoon gees riyaad jebine

7. Gurmago'anta laantaba marbay gudintu dhaaftaaye
   Wedkeedaan geline kuma hadheen geedka keligeede
   Waxaan ahay nin gobolkii dhintoy geesi nooshahaye

8. Geeridu xaq weeyee haddaan iilka lay gelinin
Amaan lay gambiyin haatanaan aarahay gudane
Godobteyda maqan inaan ka hadho waa hal soo gudhaye

9. Gari Eebbahay bay taqaan goobay joogtaba e
Guurtida hadduu xabashigii diiday waxay goysey
Dhulkuna ha gubtee waa inaan gamas ka qaadnaaye

10. Gurey iyo Amiir-Nuur, Bashiir geesigii Maxamed
Godka wayga soo eegayaan gebi ahaantooda
Haddii aanan geddodii sameyn gabay halkeygiiye

11. Axmaarada inaan dirir la galo goostay waayahane
Nabsi wuxuu gurguurtaba mar buu gacan ku siiyaaye
Guullaan ka sugayaa inaangobaha joogaaye

12. Gorgorkiyo waraabaha fadhiya Adari guudkeeda
Gacaliyo qareen baan nahoo ways af garannaaye
Gaajada ku raagtaan rabaa inaan ka gooyaaye

13. Gigta hore Hawaas waa inaan gebagebeeyaaye
Goojaam xaggeedaan rabaa inaan u guuraaye
Axmed Gurey halkuu gaadhay baan geeddiga u rariye

14. Dhallinyaro golaha buuxisoo gegada maanhaysay
Garab waxaad ka dhigataa markay geela dhiciyaane
Goblan weeye ciiddani haddaan loo dagaal geline

15. Gurmad adag colkii aan lahayn laga gol roonaaye
Gurta qalabka gaashaandhig bay gobi u aydaaye
Oo guubaabadaan wado Ilaah haydin garansiiyo

**SHARAXA IYO FAALLADA GABAYGA:**

1. HOORISKA KOOWAAD: waxa uu gabayga Maxamed ku halqabsaday, Bare Axmed Maxamed Qaadi la yidhaahdo, oo saaxiibkiis ahaa. Gufaacada iyo galuhu way isku dhowyihiin, waana laba dabaylood oo midkood (Gufaacadu) roobka la socoto.
2. HOORISKA LABAAD: Gaanka: biyaha guntooda, ama halka ay ugu badan yihiin; moolka: baaxadsooraha.
3. Gurijiifto: waa abgurida, abeesada: ujeeddadu waa haddii ay abeeso ku qaniinto, sunteedana ku gaadhssiso, dhaqso loogama kaco aakhirkana waa loo dhintaa. Sidaas oo kale, ayaa gumeystuhu mici ii la helay, boqontana ii gooyey. Boqonta: waa seedda canqowga iyo muruqa laba suulle isu haysa.
4. «Giribkii» waa cashuur ay Xabashidu dadka ka qaado.
5. HOORISKA LIXAAD: ninkii aan xoog lahayn, gobannimo loo diid, waxaana lala hortaagan yahay xabbad, haddii uu nuuxsado; laabta lagaga jiidaa. Anigana inta geeleygii la qashay; ayaanan weli rina gawricin.
6. Gurma-Go'antu: waa laanta geedka marka la gaaraco, ama la gooyo keligeed kuu soo hadha. Maxamed waxa uu sheegayaa in aanay labada gobol ee Soomaali markaas xorowdey wax weyn ka duwanayn laantaas keli geedka ku hadhay.

7. Guurtida: waa guddi Midowga Afrika dhexdhexaadis Xabashida iyo Soomaalida ugu saaray; hase ahaatee ay Amxaaradu diiddey.
8. Axmed Gurey, Amiir Nuur Maxamed, Sheekh Bashhir Yuusuf, iyo Sayid Maxamed Cabdulle Xasan oo dhammaantood ahaa geesiyaal gobannimada u soo diriray.
9. HOORISKA 12aad: waa in aan dagaal galaa oo ay haadda Adari joogtaa hilib ka dheregtaa.
10. Ninkii aan ciidan xoog leh lahayn laga adkaa, ee waa in aan dhammaanteen hubka qaadannaa.

**WEYDIIMO:**

1. Muxuu gabyaagu tixdiisa arar uga dhigay?
2. Muxuu saaxiibkiisa uu ku halqabsaday kula dardaarmay?
3. Hooriska 5aad, muxuu uga jeedaa gama'sanaanta? Waa ayo se nacabka guudka kà fuulay?
4. «Waxaan ahay nin gobolkii dhintay oo geesi nooshahay», muxuu uga jeedaa tuducaan? Faallo kooban ka bixi.
5. Hooriska siddeedaad, si kooban uga faallood.
6. Hooriska kow iyo tobnaad, muxuu dadka kula talinayaa?
7. Hooriska laba iyo tobnaad, shan iyo tobnaad, sharax kooban ka bixi.

## SINNAAN (SAAHI QAMAAN):

Saahid Qamaan oo gabyaagii waaweynaa ee Soomaaliyeed ka mid ahaa, gabayadiisiina xikmad, murti iyo aragti dheer lagu yiqiin baa gabaygan, madal shir lixaad lahaa isku arkay ka tiriyey. Shirkaas waxa lagaga wada hadlayey arrin nin madaxdii beesha ka mid ahaa oo lagaga cabanayey maamul xumo, caddaalad la'aan cabsi gelin, iyo cagajugleys.

Suldaankaas oo sida gabayga ka muuqata kalsoonidii iyo maamuuskii la siiyey kibir iyo madax kor-u-taag, ka qaaday dadkiina cagta hoosteeda in uu geliyo, caddaalad iyo sinnaanna ka dheereeyo ku tallaabsaday ayaa shirkaas shaatigii madaxnimada lagaga xayuubiyey. Qamaan waxa uu ka mid ahaa guddidii ninkaas arrintiisa loo saaray; go'aankiina waxa ay ku sheegeen gabay ay toddoba nin oo guddidaas ka mid ihi tiriyeen.

Gabaygaas oo dhami waa isku wada macne, hase yeeshee xarafka uun buu ku kala duwan yihiin:

Gabaygu waxyaalaha uu muujinayo waxa marka la soo koobo ka mid ah:

1. In sida qumman ee lagu dhaqmi karaa ay ku qotonto aqoon toosan, miyir, dulqaad iyo deggenaan.
2. Awooddeeda in aanay cidna ka tallabsan karin, ninna aanu waxa uu doonoba maroorsi ku marsan karin.
3. In dadka Soomaaliyeed iskaashi iyo naf-qaybsi weligoodba ku dhaqmi jireen.
4. Caddaaladda iyo sinnaanta in ay Soomaalidu hidde u lahaan jirtay. Qamaan waxa uu isaga oo saaxiibkii Dubbad Hiirad oo guddida ka mid ahaa ku halqabsanaya yidhi:-

1. Dubbadow nin maansada beryahan maadin baan ahay'e
2. Way iga madoobeyd halkiyo maalintii Sirawe
3. Manjagooye siduu noogu dhacay maagistii dhigaye
4. Ha yeeshee haddaan maago waan maamiyaa gabaye
5. Murti iyo adaan kugu ogaa miiganaan hadale
6. Iga maqal hal aan xalay mirkacay ama la maansooday
7. Haddaba waxa mudh soo odhan adduun hal aanu moogeyne
8. Waa tii shir laynagu makalay madansigii jaane
9. Maantana maxay noqon sidii Maxamed loo yaabye
10. Afartaa madkeeyaye sidii macallin maw sheegay
11. Mitan kalena waa wiilasheer maanka laga qaaday
12. Haddey sado macaan tahay ninkii maadiyaa cunaye
13. Nin mudmudey dharkayn hoosna maray mudhuxyey shaalleeye
14. Miyir waxaad ku weydaan is waal kuma mahiibtaane
15. Muslin kuma cabiidsamo wallaan madaxa kaa goyne
16. Muggii weel ma dhaafo e allaw mooska yaan jebinin
17. Mitan kalena waa aniga iyo mid iska sheegayga
18. Hadday muruqa geeduhu go'aan milayga jiilaalka
19. Mahwiga ceel haddii loo kacoo maalku ku arooro
20. Mataan waa ka qeybsada tolkii midha wadaagaaye
21. Magansiin haddaan layga siin maax la dhuranaayo
22. Inaan malab rag kale loo shushubi wax uga miideeyo
23. Oon meesha taagnahay anoon murudna leefeynin

24. Oon weliba mood iyo salaan ula maleegnaado
25. Oon maydhax aan igu xidhnayn maylimo u qaato
26. Saddex magac Allee xaajadaa layma marinsiiyo
27. Masaw aabbahay iyo intaan magan ka soo gaadhey
28. Rag waxaan ku maamuli aqaan ama ku maamuusi
29. Masa inaanu nahay oo tolnimo meerto noo tahaye
30. Oon weliba kaga miilcaddahay miidhse diiddaniye
31. Masallaha ninkaan ii dhigayn midig ma saaraayo
32. Ninkii aniga iga maarmi kara uma muraad yeesho.

## SHARAXA ERAYADA IYO TUDUCYADA:

1. Dubbad Hiirad waa saaxiibkii, waana nin gabyi jirey. maadi: mujin, tirin.
2. Sirow: waa meel dagaal ka dhacay magaceed.
3. Manjagooye: waa dagaalka Siraw ka dhacay magaciisa.
4. Maamiyaa: tiriyaa, curiyaa.
8. Madansigii: goobtii. Jaan: baasa. Makalay: dilay, Hoday.
9. Maxamed: Sayid Maxamed (Maantana maxay noqon arrintu, nin baa sidii Sayid Maxamed soo baxaye?).
11. Mitan: qodob. mawduuc: hadal kale.
12. Sado: oolaha Suldaanka marka la boqro la siiyo.
13. Haddii aan geed dharkeyn ah mudmudo oo caano ka keeno, dabadeedna is-hoos taago oo caanihiisa isu dhigo, waxa la hubaa inuu mudhxi doono oo caanuhu gubi doonaan.
18. Haddii uu jiilaal kaco oo ay geeduhu engegaan, dhulkuna abaarsado.
19. Mahwiga: Ceelka biyaha ee dadka iyo xooluhuba ka cabbaan.
20. Mataan: Ceelka, Maaxda.
21. Magawsiin: cantuujin, af muggii siin.
22. Miideeyo: dhuro, shubo.
23. Murud: in far dusheed lagu qaado.
24. Mood: ducu, iyo maamuus. Maleegnaado: had iyo jeer u taagnaado.
25. Maydhax boqornimo: «Taaj» . Mayllimo: warmo lagu ilaaliyo.
26. Layma marinsiiyo: ma yeelo, ma oggolaado.
27. Magan: waa Saahid awowgiisa saddexaad. Ujeedadu waa sidii aan aabbahay iyo awoowayaashay ka soo gaadhay ee ay yeeli jireen.
29. Tolnimo: wax istar, iskaashi. Meerto: marba nin wax tarka yeesho.
30. Miilcaddahay: gacan sarreeya. Miidh: quudhsi.
31. Masallaha: gogosha.

## WEYDIIMO:

1. Muxuu u yidhi: gabaygii beryahan waan iska daayey?
2. Waa maxaxy shirka lagu makalayo ee uu sheegayaa?
3. Waa ayo wiilasha maanka laga qaaday ee gabyaagu sheegayaa?
4. Nin mudmuday dharkeyn ... shalleey Muxuu tuducaan ula jeedaa?
5. Tuducyada iskaashiga ka hadlaya soo saar, dabadeedna si kooban u sharax?
6. Muxuu Qamann awoowayaashii kaga dayanayaa?
7. Gabayga tuducyo sinnaanta dadka ka hadlayaa ma ku jiraan? Waa kuwee?
8. Sidee bay sinnaan la'aanta, iyo caddaalad darradu ummadda u saameeyaan.
9. Dubbad Hiirad baa isga oo isla mawduucaas ka hadlaya yidhi: «Hadduu doobi buuxsamo, inuu daatana u dhowe».
   I Gabayga Qamaan tuducee baa kaas u dhigma?
   II Maxay labadaas tuduc ku tusayaan?

## QODKA GUBAN KA SOO KACAY:

**(Cumar Maxamed Warsame)**

Gabaygan waxaa tiriyey Cumar Maxamed Warsame loona yaqaan «Cumar Xiin-waal », Cumar waxa weeye nin muddo badan bare ka ahaa W. W. iyo Barbaarinta, kaddib markii uu 1971kii ka rukhseystay shaqada Dawladda, waxa uu ku wareegay Wakaaladda Ganacsiga Ummadda.

Gabaygan Cumar tiriyey 1968 dhammaadkiisii isaga oo jooga Hargeysa, markaas oo doorashadii ugu dambeysay waddankan loo tabaabusheysanayey; waxa uuna u diyaariyey nin saaxiibkiis ah oo markaa Tacliinta Sare u joogay Waddanka Mareykanka. Ninkaasi waxa uu ahaa Cabdiraxmaan Carte Qaalib oo hadda ka mid ah Waayeellada Dugsiyada Sare ee dalkeenna.

Gabyaagu waxa uu si fiican u taabanayaa saaxiibkiisa maqan xaalka waddanku markaa ku sugnaa. Waxa uu ku billaabay dhallinyaradii waddanku in aanay agagaarka qaadlaha ka dheereyn. Sidaas awgeed ay quus ka joogaan dadkoodii iyo dalkaba. Waxa kale oo uu u sheegayaa in gaajo, cudur iyo hoy li'i dadkii la liitaan, musuq-maasuq, qabyaalad iyo darxumo ay arladani ku caan tahay. Nimankii loo doortay in ay dadkan iyo dalkan daryeelaanna wax wanaag ah ayan waddankan u soo sidin, sidaa darteed ayaa uu Cumar saaxiibkii kula talinayaa in u dibeddiisa iska joogo inta la helayo wax isbeddel ah.

1. Nin qurbaa ku raagoo beryahan qaafilnimo haysay
Oo aan warkeen qabin ayaan qawl u dirayaaye
Qalin iyo waraaq baan rabaa inaad ku qaaddaaye
Qumaati ugu fiirso adeer qaladna haw yeelin

2. Sidii baan u qawlaysanaa qalo la'aantiiye
Waa qaabaddii aad ogeyd qaadku duhurkiiye
Sidii baan u qayraansanahay una qammaanaaye
Sidii baannu qaadhaanka shaah qayb-wadaag nahaye

3. Qayilka iyo goortuu barjuhu qayb u kala miirmo
Naftanaa qisaas baratay iyo qahar habeenkiiye
Hoy noo qarsoon baan sidii ugu qaxaynaaye
Dhaamka(l) qoorigiisaan sidii uga qoslaynaaye

4. Qaanbaan u halis nahay sidii quruxi yeelkeeda
Qorraxdiyo kolaylaha dar uu dheehu qolofaystay
Oo saan qombobay baan sidii qaran wadaagnaaye

5. Sidii baan qalfoofkii u nahay qaro yaraantiiye
Qalbigiyo sidii baa wajiga qiiq ka karayaaye
Qaaddiro sidii baa indhuhu nala qaloocaane

6. Qaawanaan sidii buu derbiga qubane jiifaaye
Qado li'i sidii bay wax badan maalmo qadayaane
Roob soo qubtiyo sidii baa baraf u qooyaane
Qufac iyo sidii bay darxumo weli qandhoodaane

7. Sidii buu nin qalab doonayaa noo qaribayaaye
Sidii buu karmiiciga hadhuudh noogu qaybshaaye
Qoys caydha waa caadadii qeedhiin uu cuno e
Sidii buu u qaataa shacbigu cadihi quudheede

8. Sidii bay qabiiladu carradan qiimo leedahaye
Qoontii habtii iyo gar baa laysku qirayaaye
Qudha waxay ka gooyaan ninkii qaalmo soo dhaca'e
Sidii baan u kala qaybsannoo qolaba meel taale

9. Nimankay degmadu qaayibtaa sharafka loo quudhay
Qawsaarradaan dooranee libin u qoondaynay
Qaantiyo dhulkii maqan raggaan qira-tusaalaynay
Waxay qoodh ahaayeen marka hawd la qabanaayo
Iyagoon Qardhaba gaadhin buu baalku qoyayaa
Sidii baa qamiiskii duliga qoorta loo sudhaye

10. Nin qabaw sidii baa Cabdow loo qatalayaaye
Qaw baan dulnaallaa sidii qabar na hoosyaalle
Qorma layska seegiyo xumaa qodob ka joogaaye
Qawl dibed ka yimid baa sidii loo qaddariyaaye

11. Waxba hadalku yuu iga qasmine waxaan ku soo qayday
Qaaq baa dhulkii taagan iyo qaylo aan damine
Waa bakayla qalad oo ma jiro qurus xalaaleede
Maatada qaraabaysataa qadisey reerkiiye
Qiiruu ninkii dhiig lahaa qulub la luudaaye

12. Waa qudh iyo qoys dawladdoo loo qabaanaaye
Rag tirsani qiyaas li'i intuu gelin qadhiidhaayey
Qasnad dadku leeyahaan shilin ku qooleyne
Waayeel qorsheeyiyo ma jiro duq iyo qaangaadhe
Quwaddeennu waxay saaran tahay qaalin layliyah e

13. Qoomiyaddaad beri ogeyd qaamudkeed dhimaye
Qool dabin ah xeel iyo tabaa laysu qariyaaye
Maalay qadhaadh iyo intaa dacar la qooshaayo e
Waxa lays qudhqudhiyaa sun iyo dhiro qalaadeede

14. Qodka guban ka soo kacay intaan yara qiyaasaayo
Maanta qaran jab weeye intuu Eebbe qiil furayo
Yuraaniyam ku qaadhiyo intaan dheemman qodanaayo
Qewed waa belaayee intaan taxal qaboobayno
Qurbahaaga joog ciiradaad kaga qarsoonaane

(1.) Biyo xidheen xagga waqooyi galbeed ka jira, xagga magaalada Hargeysa, beryahaanna dhallinyaradu ku soo ag madadaaloon jirtey habeenkii.

**LAYLI:**

b) Muxuu gabyaagu ku tilmaamay dhallinyaradii markaa joogtay? Si tifaftiran uga faallood.

t) Kaalintoodii ma buuxsheen?

j) Dhallinyarada hadda joogtaa ma ka duwan yihiin?

Sheeg sababo.

2. Tilmaan dhibaatooyinka iyo darxumada haystay dad badan oo Soomaali ah ee uu gabyaagu sheegay?
   b) Waa ayo ninka qalabka doonayaa. Tuduca 25aad?
   t) Sidee buu u xumaynayaa dadka?

3. Sidey qabyaaladdu ku ahayd waddanka?

b) Maxay ahaayeen dhibaha ay keeni jirtay?

4. Tuducyada gabayga laga soo xulay sharax.

b) Qoonkii habtii iyo gar baa laysku qirayaaye (30)

t) Qaawanaan sidii buu derbiga qubane jiifaa e (21)

j) Qaantiyo dhulkii maqan raggaan qira tusaaleynay (35)

x) Rag tirsani qiyaas li'i intuu gelin qadhiidhaayeye (49)

kh) Qodka guban ka soo kacay intaan yara qiyaasaayo (57)

**SHARAXA:**

1. Qurbaha: qurbaha waa dalalka shisheeyaha. qaafilnimo: ogaal la'aan.
2. Qawlaysanaa: wax u dhacnaa. qalo la'aantii: qalo la'aani waa cid walba iska raacid.
6. Qaabaddii aad ogeyd: sidii aad ogeyd.
7. U qayraansannahay: u kululnahay, u qamaannaa: qkululnahay, u qamaannaa: qaadka u daba orodnaa.

«Waxa lays qudhqudhuyaa sun iyo dhiro qalaadeede»

8. Qaadhaan: waa xoolaha la ururiyo.
9. Barjuhu: waa qayilaadda. qayb u kala miirmo: aad loo marqaamo
11. Hoy: waa aqal; ugu qaxay: ugu cararaynaa
12. Qoorigiisa: hareerihiisa
13. Qoomiyad aad beri ogeyd qaamudkeed dhimaye
Qool dabin ah xeel iyo tabaa laysu qariyaaye
Maalay qadhaadh iyo intaa dacar la qooshaayo
14. Qodka guban ka soo kacay intaan yara qiyaasaayo
Maanta qaran jab weeye intuu ebbe qiilfurayo
18. Qaaddiro: hurdo la'aan
19. Qubane: wuxuu uga jeedaa dibjirka
23. Nin qab doonayaa: nin doorasho doonaya
24. Kirmiici: waa hadhuudhkii Mareykanka
25. Qaydhiin uu cuno: wuxuu uga jeedaa dhuuni aan sharaf lahayn.
26. Cadihi quudheed: adduunkii yaraa ee lagu gumeynayey
28. Qoonti: nabarkii, Habtu: dhabtii waxay ahayd sano dad badan kaneeco madhisay oo fogeyd (macnaha guud waxaa weeye, qabiiladii haddey ugu xun tahay oo waxa laysu sheeganayaa nabarradii sannadihii habtii ee fogeyd laysu gaystey).
31. Degmadu qaayibtay: Soomaalidu aamintay, Qawsaaradaan doorannay: madaxdaan doorannay ee aan wanaag u fileynay.
32. Qira-tusaalaynay: aad uga dhaadhicinay. (33, 34, 35) saddexdaa tuduc, waxa uu gabyaagu uga jeedaa nimankii aannu barlamaanka u dirannay ee aannu doon-

aynay in ay waddanka waxa u qabtaan iyaga oo aan Xamarba gaadhin ayaa isbeddel ku dhacayaa oo ay beeneynayaan wixii ay ku ballan qaadayeen markii ay reer miyiga doorashada ka doonayeen.

35. Nin qabow: nin nacas ah.

36. Qaw: gebi dheer, Qabar: balaayo.

41. Waa bakeyle qalad: baahi darteed bay dadku u cunaan wax ay ka caagganaan jireen oo tuugo iyo wax la mida ku kacaan.

42. Maatada: carruurta iyo haweenka, qaraabaystay: qaraabannimo u soo martiday.

43. Qiiro: ciil, Qulub: murugo.

## AFKU WUXUU LA XOOG YAHAY MAGLIGA

## (SALAAN CARRABEY)

Salaan Carrabey gabaygaan waxa uu mariyey isaga oo magaalada Nayroobi jooga. Halkaas oo uu nin uu adeer u ahaa oo uu abaal badan u tirsanayey, ugu tagay.

Ninkaas oo markaas maalqabeen weyn ahaa ayaa halkii uu odayga wax ka tari lahaa; inta uu qadiyey haddana dadkii kale ee Soomaaliyeed ku diray oo yidhi «Waa oday asaasaqay ee ha la hadlina».

Salaan gabaygan waxa uu ku sheegay saddex arrimood oo waaweyn oo uu ninkaas waxtar weyn ugu geystay mar waxa uu ahaa: Iyada oo ninkaas iyo geeliisiiba col isku afduubay oo uu Salaan oo col wata u gurmaday oo isaga iyo geeliisiiba soo furtay. Marka labaadna waxa uu ahaa iyada oo ay ninkaas Dawladdu xirtey oo uu Salaan dood iyo maalba ku furtay. Marka saddexaadna waxa uu ahaa iyada oo ninkaas laftiisa naag uu xoolo ka bixiyey laga qaaday ama laga qabsaday; oo uu Salaan u soo furtay markii uu gar nimankii gabadha dhalay la galay.

Salaan waxa uu isaga oo arrimahaas oo dhan sheeganaya; abaal dhaca wiilkana hibanayey, yidhi:-

1. Qaylada xaduurkii ninkay xaraqday laabtaydu
2. Xusul duubka orodkii ninkaan dhab ugu xuurtoobey
3. Jillabkii xadhaadhaa ninkaan ugu xajiimoodey
4. Guuraha xambaarada ninkuu xagarku ii jeexay
5. Xidhkii Odayadheerood markii rag is xiniin taabtay
6. Xaraamigii Olol markuu xilafur kaw siiyey
7. Waa taan u xuubsaday sidii xuurta baalka lehe
8. Xarbigii shisheeyaha ninkaan xeebashada diidey
9. Dumarkuba xublada foosha way xanaf wareeraane
10. Balse in ay xusuus daran yihiin xaylka kale mooge
11. Waxba yannu xeerkay i marin xoolana i siine
12. Xaashee nin libin kaa xistiyey xumihii waa yaabe
13. Xeerbeegti murantaa gartay xeelli hadashaaye
14. Xubin rag isku waajahay hadday xayga ka caddaato
15. Afku wuxuu la xoog yahay magliga xawda kaa jara e
16. Xafiiskii magaalada wixii xaalad igu gaadhay
17. Xabsigii cadaawaha ninkaan xaalan uga saaray
18. Xoolaha markey timid ninkaan xulayey geeleyga
19. Waxba yaanu xeerkay i marin xoolana i siine
20. Xaashe nin libin kaa xistiyey xumihii waa yaabe.

1. Ninkii aan maalintii isaga iyo geeliisiiba la isku afduubay qaylada iyo muusanowga dadka kula dhacay, ilaa ay laabta iyo hungurigu i engegeen sidaan orod iyo muusanow ugu jirey.

2. Ninkii aan raacdadiisii jillabka iyo xagarka habeen badhka u jibaaxayey aniga oo aan xajiin iyo xagtin midna ka waabaneyn.
3. Ninkii maalintii aan isaga oo Olol u xidhan meesha Odayadheer la yiraahdo Olol dhaartay; anna afka kaga boobay ee sida xuurta dusha u laacay.
4. Ninkii aan dagaalka shisheeyaha awgii ugu badheedhay ee aan cabsi iyo naf jecleysiba uga dheeraaday. Miyaa maanta sidan iigu abaal guday?
5. Haweenka marka ay fooshu xanuujiso ayey hibtaan oo yiraahdaan allay leh mar dambe wax xanuunkan oo kale kuu keena iska ilaali; haddana marka ay caadada kale helaan bay xanuunkii hore halmaamaan. Isaguna waa sidaas oo kale.
6. Nimaad wax tartay oo kaa abaal dhacay, wax sidaas u sii weyn ma aha; ee waxa aad u qalafsan oo aanad ka samri karin nin wanaag aad leedahay qariyayoo ceeb iyo cay kuugu beddeley.
7. Aftahamadu ableyda (toorreyda) kama dhacdo ee waa la mid, haddii gole lagu garnaqsanayo la isugu yimaado. Taasna waa tii aan u galay markii la xidhay ee gaalku xabsiga ku tuuray.
8. Markii gashiga lagu yeeshay ee xoolaha laga doonayey, geelaygii baan haliba hashii ay ka wanaagsanayd soo saaray oo ka bixiyey.

**SHARAXA EREYADA:**

1. Xaduur: baryo ama wax weydiisasho isdaba joog ah. Xaraqday: gubtay (Salaan gabayadiisa afafka Carabiga, Hindiga iyo Ingiriisiga ayuu ku daraa).
2. Xuurtoobay: daalay; weydoobay.
3. Jillab: magac geed. Xadhaadhaa: qadhaadhaa.
4. Xagar: magac geed.
5. Xidh: kob. Odayodheer: meel magaceed. (waa meeshii geela iyo wiilka lagu gaadhay). La is xiniin taabtay: rag isu badheedhay.
6. Olol: waa ninkii colka inanka iyo geela kaxaystay watay. Xilafur kawsiiyey: dhaar tuuray.
7. U xuubsaday: ku booday. Xuurta: shimbir.
8. Xeebashada: cabashada; baqdinta.
9. Xanaf: xanuun.
12. Libin: magac; ammaan. Xistiyey: xaasiday, kuu diiday.
13. Xeerbeegti: guurti; gar yaqaanno. Xeelli: cilmi ahaan.
14. Waajahay: isu badheedhay; is hor fadhiistay. Xayga: ubaxa, manka.
15. Magliga: ableyda; toorreyda. Xawda: nafta.
17. Caddaawaha: gaalka. Xaalan: deg deg.

**WEYDIIMO:**

1. Si kooban u sharax tuducyada ka hadlaya:
   b) In uu inanku Salaan ka abaal ka dhacay af iyo gacanba.
   t) Illowshii iyo dhawaanta wiilka

j) Sida uu odaygu afkiisa wiilka ugu furtay markii uu xidhnaa.

2. Immisa waxtar buu odaygu gabayga ku sheegay. Mid kastaba goonidiisa u sheeg.
3. Afku waxa uu la xoog yahay magliga xawda kaa jara'e ma kula tahay in uu tuducaasi run yahay. U eeg colaadda dawladaha adduunka qaarkood ka dhexeysa.

## GOGOSHA HAY GEYNIN: (QAMAAN BULXAN)

Gabaygan waxa curiyey gabyaagii weynaa ee Qamaan Bulxan. Waxa dhacday in ay gabadh uu Qamaan qabay mar reerkoodii u soo dhibaad doontay; ama u soo socdaashay ka dibna war been ahaa la fidiyey oo la yiri, Qamaan wuu dhintay. Sidaas darteedna gabadhii la guursaday.

Qamaan warkii buu aad uga xumaaday, waxaanu ka tiriyey gabayo badan intii aanu xaaskiisii mar labaad u soo noqon. Gabayadaas waxa ka mid ahaa, kan soo socda, oo uu nin saaxiibkii ahaa oo Heybe la odhan jiray oo isaga oo maalin socdaal ahaa inuu marti qaado damcay; ku halqabsaday; waxa uuna yidhi:-

1. Gartay weeye Haybow inaan gorodda laadshaaye
2. Waxba gogosha hay geynin hurdadu waygu gebileeye
3. Rag wax gaadha gabadhuu qabay oo guurna lagu sheegay
4. Iyo gamas mariid leh oo u galay goonjigii hilibka
5. U gudboone labadaa hal buu gama' la diidaaye
6. Aniguna geddii baan ahaye gogosha hay geynin
7. Lo'dii miirtii shalay goosataye gaawe laga waayey
8. Ee gaadh istidhi baan ahaye gogosha hay geynin
9. Geenyada baqtiday kii arkaye gudub u raad gooyey
10. Ee goobay madaxaan ahaye gogosha hay geynin
11. Nimay qaaxo feedhaha gashay oo malaxi gaasheysay
12. Hadduu gama' yiraah maydhaqaan gocasho deyneyne
13. Wed guddoonsey saadkana ninkaas guraya weeyaane
14. Aniguna geddii baan ahaye gogosha hay geynin.

### SHARAX GUUD:

Haybow, waa shay ii gar ah inaan hogtaa, oo madaxa hoos u rogaa; adiguna waxba gogol ha ii dhigin; hurdaduba waa igu yar tahay oo ii ma timaado'e. Maxaa yeelay:

Rag laba arrimood uun buu midkood hurdada uga go'aa oo la gama'i waayaa. Kuwaas oo ah, iyada oo afadiisii u mehersaneyd nin kale iska guursado; iyo iyada oo gantaal sumeysan lala helo oo ay jidhkiisa ku barido.

Anigana taa oo kalaa i heysata ee gogosha iga daa.

Waxa aan la mid ahay lo'dii balliga xareedda ah intii ugu dambeysay shalay oo kale fuuqsatay ee isaga oo madhan ka timid, ee haddana maanta ku aroortay, ee garan weyday meeshii biyo kuma jiraan.

Waxa aan lamid ahay ninkii geenyada luntay raadkeeda ku joogay; ee iyada oo bahal cunay raqdeedii isa soo dul taagay ee haddana raqda hareeraheedii soo goobay bal in raadkii meel kale u baxay! ama sii socday!.

Haybow nin ay qaaxo feedhaha goysay iyo hurdo waa ay kala fog yihiin; maxaa yeelay: laabta iyo feedhaha ayaan kolaba damqashada deyneyn. Geeri wuu god-doonsaday, hase ahaatee, gaws (cunto) ma daayo. Aniguna tabtaas baan ahaye waxba gogol ha ii dhigin.

## SHARAXA ERAYADA:

1. Gorodda laadsha: madaxa fooroiya; hoos u dhigaa.
2. Gebiley: diiq; yar tahay.
4. Gamas: waran. Mariid: sun; waabeeyo. Goonjiga: bartamaha; dhexda.
6. Gaddi: tabtii; sidii oo kale.
7. Miirtii: maaxdii; intii u dambeysay; gororkii.
11. Gaasheysay: feedhaha buuxisay.
12. Maydhaqa: dhinaca. Gocasho: damqasho.
13. Wed: geeri. Saadka: cuntada.

3. FAALLO:

b) Tusaalayaasha gabaygan ku jira, sida geenyada iyo lo'da waxa ay leeyihiin sheekooyin ku soo aroora oo ula jeeddooyinkooda la xiriira: Adiga oo barahaaga iyo dadka kaleba la kaashanaya, raadi sheekooyinkaas iyaga iyo ula jeeddooyinkoodaba.

t) Tuduc kale oo gabaygan ka mid ah, waxa uu Qamaan ku yidhi «Guska iyo xiniinyaha ninkii laga garaadeeyey; gadaalkiina rooraan ahaye gogosha hay geynin».

j) Sharax Tuduca.

x) Soo saar ula jeeddada ka dambaysa.

## WAR TOLOW COLKA JOOJA (SALAAN CARRABEY)

Geeraarkaan waxa curiyey gabyaagii weynaa ee Salaan Carrabey, markii uu laba col oo Soomaali ahaa, oo dagaal dhex marayey in uu dhiiggooda ku kala guntado rabay. Salaan labadii ciidan oo is-hortaaganaa; hubkiina isku diyaarsaday buu is kala dhex taagay oo geeraarkan ka tiriyey; waxaanu ku guuleystay in uu nimankii dagaalka guubaabinayey, iyo hormuudyaashii labada ciidanba wax dhacsiiyo oo dagaalkii halkaas isku taago.

Salaan geeraarkan waxa uu tusaale ugu soo qaatay dagaallo hore oo kaas la mid ahaa, rag badanna lagu qudh gooyey, haddana aan guul darro iyo hoog mooyaane wax faa'iido ah laga dheefin. Waxa uuna kale oo u tusaale ka bixiyey in aan cid kasta oo faro iyo xoog istaawisaa Soomaali dhexdeeda lib iyo magac toona colaad iyo dil kaga soo hoyineyn. Geeraarku halka kuma dhamma ee waa la soo gaabiyey; waxa uuna yidhi:-

— Nin Caloolacad joogay oo
— Meygaaga ciidan warqaatey,
— Waa cibaaro qabaayoo,
— Belaayuu curufkeediyo,
— Camalkeeda yaqaanne,
— Waar tolow colka jooja.

— Nin habeenno casheeyey
— Cadar aan hadh lahayn iyo,
— Ceeryaameys ugu toosta oo,
— Inuu caafiyaddiisa,
— Cabbaar meel la fadhiisto,
— Caqligaanay geleynne,
— Waar tolow colka jooja.

— Carrabkaan ku hadlaayona
— Nin caleentii caddaatiyo,
— Caamadaan garaneyn oo,
— Markay cuurar dhintaane,
— Cutub weyni idlaataa,
— Lays canaanan hadhowe,
— Waar tolow colka jooja.

— Intee baad cantarteenoo
— Cunkada aydin marteenoo,
— Meydkiinnii camirraaye,
— Candhadheerta dhurwaa iyo,
— Ciidda haaddu uu jiiddey,
— Iyo cuqdudkii ka baxdeen,
— Oo cosobkii balanbaal iyo,
— Caleentii karamaan iyo,
— Caynaba soo gudhsateenoo,
— Cambartii geela dhaleysiyo,
— Adhi baa ceegan guryaaye,
— Waar tolow colka jooja.

— Nin carruuriyo maatiyo
— Caalli reero la yaal oo,
— Is cufaaya golaa oo,
— Cararaaya hadhow iyo,
— Nin colaad talinaaya oo,
— Caadeystaa idinka buuxee,
— Waar tolow colka jooja.

1. **SHARAX GUUD:**

Labadiinan col ee isu qalab guranayow, waxa aan ahay nin waayo arag ah, oo labadii goobood, Meygaag iyo Caloolacadba joogay. Colaad iyo dagaalna camalkooda iyo raad-reebkooda ka war haya baan ahay ee i maqla oo dagaalka jooja.

Waa arrin weligeedba soo taxnayd oo nin haddii uu ayaamo dhereg iyo ladnaan ku waabariisto kibir baa kabaha u geliya oo kac oo wax korodhso yiraahda. Idinkana kii baa idin wada; e dagaalka jooja.

Hadalkan aan idin leeyahay; nin ay haddiisii gashay oo hadhuubkiisii buuxsamay, iyo jaahil aan waxba kasayn buu ka qarsoon yahay, ee marka rag badani dhinto, reerona rogmadaan baa goor aanay canaani waxa tarin la is hiifi doonaaye, waar hoy dagaalka jooja.

Muddo dhoweyd baad kibirteen, oo cirka marteen, oo ragiinii ay dhurwaaga iyo Haaddu marka la laayo cuni jireen, iyo ciriirigii nabadgelyo la'aanta daaqdeen; xoolihii geel iyo Adhiba xeryaha idiin buuxiyeen, ee waar hoy dagaalka jooja.

Rag maanta idiin talinayaa, waa carruur, aan waxba ogeyn iyo doqon fuley ah oo hadhow cagaha wax ka deyaya iyo gacan ku dhiigle Colaadda caadeystay; ee waar hoy yaaney kuwaasu idin dagin ee dagaalka jooja.

2. **SHARAXA ERAYADA:**

1. Caloolacad iyo Meygaag: laba meelood magacyadood. Caloolacad waxa isku diley labadan qolo midkood.
2. Cadar: hoosiis; daruur xagaa.
3. Caleentii caddaatay: cimrigiisii dhamaaday, hadhuubkiisii buuxsamay. Cuurar: culub : dad badan; guutooyin.
4. Cantarteen: kibirteen. Cunkada: samada.Cuqdad: ciriiri. Balanbaal iyo Cayn: meelo magacood. Ceegan: buuxa.
5. Calli: doqon. Iscufaya: madaxa kor u taagaya.

## GAMMAAN FARAS (AXMED SULEYMAAN BIDDE)

Heestaan waxa curiyey Abwaanka caanka ah ee Axmed Suleymaan Bidde, la yiraahdo. Axmed waa hal abuure aad loo wada yaqaan, waxa uuna ku sii xeel dheer yahay hal-abuurka heesaha, siiba kuwa sifeynta dabeecadda iyo kuwa jaceylka.

Waxa kale oo Axmed Suleymaan loo doonaa; dhismaha Riwaayadaha, iyo isku dubbaridkooda.

Heestan Jaalle Axmed waxa uu kaga faallooday saddex shay oo dhaqanka Soomaaliyeed meesha ugu sarreysa kaga jira; kuwaas oo ah dhirta,fardaha iyo biyaha; waxa uuna yidhi:-

1. Sida geed caleenloo ubax guudka qariyeen
oo goonni laamaha; ay midiba geesteed
hoobaan isgaadhiyo guntin midho ah leedahay
oo soo gandoodoo galka faraqa soo daray
oon gu' iyo jiilaal midba guurin baa tahee

    Gabadh yahay, kal gacal baad goortaan
    ku eegaba qalbigeyga gelisaa
    waxse aanan garaneyn, ii gunudday
    caashaqee halka aad i gaadhsiin

2. Sidaa tahay gammaan faras, senge geesi daaqsaday
oo uu haro galduur mirey soddon bil iyo gawdeed
oo uu goobay farawgii sararta iyo gaaddada
oo galangalcooboo cududuhu gamuurmeen
oo galaba loo raro sida ramad gu'yaal dhalay
hadba keento geedo leh
oon guluf colaadiyo weli socoto dheer gelin

    Gabadh yahay kal gacal baad, goortaan
    ku eegaba qalbigeyga gelisaa
    waxse aanan garanayn ii gunudday
    caashaqee halka aad i gaadhsiin

3. Oo gubanka qaarkii dhul gargoorku siman yahay
ama maadh galdhiidhay oo gubatiyo ku taal hawd
oo laba gardhowdoo qaarba «badhba» gees u seexdeen
dharabka iyo geedaha quruxdooda gaarka ah
ama haro gingimanoo guudka ka xarfanaysoo
shimbiruhu ka giigeen
galowgiyo ugaadhuna goonyaha ka joogaan

    Gabadh yahay kal gacal baad goortaan
    ku eegaba qalbigeyga gelisaa
    waxse aanan garaneyn ii gunudday
    caashaqee halka aad i gaadhsiin.

### SHARAXA ERAYADA IYO TUDUCYADA:

1. Soo gondooda: soo foorora. Gal: balli. Faraqa: baarka.
2. Haro galduur: waa haro hawdka ku taal, oo marka roob da'o biyo iyo baad duunyo ku deeqda. Mirey: daajiyey. goobay farowgii: baruurtii buuxisay. Galangalcoobay: baruur la socon waayey; buuxsamay. ramad: geel markaas dhalay. Gu'yaal: xilli Gu'.

3. Gargoor: geed cawseed dooxooyinka ka baxa. Dadka qaarkiisna waxay u yaqaanniin gargaro. Maadh: geed cawseed harrarrada ama cawska laga samaysto. galdhiidhay: biyo ama rays badan ku baxday aadna u balliidhay. laba gardhaw: aad u baxday; ballaadhsatay; kala seexatay. haro gingiman: haro buuxda. xarfaneysa: calcalyo ah; neecaawi ku dhaceyso. ka giigeen ka dhergeen. goonyaha: hareeraha.

## DAKANO IGA MAQAN (AXMED MAXAMED QAALI)

Heestaan waxaa curiyey Axmed Maxamed Qaadi sannadkii1967, markii gumeystaha Faransiisku Xeebta Soomaaliyed ee Jabuuti siligga ku wareejiyey dadkana sida foosha xun u gumaaday. Aftidii dadku bixiyeenna uu qas iyo musuqmaasuqa ku daboolay. Jaalle Axmed Maxamed waxa uu isaga oo xeebta, hal daruur la yiraahdo oo laga dhacay ku tilmaamaya yidhi:-

| | |
|---|---|
| 1. Daruuree hashaydaa | |
| Degel weyne jiilaal | |
| Hawdka daajinaayee | |
| Hadba dooxa cawska leh | |
| Sahanka ugu dirayeye | |
| 2. Hashaan awrka deebta leh | Baarqabka |
| Guga dirirkii cawleed | |
| Dabarka uga furayee | |
| Uu ku daloobiyaaye | ku daloommiyey: ku qooqay |
| Digtii hore la booddaye | digtii: tifdii hore |
| 3. Hashaan dayro dhaafkii | dayro dhaaf: jiilaal; abaartii |
| Xerada u dugsiyayee | |
| Daacuflaha libaaxiyo | |
| kaga deyrey dhaxantee | |
| Anna dibadda seexdaye | dibadda seexday: gaadka ka qabtay; ilaaliyey |
| 4. Kulkuu gu'gu daroortiyo | |
| Soo celiyey di'isteen | |
| Anna doobiga u culay | doobiga: hadhuubka |
| Hashii iga dibootee | dibootey: dibjirtay |
| Nacab iga af duubaye | |
| 5. Daruuree hashaydaas | |
| Dooxada agtayda ah | |
| Ku dareertay saakee | Xigsin: waqtiga mar labaad |
| Durba ku xigsimootee | ka godlato ayaa la yiraahdaa |
| Ka dunuunucaysay | guuxaysa, reemeysa |
| 6. Hasha tobanka deeqdee | |
| Murkaha daafta marisee | hadhuubka buuxisa |
| Laga duugo xoorkee | laga liso xoorka |
| Dambarkeeda urayaan | dambar: caanaha marka dhalmo cusub yahay |
| Anna ku ag dibjirayee | |
| 7. Dakano iga maqan aan | maal la iga dhacay |
| Lala tegin dal dheeroo | |
| Daaqis dhow ku foofto | daaqsimo: meesha xooluhu soo daaqaan kana |
| soo noqdaan | |
| Dunjigeedu muuqdoo | dunji: bidhaan muuqaal |
| Misna iiga dahsoonee | dahsoon: qarsoon |
| 8. Duudsi inaad ahaataa | duudsi: dhac ku maqan |
| Darxumada ku raagtoo | |
| Kii dabarka kugu xidhay | |
| Ifka nabad ku daaqsado | |
| Dib u eegan maayee | |

9. Haddaan shalayto dib u dhacay
Saakaan daban ahoo
Degta waranka saaroo
Kuu soo degdegayaa
Adiguna diyaar noqo

**WEYDIIMO:**

1. Waa maxay hasha uu hal abuuruhu ka hadlayaa?
2. Yaa ka dhacay hasha uu sheegayaa?
3. Muxuu shayga uu ka hadlayo iyo hasha isu garab dhigayaa?
4. Waa maxay dakanadu, sidee baa loo soo ceshan karaa?
5. Maxaad u malaynaysaa inuu sida uu sheegayo, Shalay u daahay, maantana diyaar u yahay?
6. Ma kula tahay in ay dhaartiisii dhabowday ama in ay dhabowdo ku dhowdahay?
7. Muxuu hashiisa ka codsaday in ay samayso?
8. Ma yeeshay hashu sidaas laga codsaday?

## HABBOON (MAXAMED CUMAR)

Heestan oo ka mid ah heesaha jacaylka ee aad loo jecel yahay wuxu abwaanku u xog sheeganayaa tan u hillacday oo uu jacaylka haya diirka uga caddaynayaa kana codsanayaa in ay hawlaha la dheelli tiro. Maxamed Cumar ayaa heesta curiyey.

Sida hogasha roobka
Ama hillaac guyuu da'ay
Hoobaan bislaatiyo
Hara wada biyeysan
Oo lagu hayaamoo
Hubaal sahankii uu raray
Wuxuu sii hitiqiyaba
Hadda halacsi loo jiro
Habbooney naftayda
Higsi baad ku noqotoo
Adaa ii hiraayee
Haddaad diido hadalkayga
Habeen wacan nasiibkayga
Halkaygaan ku sugayaa
Hanfi iyo dabaylbaa
Isku kay hadheeyoo
Sida hawtal hamaggaa
Habaq iiga baxayaa
Haddaan haysto taladaa
Hiboy kaama hiisheen
Kuu hooda sheegtee
Haween haygu noqonine
Waxaan hiili noqon laa
Halistiyo dhibaataan qabo
Adoo iga horjoogsada
Haddaad diido hadalkayga
Habeen wacan nasiibkayga
Halkaygaan ku sugayaa
Hannaanka iyo quruxdaan
Hiboy kugu jeclaadoon

Hablahaad u sidataa

Haybaddiyo asluubtee

Ku hamiyey dartaayoo

Habeen socod ku waashoo

Waxaan heedadaabaa

Hawadaa sareetee

Adoo iga horjoogaa (Hooris)

Haddaad diido hadalkayga

Habeen wacan nasiibkayga

Halkaygaan ku sugayaa.

**LAYLI:**

1. Si fiican u sharax ujeeddada abwaanku ka soo araranayo afarta tuduc ee u horreeya.
2. Muxuu abwaanku uga jeedaa tuducda «halista iyo dhibtaan qabo» ?
3. Ka soo saar tixaha heesta tuduca uu abwaanku ku tilmaamayo hubqaadka gabadha.
4. Ka faallood habka haasaawaha heesku u allosmay?

**SHARAXA ERAYADA:**

Lambarku waxa uu sheegayaa erayada ama tuduca la sharaxayo.

2. Hoobaan bislaatiyo: midho bislaadiyo
3. Lagu hayaamay: lagu guuray
4. Sii hintiqiyaba: sii luudiyaba, hadda halacsi loo jiro: imminka bidhaan arag loo jiro
5. Tiigsi: higsi, Hiraaya: muuqanayaa
6. Hanfi: kulayl
9. Hawtalhamag: nacas, Hadaaq: waa hadal aan ujeeddo lahayn
11. Kuu hooda sheegtee: kuu dano sheegtee
12. Hiil: gargaar
16. U sidataa: u fiican tahay
18. Waxaan heedadaabaa: waxan dhacdhacaa.

## HUD — HUD (HADRAAWI)

Heestan la magac baxday «Hud-hud» waxa curiyey abwaanka caanka ah Maxamed Ibraahim «Hadraawi» waxaanuu ka dul tiriyey xabaashii marxuunkii Cilmi Boodhari ee u dhintay hurgumadii jacaylka. Abwaanku waxa uu ku wareysanayaa marxuunka sida uu yahay, iyo halka ay isaga iyo jacayl kala joogaan.

1. Boqorkay huq iyo ciil
Hagardaamo lumisow
2. Hadimada kalgacalka leh
Cilmigii u hoydow
3. Hawraarta maansada
Iyo hoga tusaalaa
4. Heesaha baroorta ah
Halqabsiga jacaylkow
5. Hambalyiyo salaan iyo
Hibo iga guddoonoo
6. Kolley waan hubaayoo
Hawlihii adduunyada
7. Heshay aayahoodee
Hal yar aan toydee
8. Jannadii ma hurudaa?
Hadh qabow ma jiiftaa?
9. Hoobaan ma gurataa?
Hablo xuura caynii
10. Sow kuuma heesaan?
Waxa aad la haysaba
11. Hoo kuma yidhaahdaan?
Hor Ilaahay adigiyo
12. Hodan maysku aragteen?
Maysdhaafsateen hadal?
13. Bal maxaan haweenkiyo
Dumur ugu hiloobaa?
14. Ama kula heshiiyaa
Ugu hagar la'aadaa?
15. Sowtay hir beeniyo
Hogol aan da'ayniyo
16. Haro aan biyo lahayn
Hanfi kuu aroorsheen
17. Adigoo harraad qaba
Hiyigaaga kiciyeen
18. Sowtay ku hawleen
Hengelaha ku saareen

19. Hammi kugu abuureen
Hurdo kaa kaxeeyeen

20. Gudcur kugu hilaabeen
Hogga kugu dabooleen

21. Hore kuugu tuureen
Haadaan ku geliyeen

22. Hoos kuugu tuureen
Sowtay ku heereen

23. Ku jareen halbowlaha
Bacad kugu halgaadeen

24. Ciidda kaaga hoydeen
Ku dhigeen habaaskee

25. Hororkiyo waraabuhu
Hilibkaaga feenteen

26. Haadda iyo xuunshadu
Hanbadaada jiiteen

27. Waxan ugu habranayaa
Hooyaa ka dhalatoo

28. Naaskii habreedbaa
Iga hiillinaayee

29. Wallee hawlahaan galo
Iyo heegantaan dhigo

30. Dumar lama haweysteen
Ragba ma hungureeyeen

31. Hanti lagama dhiibeen
Guri laguma hoysteen
Hadal lalama yeesheen.

**LAYLI:**

1. «Hadimada kalgacalka leh», muxuu abwaanku isugu ladhay ee u lamaansiiyey labada eray ee macnahoodu isku lidka yahay?
2. Cilmi Boodhari muxuu ku helay inuu noqdo halqabsiga jacaylka?
3. Ma ku qumman yahay abwaanku eedda uu haweenka dusha ka saaray? Waayo.
4. Ka soo dhexsaar tixaha heesta tuducyo ku lid ah canbaareynta haweenka.

**SHARAX:**

Lambarku waxa uu ku tusayaa tuduca la sharaxayo.

1. Huq: murug. Hagardaamo: dhibaato.
3. Hawraarta: haasaawaha. Maansada: gabayga. Hogatusaalaha: tilmaamaha.
7. Heshay aayahoodee: shahiid baad ahayd oo wixii adduunka kugu gaadhay Ilaahay wanaag buu kaaga abaal mariyey.

9. Hoobaan: midho bislaaday.

13. Ugu hiloobaa: ku jeclaadaa.

14. Ugu hagar la'aadaa: daacad ugu ahaadaa.

15. Hogol: daruur

16. Hanfi: dabayl kulul.

17. Hiyigaaga: niyaddaada.

18. Hengel: hengesha waxa qaadda naagta ninkeedu dhinto.

19. Gudcur kugu hillaabeen: madow ku huwiyeen.

21. Haadaan: god dheer; bohol.

Halgaadeen: halgaadu waa iyada oo lagugu soo tuuro qori fiiqan ama ul oo uu ku mudo sida middida marka lagugu soo tuuro.

24. Habaas: ciid. Waxaan ugu habranayaa: waxan kaga baqanayaa.

## MAGAALADII BAABA'DAY (QAADDI)

Waqtigu waxa uu ahaa bisha Dambar-same ee xilligii dayrta ugu dambeysay. Dadku waxa uu ku rayraynayey isuna diyaarinayey badfurankii ka dib markii ay baddu saddex bilood oo cir Alla ka dhashay xidhnayd. Saxiimadihii kalluunku laba saddex casho ayaa ay badda u baxeen gacan qabsi fiicanna ku soo guuleysteen. Doonyihii waaweynaa ee dibedaha u kici jirey oo dhan waa la siifadeeyey; dakhalladii iyo farmaannadiina waa loo wada giijiyey si ay dhaqso ugu dhoofaan.

Dadkii reer guuraaga ahaa ee waqtiga jiilaalka xeebaha iyo buuraha ku xeeran u soo ceel degi jirey ayaa ayaguna soo horraan yeeshay; oo safrohoodii ugu horreeyey magaalada soo galeen.

Waxa iyaguna maalmahaas shaqo u qalab sameystay dadkii maxaysatada ahaa; ee buuraha ka qadhaaban jirey; kuwii xijiga ka xoogsan jiray kuwii qoriga goyn jirey iyo qolyihii cawda iyo maydhada guran jirey; intuba waxa ay u qalab urursadeen badfuranka cusub iyo sannadka barwaaqo ee soo fool yeeshay.

Makhaayadihii iyo dukaamadii ayaa iyaguna yididiilo iyo niyad samaan sannadkooda ugu diyaar noqday. Aqallo badan oo muddo dheer xidhnaa baa albaabada loo furay oo xuubkii caarada iyo habaaskii laga hurgufay si ay shaqadoodii ganacsiga u fuliyaan. Guud ahaan wax kastaaba sidii laga rabey bay u shaqaynayeen; dadkuna farxad iyo gacmo furan bay barwaaqada soo fool yeelatay ku soo dhoweynayeen.

Shire Gaanni oo ahaa ragga badda iyo camalkeeda aad wax uga yaqaan ayaa galabtii dambe xeebta istaagay; oo koox kalluumeysato ahayd ku yidhi: (waar baddu galabta way kacsan tahay; oo in «Nujub» ku jiraa baan u malaynayaa; ee bal caawa ha la baxnaaniyo oo yaan la aadin). Shire taladaas cidna kama hoos qaadin, qofkastaana hawshiisii buu ku dhaqaaqay.

Salaaddii maqribka markii foodda laga qaaday; bay dabayl galabjin ahayd oo aad u qaboobayd dhinaca waqooyi ka soo dhacday; baddii oo ay dabayshu xaggeeda ka soo jeeddayna aad u qooqday; oo mawjado buuraha ka waaweynna markiiba cirka isku shareereen. Dhaxan qabow baa markiiba dad iyo xoolaba ku habsatay oo lala wada beer dhaqaajiyey. Salaadda cishe intii aan la tukanba ceeryaamo gurreyneysey; oo nugul iyo guulaamo isugu jirtay baa cir iyo dhulba isku gedeftay.

Illeyn naftu orod bay kugu aammintaaye; aqal Soomaaligii baa xeerka loo wada giijiyey. Wixii udubbo dheeraad ah loo heli karayna lagu wada qotomiyey. Carshaantii iyo baraakooyinkii qudhooda tiirar hor leh baa lagu taageeray. Raggii doonyaha lahaa, waxay iyagu horeba u rooreen dhinacii badda si ay doonyihii marsada dhignaa u badbaadiyaan. Lexejeclo waa sun halis ah, rag baa markiiba orday oo reerohoodii miyiga yiil u gurmaday.

Dabayshii isla cagidiiba xawaarihii bay kordhisay baddiina shan iyo toban mitir bay mawjaddii cirka ku shareertay. Qayladii u horreysay waxa ay ka baxday badda gudaheedii. Markii ay kalluumeysatadii iyo dadkii doonyaha ka shaqeynayey gargaar u qeyshadeen. Hase yeeshee, cabbaar ka dib ayaa biyihii badda iyo kuwii roobku isqabsadeen. Magaaladii (Beeyaley) ee bashbashka iyo barwaaqada ku biyo batalaqsaneysay iyo dadkeediina dal iyo duul aakhiro noqdeen.

**KA JAWAAB SU'AALAHAAN:**

1. Maxay dadka reer Beeyale ku faraxsanaayeen?
2. Goormuu ahaa xilligu? sababo la taaban karo u keen jawaabtaada.

3. Muxuu Shire Gaani kula taliyey dadka?
4. Muxuu ku gartay waxa dhici doona?
5. Muxuu ahaa shilka magaalada helay? magacow.
6. Sidee baa dadku isugu deyey in uu shilka ka gaashaanto?
7. Xaggee u maleyneysaa in ay magaaladaasu ku tiil? ma dalkeenna mise dal kale? waayo? haddii ay Soomaaliya ahayd, sheeg gobollada laga yaabo in ay midkood ku tiil? waayo?
8. Maxay ku dambeysey magaaladii?
9. Weligaa ma soo joogtay, mase maqashay mar shilkaas oo kale Soomaaliya ka dhacay? goormey ahayd Wax ka sheeg.
14. Sidee baad u maleyneysaa in shilkaas oo kale looga gaashaaman karo?

**ERAYO CUSUB:**

1. Bad furan: waqtiga ay dabaylaha xoogaggu joogsadaan ee ay doonyuhu dhoofkooda bilaabaan.
2. Saxiimado: huuriyaasha lagu kalluumeysto.
3. Gacanqabsi: dheef; halaabad.
4. Farmaan: qoriga shiraaca doonyaha lagu kaaliyo ama gujiyo.
5. Giijiyey: adkeeyey.
6. Ceeldeg: xilliga reer miyigu meelaha biyaha leh ku soo noqdaan.
7. Maxaysato: dadka qaadhaabka, xaabada, dhuxusha, cawda iwm. ka shaqeysta.
8. Xijiga: beyada «fooxa» iyo sida looga shaqeeyo.
9. Qoriga: tiirarka, sarabka, iwm. ee wax lagu dhisto.
10. Nujub: dabaylo badda ka kaca oo doonyaha wax yeela.
11. Baxnaano: ka war dhowris.
12. Galabjin: dabayl qabow oo galabtii dhacda.
13. Cagidiiba: markiiba; qacdiiba.
14. Ufo: dabayl siigo wadata oo roobka ka soo horreysa.
15. Jiq: buux.
16. Gigtiiba: qacdiiba; isla markiiba.
17. Maayadda: socodka biyaha badda ee ay dabayshu waddo.
18. Carceeray: jiitey; fogaaday; dhacmay.
19. Walwaalanaysey: wadatay; sidatay.

## HAWL IYO HOGO KALIILEED (IBRAAHIM CALI RIYAALE)

Waxa lagu jirey diraac maxarshoon ahyd; markii uu Naalleeye oo xiddigiye weyn ahaa habeenkii dambe maluugaha jeediyey. Waxa uu arkay saadaashii oo aad u fiican yididiilana k a muuqato markii cirka oo af kurubadleynaya dayaxii oo kal-galay, laxihii iyo lo'dii oo goor hore dhacay iyo waaq habaarkii oo janjeedhsaday. Waxa kale oo maskaxda ku hayey dhirta qaarkeed oo xilli magooshay. Xoolaha oo waqtigaas ishkin iyo adhiba sid gooyey; ayaa Naalleeye werwer weyn ku hayey; hase ahaatee; habeenkaas bay yididiilo weyni kashiisa gashay; maxaa yeelay; xilli gu' iyo ifafaal-ihiis baa u muuqday. Geelu maalintaas waa cokanaa adhiga se kalkiisii bay ahayd.

Hiirtii Waaberi markii uu ooggu istaagay buu adhigii afsaarka ka tuuray oo inta uu xayeeshidii xerada ku reebay, wixii xoogga lahaa marada u riday, maalintii oo dhan dhalan dhool buu ahaa; habeenkiina guul ooman buu galay. Subaxii dambe markii nin iyo geed la kala gartay; ayaa uu oodda ka rogay; oo inantii ku yidhi: «Aabbe waan sii ceelalyo tegayaaye, adhiga soo kaxee oo geedkii qudhaca ahaa ee weynaa ku soo hagaaji».

Tallaabada waxa uu hoosta ka xadaba, ceelkii maax geliyey buu isku tuuray. Markiiba weelka buu darka ku teediyey, wadaantiina moolkuu ku shalwiyey. Kolkii uu yeelkii oo dhan buuxiyey ayaa uu inta wadaantii ceelka ku ridey dawliska caarad-diisii dambana xakabka ku xidhtay, tuur yar oo halkan ahaa isku taagay oo yidhi: «Cibaadoy Aabbe adhiga soo hor». Barqo gaaban intaan la gaadhin ayaa adhigii kamiin iyo rakaadiba dhammaaday. Hase ahaatee, nasiib darro, adhigii qaarkiis baa kawkabay, oo darkii ka kici waayey.

Maalintaas oo dhan waxa uu adhigii kawkabay baxnaaniyaba, casar liiqii buu fuliyey. Habeenkaas meel dheer caraabe kuma geynine guul cokan buu sii gebegebe fadhiisiyey. Waa lexjeclo iyo caadadeede, habeenkaas il iyo baalkeed isuma uu keenin ee jeedaaluu ahaa. Waagu markii uu galac yidhi, ayaa uu dhabada cagta saaray. Dharaartaas oo dhan waxa uu sii wadoba gabbaldhacay markii ay ahayd buu reerkii usha la dhigay. Habeenkaas sidii uu filayey bay raxmadii afarta jahoba ka hillaacday. Inkasta oo uu daal iyo dekaan qabey, haddana Naalleeye ma seexane, habeenkaas oo dhanna hilaadis iyo oddoros buu u soo jeedey. Geela oo deegaan-raaca lagu yaqaan baa isaguna markii uu hillaacii arkay in uu oodda jebiyo u kaankaansaday. Waaberigii markii indhaha la kala gooyey, buu Naalleeye inta uu laba halaad oo dhaqayo ahaa sii finnaaqsaday, sahan-tag weysada u buuxsaday. Meesha reerku yiil iyo halka uu roobku ku soo simay waxaa u dhexeysay suun abaar ahayd oo aanay xoolo geed sare iyo mid hoose toona saxar ka goyneyn.

Waxa uu fool u sii jeedaba, waxa uu hanfi kaliileed iyo halas abaareed sii jiidhoba, gelinkii dambe ayaa uu dhul uu mahiigaan ku yuurursaday oo ay xareeddu gal iyo gelgelinba buuxisey u soo dhigtay. Naalleeye inkasta oo harraad ka hadhay baahi bay beerka iyo boggu iskula dhegeen. Gabbalku waxa uu ugu dumay gegi cidla ah iyo gudcur roobabow oo aan waxba la arkeyn. Waxa uu iska masnuun socdaba oog meel dheer ka baxaysay baa markii dambe u bidhaantay. Intay neefi ka soo kudday ayaa uu tallaabo kaytowba ku dhaqaaqay; oo oogtii ku tibbaday. Waxa uu soo qarda jeexaba; markii uu meeshii oogtu ka baxaysay dhawaaday; ayaa uu koor dhawaaqeed, iyo jabaq kale maqlay.

Cabbaar haddii uu soo sanqadh dhageystayna, waxa uu ku soo baxay gole oo ay koox dhallinyaro ahayd waalo ku ciyaareysey, ama ku caweyneysay. «waar nabad ma la sheegay?» bariiduu golihii u dedejiyey «waa nabad e, adigu maxaad sheegtay?» (shillaa'aawi).

Intaa markii la isweydaarsaday ayaa uu nin ragga ugu da' weynaa, inamadii la hadlay oo yidhi: «waar diif iyo diihaal baa ninka ka muuqda ee kaca oo geela soo godla, ninka caano ha looga lisee». Qacdiiba laba isku sidkanaa baa la iska daba godlay oo gaawe laba nin deeq ahaa laga soo milaalay. Aroortii dambe, markii geelii looga sii caana lisay, ayaa uu inta guri degmoosan ah sii qormeystay xaggii reerkiisa ku toosay. Waxa uu maalintaa oo dhan kabti iyo kaynaan ahaadoba, makhribkii buu xoolaha la xero galay. Habeenkaas gataatedhac buu ahaa, oo dhinacii uu u jiifsaday marna iskama rogin. Waagu markii uu beryey, ayaa raggii beesha u talin jirey oo dhami gurigii Naalleeye mid mid ugu soo kallaheen si ay u wareystaan. «waaye waa sidaa iyo sidii xumeyd la'aw» markii la isu celceliyey ayaa «waa inoo caawa iyo geeddi» lagu guddoonsaday. Xiddigta Waaberi markii ay big soo tidhi; baa kheyr raro iyo ka rayso; reerihii la dareeriyey. Meesi kastaba hees u gaar ah baa loogu haloosiyey.

Waxaa maalintii oo dhan maalin sawaal la shadoobo, casar dheer baa gurigii uu Naalleeye sii laansaaray; reerkii lagu furay. Isla markiiba hawshii degistaa qof waliba meeshii uu kaga habboonaa uga feytey. Haweenkii aqalladii bay mid kastaaba qormadii loo qaydey ka dhiseen; Naalleeye iyo wiilkiisii Cartanna inta ay gudumihii iyo hangoolladii iyo garab qaaddadii la boodeen bay yagleel u dhaqaaqeen. Dhowr casho ka dibbaa xoolihii barqo dhereg bay ahaayeen. Caanuhuna dhiil iyo dheriba ku bari.

**EREYADA CUSUB:**

1. Maxarshoon: kulul; abaar ah.
2. Malluugaha: xiddigaha moorada, sida dirirka laxaha, lo'da iwm.
3. Kal galay: gal wareegsan ka dhex muuqday, cirka daruur lahaa.
4. Laxaha: ururka koox xiddigo ah oo xilliga gu'ga qarsoonta.
5. Lo'da: koox xiddigo ah oo saddex saddex u safta.
6. Waa habaar: jiitinta cirka ee xiddigaha badani ka samaysan.
7. Xilli magooshay: caleen iyo maan bixisay.
9. Ifafaale: calaamado; amaarado; astaamo.
10. Kalkiis: maalintii la waraabin lahaa.
11. Oogga: iftiinka waaga u hoorreeya.
12. Afsaarka: buuxsinka; oodafada; oodda illinka xerada la saaro.
13. Xayeeshida: xoolaha weydda ah ee aan xoogga lahayn.
14. Dhalandhool: maalin sawaal socod isdaba-joog ah.
15. Guul ooman: ceelka agtiisa oo xoolaha oo aan cabbin loo hooyiyo.
16. Yeelka: qalabka xoolaha lagu waraabiyo.
17. Darka: ceelka qarkiisa.
18. Teediyay: is garab dhigay; ku safay.
19. Moolka: biyaha dhexdooda; badhtamahooda salka fog yahay; qusur.
20. Salwiyay: ku riday; ku tuuray.

21. Xakabaha: qoriga dawliska lagu jiido.
22. Kamiinta: qaybta hore ee ay xooluhu biyaha ka cabbaan.
23. Rakaadda: qaybta dambe (labaad) ee ay xooluhu biyaha ka cabbaan.
24. Kawkawday: wareeray; miyir doorsoomay. Waxa jirta in ay xooluhu, siiba Adhiga qaarkii biyaha ku wareeraan haddii ay iyaga oo aad u harraadnaa si xun u qudh-qudhiyaan. Taas baa la yidhaahdaa Kawkaw.
25. Casarliiqii: casar gaabkii.
26. Uloba: duuboba. Kexeeyoba: aad u wadoba.
27. Hilaadis iyo oddoros: qiyaasta meesha roobku hayo, iyo baaxaddiisa.
28. Deegaanraac: hiyikac; geelu roobka waa u hiloobaa waana ku hayaamaa.
29. Kaankaansaday: isu diyaariyey; holladay.
30. Finnaaqsaday: caano yar ka maalay.
31. Suun: meel geed qabatin lahayn.
32. Mahiigaan: roob weyn.
33. Masanuun: male; qiyaas.
34. Oog: dab weyn.
35. Kaytow: deg deg.
36. Ku tibbaday: ku toosay.
37. Gataatidhacay: daal la jiifsaday.

**KA JAWAAB WEYDIIMAHA SOO SOCDA:**

1. Maxaa looga jeedaa diraac maxarshoon ah?
2. Waa maxay saadaashu?
3. Muxuu Naalleeye la warwarayey? Muxuuse werwerkii uga baxay?
4. Muxuu Naalleeye habeenkii adhigu soo cabbey la seexan waayey?
5. Xaggee Naalleeye gabbalku ugu dhacay maalintii uu sahan tegey?
6. Xaggee buu habeenkaas u hoyday? Muxuuse la kulmay?
7. Maxaa looga jeedaa goormaase la isticmaalaa erayada soo socda: «ka rayso, khayr raro weeye waa sida» iyo «sidii xumayd la'aw» ?
8. Wax ka sheeg shaqadii uu Naalleeye qabtay?
9. Muxuu Naalleeye abaagud u helay?
10. Ma taqaan cayaarta waalada ama jawada la yiraahdo?

**SHEEKADA ERAYADA IYO WEEDHAHA MACNAHOODU HOOS KU QORAN YAHAY KA SOO DHEX SAAR:**

1. Qalloocsamay, ama gees u foorarsamay.
2. Farxad: riyaaqid wax filasho.
3. Harraad ma qabin: ma oomanayn.
4. Kolba in yar soo daa biyaha ha cabbo e.
5. Waagu markii uu caddaaday.
6. Socod maalin weyn, dheemaal.
7. Sawaxan: buuq.
8. Nabad: balaayo ma jirto.
9. Daal iyo gaajo.
10. Lagu heshiiyey: la isla gartay.
11. Guri degsiimo fiican.

Markii reerku guurayey xoolihii heeso kala duwan baa lagu kexeeyey. Waayo?

t) Geela marka la wado iyo marka la waraabinayo ma isku hees baa mise way kala duwan tahay? Midba tix ka sheeg?

j) Keen laba hees oo Adhiga lagu kaxeeyo, laba maqasha loogu heeso. Markii reerku degey, qof waliba shaqo ku habboon buu ku dhaqaaqay. Sheeg shaqada ay dadka hoos ku qorani qabtaan: ragga xoogga leh, dumarka, dhallinyarada, carruurta korran.

## GEED FADHIISI (RIYAALE)

Amintu waxa ay ahayd casarliiq ay cadceeddu baalka dhigtay. Cirka qandoodkiisa Galbeed waxa isku daliigtey mood galbeed, dhanka barina waxaa ka soo gurguuranayey hiimse-hiimse gabbaldhac oo ilbidhiqba tan ka dambaysa soo kordhayey. Nafluhu marka habar dugaag laga reebo, waxa uu dhammaan u socday hoygiisii. Shimbiro raabe raabe ahaa ayaa iyaguna samada lalayey.

Xooluhu iyaga oo ay candho iyo calooli buuxdey oo duduucayey, bay guriga meesi meesi ugu soo fool lahaayeen. Foorida carruurta xoolaha soo carraabinayey iyo heestooda, waxa aad moodeysey fiin meel dheer ka ciyeysey. Haweenkii reerkuna mid kastaaba hawl la soo gudboonaatay bay ku foogneyd: maqal xirxirid, xaabo soo gurid, awr aoo hoyn iyo weel culis.

Haddii ay xoolihii, geelii mooyaane, intii kale guriga kambalkiisii soo hortey maqashiina mareegta iyo edegga u qaybsantay, ayey rag culus oo waayeel u badnaa duddada reerkii ka salaameen. Gogol ayaa, deg deg, gole la weegaaray loogu kala bixiyey. «Waar Geelle; walaal martida ardaaga gee oo sii haasaawi inta aan guriga wax ay afka ku dhuftaan uga soo deyayo». Rooble ayaa walaalkii ku yidhi. Rooble isla cagidiiba loog buu dhegta dhiigga u daray. Isla markiiba gorfog caano ah, kildhi shaah ah, iyo beerkii oo shiilan buu Rooble oo ay inantiisii, Cosob, la walandaynaysaa keenay. «Waar bal shaahan hamuunta ku sii jebiya inta uu hilbuhu inoo bislaanayo»; ayuu Rooble yidhi inta uu inantii caanihii ka qabtay oo dhulka qotomiyey.

Warsame oo martida hormuudkeeda ahaa, weligiina aanu hadal u dhammaan baa inta uu dooyaxidhkii iska furay; qummaatina u fadhiistay, qosol yar ku dhuftay oo yidhi, «Rooblow, waan ku arkaa oo waad gabyeysaaye, in kasta oo aad loogteyna, weli waa laguu minin fadhiyaa». Jaamac oo da'diisu labaatan kor martay, martidana ka mid ahaa, waxa dhacayaba isagu waa moogaa. Markii ay reer Rooble isa soo dul taageen ayaa uu hanqalka la soo kacay, oo inta uu xusulka midig dhulka ku mutay, Cosob tin iyo cidhib isha ka buuxsaday. Cabbaar haddii kaftan aan turxaan lahayn la isku tuurtuuray, weeye iyo waa sidaana la kala dhammaystay, ayaa Geelle kacay oo alaabtii ururiyey in yar ka dibna waxa uu keenay waaxyihii loogga oo geedeysan. Laba garan garood inta la isku qeybiyey, ayaa gacmaha iyo tooriyaha xeedhyaha guntoodii lagu arooriyey. «Waar sharli'ine hilibku macaanaa, iyo waa darandaaq aanay weligii sako ku baaqsan». Erayadaas bay martidii intii hilibka afka lagu hayey isku maaweelinayesey. Markii hilibkii la cunay dufankiina kubabka iyo xusullada la iskaga tirtiray, ayaa uu Geelle yimid oo inta xeedhyihii soo jiidey oo hilibkii ku hadhay kor u qaad-qaaday, Warsame ku jeestay oo yidhi: «Waar waa sidee maxaa hilibka u cuni weydeen, yaad u hambeyneyseen?

«Waar waxa aan ku weydiiyey, weli ma gabaygii baad waddaa? Xaggee baa wax lagaga tegey, ee aad sheegeysaa?« ayaa uu Warsame kaftan ahaan ugu jawaabay. Cabbaar haddii kaftankii la sii waday, ayaa habeen wanaagsan iyo wixii waa la beryo lagu kala hoydey.

Cadceeddu markii ay fallaadhaha soo dhaweysey, ayaa uu Rooble saddex waaxood oo hilibkii ka waabariistey si fiicanna u xarkagay, iyo laba kildhi oo shaah ah soo qaaday oo martidii u keenay. Markii la quraacday; dufankii hilibkana xusullada iyo kabaha lagu xooleeyey ayaa ay socotadii ujeeddadeedii u afbaxday. Warsame ayaa isaga oo Rooble ku halqabsanaya hadalkii furay; oo yidhi: «Rooblow, waxa aanu u soconney arrin aan maanta ugub ahayn ee weligeedba soo taxnaan jirtey, innagana gaar ahaan inoo curad ahayn ee jirtey: Annagana socdaalkayagan maantu waxa uu ahaa ina Geelle oo aynu ku xididno guud ahaan, gaar ahaanna Jaamac iyo Geelle».

«Hadal wanaagsan baad Warsamow tidhi, waana mid la arki jirey horena waxa loo yidhi «gabadhi ama xabaal ku dahsoonayd ama nin ku asturneyd», hadal iyo murtidiisna gabadhii Hodan ahayd la idin sii. Intii aannu eraygii «la idin sii» afkiisa ka soo wada bixin baa gacan qaad iyo guddoomay gaadhey.

Geelle oo inanta Aabbaheed ahaa baa hadalkii la wareegay oo yidhi «Inantii Hodan sidaas adeerkeed idiin siiyey baan aniguna idiin ku hibeeyey. waxa intaas ii raaca inantu waa carruur aan weli gankeed gelin, guri iyo agabtiisna weli uma abyana. Ugu yaraan laba naq waa laga dhur sugi doonaa. Yarad isagu waa intii hooyadeed laga bixiyey». Warsame ayaa mar labaad hadalkii la wareegay oo yidhi: «Yarad isagu waa ina daanweyne,muddadaase waxa aanu ku leenahay ha la yareeyo-». «Afkaaga caano lagu qabey iyo aan ha la yareeyo» «Dheri iyo Dumar toona yareysi malaha; ee arrinta hore aan u goynno» ; «Afkaaga caano lagu qabey iyo aan hadalka kaa dilo». Markii hal cabbaar ah la isku celceliyey, ayaa konton halaad iyo baarqabkoodii oo yarad ah iyo hal sano oo ay Hodan doonnanaato arrintii lagu gebagebeeyey.

**LAYLI:**

**ERAYO CUSUB:**

1. Qandoodka cirka — sii foorarkiisa.
2. Mood galbeed — midabka gabbaldhaca.
3. Hiimsehiimse — madowga gabal dhaca.
4. Dheelmanayey: soo carraabayey.
5. Ku foognaan: ka shaqayn.
6. Duddada: duleedka; kambalka guriga.
7. Loog: hilibka martida loo qalo.
8. Walaandeys: walwaalis; wada sidis.
9. Hamuun: baahi; qatanaan; gaajo.
10. Moogaa: ma ogeen; lama socon.
11. Garangar: saf wareegsan.
12. Darandaaq: geed dhanaan daaq; aan jeel qabin.
13. Xarkagay: qaboobay, oo baruurtii isku dhegdhegtay.
14. Ku halqabsaday: hadalkii u jeediyey.
15. Naq: gu'sannad.

**WEYDIIMO:**

1. Maxay sameynayeen dumarkii reerku markii ay martidu timid?
2. Sidee baa loo soo dhaweeyey martidii?
3. Muxuu Warsame uga jeeday «weli waa laguu minan fadhiyaa?
4. Maxay martidu uga jeeddey «waa darandaaq aanay sako ku baaqan?»
5. Yaa Geelle la socday markii uu shaaha iyo caanaha keenay?
6. Jaamac, sheekada meesha waa uu moogaa «waayo?»

7. Maxay martidii yeeshay markii ay quraacatay?
8. Ma kula tahay in uu Geelle fahmay in gabadh laga doonayey, intii aan subaxnimadii loo afbixin? Waayo?
9. Muxuu Warsame Rooble ugu halqabsaday; ee Geelle oo inanta dhalay toos ugula hadli waayey?
10. Maxaa lagu heshiiyey?

**WEEDHAHA SOO SOCDA SHARAX:**

1. Rag culus: weeye iyo waa sidaa.
2. Gabadhi ama xabaal ku dahsoonayd, ama nin ku asturnayd.
3. Arrintu waa curad ee ugub ma aha?
4. Dheri iyo haween toona yar-yareysi ma laha.

Hannaanka guurku waxa uu leeyahay, habab loogu dhaqmo. Hababkaas oo middii waliba magac iyo waqti u gaar ah leedahay. Hoos waxa ku qoran magacyo — sheeg marka lagu dhaqmo iyo cidda la siiyo.

b) Gabbaati.

t) Yarad.

j) Dhibaad.

x) Inan la yaal.

kh) Kaalo.

## JARABARKA GAMMAANKA(QAADI)

Quruxdeydii iyo qaayaheygii baa hadda dibadda u soo shaac-baxay. Afar gu' ayaan baarka ka gooyey. Burunji iyo baruurna waa aan la gaadda balaxoobay. Midabkeygu waa bey-guduud, diirkayguna waa suunaari. Wejiga waxa aan ku leeyahay gabbal cad, jeeniga bidixda qoobkiisana bar cad. Intii khaylka aan ahaa ee aanan heerka darmaannimada soo gaadhin, yedlahaygu waxa uu ii lahaa xannaano gaar ah. Dadkana waxa uu ku odhan jiray, «Ilaa uu gaammuro yaan la hawl gelinin».

Hadda oo aan afar jirsaday ayaa uu inta ilkahayga eegay, indhaha iyo qoobabkaygana qiyaasay, dadkii ku yidhi «waa xulad gammaan ee ha la jebiyo» muddoba yed lahaygu waxa uu igu abuurtay farabarasho aan salaaxidda iyo xoodaaminta u hiloobo. Marka uu saaxiibkay gacanta korkeyga mariyo ayaa jiriirico tin iyo cirib i roortaa oo aan kalgaceyl dareemaa.

Subaxdii dambe, ayaa uu sabaalihii iyo salaaxii badnaa igu sare tegey. Subaxdaasi aad bay iigu dheer tahay. Wax kasta oo aan halmaamana,kollaba iyada ma illaawi doono. Waagu markii uu beryey; ayaa Cabdi-guun oo jare saddex tebis ahaa sitaa iska soo dhigtay oo markiiba inta hal cabbaar ah i xoodaamiyey qool i sudhay. Isla markiiba xakamihii baa afka la ii geliyey shakamadiina sidii taaj baa madaxa la ii sudhay. Sinaba ugama sheekeyn karo sidii ay igu ahayd birtii gudbaneyd ee inta afka la ii geliyey, labada qawalal madaxyada kala baxda. Sida xakamaha; shakamada; iyo jaraha la isugu wada qoofalay, maalintaas la ima sii deyn mana aan daaq tegen.

Hal cabbaar ah markii uu Cabdi-guun jarihii hadba gees iigu jiiday, ayaa uu inta igu dukaalay dhalada iiga booday. Dushayda markii uu qumaati ugu fadhiistay, ayaa uu kellida midig cidhibta igaga gujiyey oo caynaanka wax yari ii debiciyey. Belaayada ku saaran iska rid inta aan talo igaga go'day, ayaan booddo u laba laxaadsaday, hase ahaatee, kuma aan guuleysan maxaa yeelay, Cabdi-guun baa xakamihii igu giijiyey. Waxa aan maalntaas gelinkeedii hore oo dhan hadba gees u bariiqdaba, waxa uu Cabdi-guun marna caynaanka ii debciyo marna dib iigu giijiyoba galabtii bay taagi i run sheegtay. Halkaas baan «illayn dani waa seetee» jara-barka qaybtiisii hore ku oggolaaday.

Qaybta labaad oo koorihii iyo tababarro kale ka koobnayd, sidaas iyadu uma sii dhib badnayn. Cabdi-guun shaqadiisii waa ay dhammaatay, waanu iska tegey. Waxaannuse isku soo hadhnay yedlihii i lahaa. Saaxiibkay inta uu ii geedo dhigay, subagna i waraabiyey, ayaa uu si doqonni ma garato ah koorihii iigu xambaajirey. Markii uu koorihii i saaray, wegeraddii, cayn horaadkii iyo cayn dambeedkiiba u giijiyey, ayaa uu hal cabbaar ah isaga oo marmarna i fuulayey, marmarka kalena i taxaabayey; i soo warwareejiyey. Muddo dhowr casho oo isdabajoog ahayd; ayaa subax walba inta heensaha la ii dhameeyo, tababar, orod iyo mid dirireedba la i barayey.

Jarabarashadii ka dib, wax dhibaato ah, haba yaraatee lama kulmin. Saaxiibkay orod iguma dhaliilo; amarna weligey kama aan diidin.

**LAYLI:**

**ERAYADA CUSUB:**

1. Shaacbax: muuqaal; dibad bax.
2. Burunji: xoog (hilib iyo quwad).
3. Gaadda balaxaw: naaxid.

4. Beyguduud: madow iyo casaan isku jira.
5. Suunari: nooca gammaanka ugu wanaagsan.
6. Yedle: ninka leh; yedlahaygu: ninka i leh.
7. Caanuro: naaxo.
8. Jebiye: jarabare; jebin: jarabar.
9. Xoodaamis: salaaxid.
10. Saddex tebis: saddex laagoodle.
11. Qoofalay: isku xidhay.
12. Dullaaltay: dushiisa ku booday; fuulay.
13. Caynaanka: majaraha.
14. Heensaha: qalabka fardaha, sida kooraha, xakamaha, shakamada iwm.
15.

**SU'AALO:**

1. Waa ayo cidda sheekadan ka hadleysaa?
2. Maxaa looga jeedaa «Dirkaygu waa suunari»?
3. Sidee buu yedlihii lahaa u gartay in uu heerkii jarabarka gaadhey?
4. Muxuu ugu faanay in uu wejiga gabbal ku leeyahay qoobkana cad yahay?
5. Muxuu u yidhi: salaaxiddii badneyd baa igu sare tagtey?
6. Maxay Cabdi-guun shaqadiisu ahayd?
7. Wax ka sheeg waxyaalihii ku dhacay maalintii jarabarka ugu horreeyey.
8. Ma isku deyey in uu jarabarka ka hortago ama diido? Mase ku guuleystey? Waayo?
9. Sidee buu yedlihiisu u dhaqaalayn jirey?
10. Jarabarkii ka dib sidee buu yedlihiisa ula dhaqmi jirey?

b) Laga bilaabo marka ay dhashaan, ilaa iyo marka ay gaboobaan, farduhu waxa ay soo maraan heerar korriimo oo kala duwan waxa ay leeyihiin magacyo heerarkaas u kala gaar ah.

Magacyada soo socda mid walba heerkiisa ama waqtigiisa ku qor:

1. Senge.
2. Darmaan.
3. Khayl.

t) Adig oo dadka yaqaan la kaashanaya sheeg macnaha erayada soo socda:

Leedda. Fuul. Geenyo. Xarraan. Sitaac. Qoofal.

## GEF IYO GUULDARRO (QAALI)

Ducaale waxa uu ahaa duq reer baadiye oo si weyn looga dambeeyn jirey, dood, deeq iyo dad-la-socod fiican caan ku ahaa.

Xaaskiisu waxa uu ka koobnaa, afar carruur sooran ah iyo hooyadood. Guriga ishin iyo adhiba waa buuxay; inkasta oo aannu geelu sidaa u sii tiro badneyn.

Illayn waa addunyo oo hadimo ma la'aato habeenkii dambe fiidkii ayaa duqii oo rati gulaal ahaa oo hal irmaan tuudinayey in uu ka dabro rabey halaq ku saydhay. Isla markiiba waabeydii inta ay dhiigga kor iyo hoos u raacday ayaa ay duqii wadnaha taabatay. Ducaale, illaa waa nin weyn oo wedkiisa waa yaqaane; kolkiiba uu yaqiinsaday in nabarka gaadhay gantaal lagama kacaan ah yahay. Wiilkiisii curad iyo haweeneydii isaga u dhaxday u yeedhay oo yidhi: «Si ay noqonba Ilaah baa oge haddii aan god galo, waxaan idin kula dardaarmayaa laba arrimood: waa tan hore, xaynta xerada idiin ku jirta dayac tira, nin xunna weligiin xigto ha moodina. Waa tan labaade, hablaha xannaanadooda sinnaba ha u dhayalsanina». Hablaha, Hablaha ayaa uu laba jeer ku celiyey. Kaddibna afkuu kala jiiday.

Geeri waxtarkeedu waa in ay habacsane meel waayey hoy siiso e, waxa markiiba galka seefta kala baxay Guutaale, oo Ducaale naas la nuugay. Guutaale waxa uu ahaa haad geed waayey oo aanay dhaxanta cidna ka soo hoysan jirin. Dhaxalkii adoogii uga tegey waxa uu ku dhaafay dayac iyo darxumo. Walaalkiina markii uu waano iyo wax u sheegba kala quustay buu dibedda u tuuray.

Waa naf nool iyo dhurkeedee, haweeneydii agoonta dhashay waxa ay dhaqso u halmaantay dardaarankii duqa iyo xilkii weynaa ee garbaheeda ku habsaday. Hengashii maalintii ay dhigtayba waxa ay u indhakuulatay hmilo dumaaleed iyo hawo guur. Illayn dhaxal waa nin leh ma dhaafee, go'aan waxa uu noqday in uu, Guutaale, aabbihii labaad ee ilma Ducaale noqdo.

Dhismihii qoyska cusub ee reer Guutaale, waxa ka dhashay ilmo Ducaale wixii socon karayey oo gurigoodii ka dhuyaalay. Faarax oo wiilkii curad ahaa, waxa uu nafta kula eertay dukaan uu nin ganacsade ahi lahaa oo uu alaab gade ka noqday. Dheefta la siiyaana waxa ay ahayd, af iyo gacan dhexdood iyo arratir sannadkiiba hal mar ahaa. Gabadhii Saluugla ahayd ee isaga dhalashadeeda ku xigtay, waxa ay uyana dalanbaabigii ku tagtay gurigii Xaaji Colaad oo carruurta adeer labaad ugu toosnaa.

Xaajigu waxa uu ahaa baabuur-wade aan, habeen iyo laba wax ka badan guriga u soo hoyan jirin. Afadiisu waxa ay ku caan ahayd dabeecad wanaag iyo dad la socod fiican, hase ahaatee, gacan adeyg baa lagu xaman jirey. Guriga waxaa kale oo joogtey gabadh isaga la dhalatay oo gedaha saluugla ahayd. Labada hablood waxaa qacdiiba dhex martay saaxiibtinnimo dhididibbo adag ku qotonsatay. Saluugla oo karti iyo gaarinnimo Ilaahay u dhammeeyey, waxa muddo gaaban ka dibba faraha looga qaaday hawshii guriga. Inkasta oo aan sidii adeegto caadi ah loola dhaqmi jirin, haddana waxba kama baaqan jirin. Mushahar go'an lama siin jirin, hase ahaatee; marriin iyo quudba reerkay kala mid ahayd.

Guriga Xaaji Colaad gebi ahaanba, cagtu waa ay ku yareyd, gabdhaha joogana dheg maqasha iyo il meel dheer ka halacsata mooyaane, weligoodba dhallinyaro haasaawe kuma soo hor fadhiisan. Hilinka keli ah ee hablaha iyo geyaankooda kulmiyaa waxa uu ahaa daaqadda jikada oo ay tooskeeda makhaayadda ay dhallinyaradu barxaddeeda labada qaboono ku qaxweysaa, ku tiil. Inkasta oo ay gabdhuhu dariishadda facooda ka qooraansan jireen, iyagana isha lala tiigsan jirey, haddana

barashadu horumar ma yeelan. Xiriirka daymada indhaha iyo debno ka qosol ma dhaafsiisnayn, ilaa uu Jaalle Maxamed bulshadii makhaayadda fadhiisan jirtay maalintii dambe ku soo biiray. Jaallahaas cusubi waxa uu ahaa maamule xafiiska beeraha ee degmada loo soo beddelay. Da'diisu shan iyo labaatan jir bay ahayd, qurux iyo qiimana meel buu isu taagay. Saluugla' oo keli ah baa galabtaas jikada timid. Saaxiibadeed waxa ay ku maqnayd booqasho ay qoys kale ku gaadhay. Daaqaddii markii ay sidii caadadu ahayd indhaha ka taraarixisay, ayaa ay Maxamed oo meel daraf ah keligii fadhiyey isha ku qac siisay.

Ili bidhaan arageedu ku cusub yahay uma boholyoobi weydoe, waxa Saluugla' markiiba soo jiitay Jaalle Maxamed!! «Tolow kani muxuu ahaa?» «Waa mid soo galaa ah». Tolow xagguu ka yimid? Su'aalahaas bay iyada oo aan afka kaga tiraabin isweydiisay. Maxamed qudhiisa qooraansigii daaqaddu kama daahneyn, ee halkiisuu daymada ka waday.

«Wallee galabta mid halkii soo fadhiistay haddii aad aragto shanta dhaban uun baad qaban lahayd», Saluugla' baa saaxiibadeed markii ay soo joogsatayba warkii ku taabatay «oo xaggee baan tolow ka imid, maxaanse ahaa?» Deeqaa Saluugla' weydiisay. «Oo miyaan war u hayaa. makhaayadda horteeda uun baan axadkaas oo isgaafaya ku arkaye». Saluugla' baa ku jawaabtay. «Alla! Alla! naa iga tag Saluugla', weligaaba dad aan maded lahayn waa aad koolkoolin jirtay». Saaxiibbadeed baa hadalkii ku cabudhisay. «Kee baan maded lahayn, Ilaahow aan hooyaday iyo iyo inamadaydaba waayo, in aad haddii aad aragto yaa dariishadda ka dhaca odhan lahayd». «Dee bal waa lagula arki doonaa kan durba ku gagabiyey». Deeqa baa hadalkii ku soo gebegebeysay.

Maalintaas iyo wixii ka dambeeyey waxa ay Saluugla' iyo Maxamed xiriir daymada ku kooban ka yeesheen dariishaddii jikada.

Waxa ay eebadii jaceylku ayaanba ayaanta ka dambeysa sii adkaataba, galabtii dambe ayaa ay labadii ruux kulmeen. Inantii waxay fiidkii caano ka dooni jirtey xaafad magaalada ka go'nayd oo xoolo u soo hoyan jireen. Galabtaas meel xaafaddaa iyo magaalada u dhexeysey buu Maxamed Saluugla' ku sugay, halkaas bayna markii u horreysay ku kulmeen. Salaan iyo iswareysi guud markii hal cabbaar ah la isweydaarsaday ayaa ha la iska warhayo iyo habeen wanaagsan lagu kala carraabay.

Kulankii galabtaas waxa uu qof kastaba goonni ahaantiisa ugu sii huriyey hurgumo jaceyl oo hor leh. Saluugla' waxa ay habeenkii oo dhan laba-bogleysaba hiirtii bay kacday oo hawsheedii ku dhaqaaqday. Quraacdii markii laga faraxashay, ayaa ay sidii u caadada ahayd, kolaygeedii la boodday oo hilbihii ku ku tibbatay. Wax gadashada ka sokow, waxa ay dan weyn kala lahayd Caasha oo ahayd gabadh Maxamed iyo saaxiibadii u adeegi jirtey. Caasha waxay Saluugla' si buuxda u siisay wixii warar guud ahaa ee ay Maxamed ka haysay, meesha uu ka soo jeedey; dabeecaddiisa; shaqadiisa iwm.

Galbo dambe oo dhowr ahaa bay Maxamed iyo Saluugla' meeshii ay habeenkii hore isku arkeen ku kulmeen ugu dambaystiina waxa ay ku guddoonsadeen guur inanta reerkooda la ogeysiiyo.

Maalin lideed oo dadku aad u wada faraxsanaa, buu Maxamed, Xaaji Colaad hoos u qanjiidhsaday oo inta uu goonni ula baxay xaajadii daboolka uga qaaday «waa hadal wanaagsan oo la arki jirey; aniguna waxba kulama diiddani; hase ahaatee gabadha taladeeda waa la iga leeyahay; sidaas darteedna reerkoodii baan arrinta gaadhsiinayaa ee iga war howr»; buu Xaaji Colaad inankii ugu jawaabay.

Xaaji Colaad habeenkii markii uu hoyday buu warkii farxadda lahaa xaaskiisa iyo inantiiba gaadhsiiyey waana la isla oggolaaday. Shirkii labaad waxa uu dhacay hal toddobaad ka dib markaa oo inanta hooyadeed, afadii Xaaji Colaad xogwareysi ku bilowday, «waa ina ayo dumaashi ninka la sheegayaa, xaggee buuse ku arkay oo ay iska heleen?» «Wallaahay anigu aqoon ninka uma Ihi ee Xaajiga uun baa habeen dhoweyd nin baa Saluugla' weydiistay nagu yidhiala ah waa nin beeraha u sarreeya». Afadii baa runta u sheegtay, «Oo maxaa beerona ila soo galay, aabbaheyba kuma intifaacine» «waxa la yidhi nin aan meel uu ka yimid iyo meel uu galo toona la aqoon bay soo arkootay, naayaadha waa bilista xaawalay!! Maba ay dhalane dhogoreysan ogaa?!» Habartiiba iska qarow hadashay.

Markii arrintii muddo la jeex-jeexay hoosna la isu xogeystay, gabadhii ha la bixiyaa guud ahaan lagu heshiiyey, Xaajiguse waxa ay ka murugtay «Yaradkii». Guutaale iyo haweeneydiisii waxa ay is tuseen in mar haddii ay gabadhii xooggeedii la fogaatay xerada geela lagu soo shubo. Wiilkii Faarax ahaa, isagu inaan geela xerada reer Guutaale gelayaa dani ugu jirin buu ogaa, sidaas darteedna qaddar lacag ah oo uu ganacsi ugu faraqabsadaa in ay u dhaanto buu gaar biday. Saluugla' iyadu markii ay arrini ribatay, reerkoodii ka talo goosan weyday, maxaa yeelay, hooyadeed baa habaar iyo duco kala doorransiisay. Xaajadii wax la tukubiyaba, inaan wax go'aan ah ah laga gaadhin baa lagu guddoonsaday!!

Maxamed waxa isaga la soo gudboonaaday laba arrimood: In uu saddex yarad, oo kala ah: geel reer Guutaale la siiyo, faraqabsi lacageed oo Faarax gacanta laga saaro iyo xisaab guriga reer Colaad la geeyo oo aroska wax looga qalqaaliyo bixiyo iyo inuu Saluugla' candhuuftiisa dib uga liqo. Arrin waxa ay galgalatoba waxa ay saldhigtay in uu dhismihii guriga cusubi baaqdo, gabadhii nasiibka darreydna «baw-dadeeda hilbo ka goosato».

**LAYLI:**

ERAYO CUSUB:

1. Laga dambeyn jirey: la tixgelin jirey.
2. Sooran: laba wiil iyo laba gabdhood.
3. Halaq: mas, abeesada iwm.
4. Rati gulaal ah: awr aan doob lahayn; qoodh fiican ahayn.
5. Halo budinayey: doonaayey in uu abaahiyo rabay.
6. Ku saydhay: qaniinay.
7. U dhaxday: qabay.
8. Habacsane: doqon; nacas; liite.
9. Hengeshii: dharkii geerida; gambadii caddayd; asaay.
10. Dhuyaaley: dhoofay; iskaga tegey.
11. Dalanbaabigii: dhuyaal socodkii.
12. Gedaha: da'da; filka.
13. Boholyow: xiiso.
14. Meded: wanaag.

15. Cabudhisay: celisay.
16. Gaggabis: nabar lala suuxo ku dhuftay; ku soo jiitey.
17. Huriyey: shiday.
18. Hurgumo: waabay; ladh.
19. Xogeysi: wareysi.
20. Ribbatay: adkaatay; murugtay.
21. Gungows: madbakh (meesha wax lagu kariyo); jiko.

**WEYDIIMAHA SOO SOCDA KA JAWAAB:**

1. Muxuu Ducaale xaaskiisa kula dardaarmay?
2. Dardaarankii ma ay oofisay?
3. Muxuu uga jeeday «nin xun xigto ha moodin».
4. Sidee bay isu barteen Maxamed iyo Saluugla'?
5. Maxay carruurtu gurigoodii uga tageen?
6. Yaradka ka sokow, reer Guutaale, guurka Maxamed iyo Saluugla' raalli ma ka ahaayeen? Waayo?
7. Maxay inanta reerkoodu yaradka lacag ahaan ugu heshiin waayeen?
8. Markii reerka laga aayo waayey, maxay labada ruux ee is-doonayey goonni ugu tashan waayeen?
9. Muxuu ku dambeeyey aayihii Saluugla'?
10. Yaa dembiga dhacay iska leh?
11.

Si faahfaahsan u qeex maahmaahaha iyo murtiyaha soo socda, sheeg ujeeddooyinkooda.

1. Geeriyi nin hoy waayey bay hadh gelisaa!
2. Nin weyni wedkiisa waa yaqaan.
3. Naftu orod bay kugu aammintaa.
4. Maba ay dhalane dhogoreysan ogaa?

Af Soomaaligu waxa uu leeyahay qayb aftahanno la yiraahdo oo dhowr nooc u sii kala qaybsanta. Taas oo afafka kale ee adduunka lagaga hadlaana la qabaan. Hoos waxa aynu ku qorray erayo, ama weedho, kuwa kale u dhigma:

1. Bawdadeeda bay hilib ka goosatey; waa ay xumaatay.
2. Afka buu kala jiiday: waa uu dhintay.
3. Labada dhaban buu qabsaday (Dhabannahays): waa la yaabay.

Qaybtaas iyo wixii la mid ah waxaannu ku magacaabi karnaa ujoogayaal.

«Oo xaggee baan tolow ka imid maxaanse ahaa!?»

Deeqaa tidhi, markii Maxamed looga warramay, «Goormaa hadalka noocaas ah la isticmaalaa?» Waayo?

## SHAKHSIYAADKA RIWAAYADDA:

1. Guuleed — Oday Soomaaliyeed oo maalqabeen ah.
2. Shamaado — Haweeneyda Guuleed.
3. Shallaayo — Gabadha Guuleed.
4. Diiddan — Gabadh Soomaaliyeed oo u taagan samaha iyo asluubta wanaagsan.
5. Diiddane — Nin dhalliny yar oo isna u taagan wanaagga iyo anshaxa fiican.
6. Shabeel — Nin u taagan hallaynta gabdhaha.
7. Kulmiya — Naag dhakhtarad ah.
8. Qaaddi (Qaalli).
9. Askari.

10,11. Saaxiib iyo Markhaati — Shabeel saaxiibbadii.

12. Wiil yar oo gaban ah.

## HEESTA FURITAANKA:

DIIDDAN: Habeen iyo Dharaar
Hadalladaan dhisnaa
Afkeenna Hooyo oo
Horumaraan ku hamminaa
Hoggaaminaa had iyo jeer
Hagnaa oo waan hagaajinaa
Ma hagranee waan u hawl gallaa
Murtidaan hurinaa, kala hufnaa
Haqabtirnaa u hedlanaa
Dadweynahaan hanuuninnaa
Haasaawinnaa danta u hagnaa.

HOOBALLADII: Walaalaha hanuunsanow
Waan idinla haynaa
Is hurina meynee
Halkan waxad u timaadeen
Aan hagar lahayn baad
Caawa naga helaysaan!

DIIDDAN: Buraanbur iyo hees
Hello iyo ciyaar
Gabayo haybad iyo
Hadhaa leh baan u hindisnaa
Lama huraan hilinka toosan
Baan barbaarta u hor gallaa
Ma hagrannee waan u hawl gallaa
Murtidaan hurinaa, kala hufnaa
Haqabtirnaa u hedlanaa

Dadweynahaan hanuuninnaa
Haasaawinnaa danta u hagnaa.

HOOBALLADII: Walaalaha hanuunsanow
Waan idinla haynaa
Halkan waxad u timaadeen
Aan hagar lahyn baad
Caawa naga helaysaan!

DIIDDAN: Taariikh hiddahaan
Habaaska ka tirnaa
Hannaankii aan ku soo dhaqmeynay
Baan u hiilinnaa
Hurdadaan guyaal ka haayirnaa
Naftayadaan hurnaa
Ma hagrannee waan u hawl gallaa
Murtidaan hurinaa, kala hufnaa
Haqabtirnaa u hedlanaa
Dadweynahaan hanuuninnaa
Haasaawinnaa danta u hagnaa.

HOOBALLADII: Walaalahaan hanuunsanow
Waan ididnla haynaa
Ishurina maynee
Halka waxad u timaadeen
Aan hagar laheyn baad
Caawa naga heleyysaan!

## JILKA KOWAAD

## ARAGTIDA KOWAAD

## AQALKII XAAJI GUULEED

GUULEED: Shamado bal soo dhowow!

SHAMMADO: Maxaad sheegi lahayd, way kane?

GUULEED: Horta hadalkaagu sow woxoogaa yar oo qalbiga u roon laguma arko, Shammadooy?

SHAMMADO: Horaan kaala daalay e wad!!

GUULEED: Naa ma indhahaygaa horta mise waad soo guduudatay toddobaadkan?

SHAMMADO: Weligey baan guduudnaaye iska wad waxaad rabtid.

GUULEED: Ee anigu waan baxayaayoo aroortaan teayaaye, haddii Eebbe yiraahdo, Xajkii baan aadayaaye. Ubadkeeniyo aqalkeeniyo reerkii adigaa u mas'uul ah.

SHAMMADO: Weligey baan u ahaa!

GUULEED: Haatanna waxa laguu dhiibay intii kaleeto. Wakiil mutasarrif aad ka tahay. Ma i maqleysaa?

SHAMMADO: Waar iga daa gacanta, kaa go'daye!

GUULEED: Oo gacanteydaad diideysaa? Hashii maqaarka diidaysaa meela daloolay ka fiirisaa baa la yidhi.

Aroortaan baxayaa
Oo Xajkii baan aadayaa
Ee ubadkeeniyo maalkiyo
Yaa, aqalkeeniyo reerka
Adigaa u mas'uul ah
Oday iyo habartiisuna
Ilko iyo carrab weeyoo
Mar bay eedi gashaaye
Waxaad eed ii tirsanaysay
Ayaantaan ku aroosay
Ushii aan kugu jiiday
Iyo wixii aad eed tirsanaysay
Ilaah baan kugu dhaarshee
Islaaney i cafi!
Alla, markaad uurka lahayd
Oo anigu aan iska jiifay
Adeeggaan kuu dirsanaayey
Iyo wixii aad eed tirsanaysay
Ilaah baan kugu dhaarshee
Islaaney i cafi!
Arrinta aad garaneyso
Aqalkeenna dhexdiisa
Adigoo i canaaday
Adinkaan fidinaayey
Ee adhaxda kaala dhacaayey Iyo waxaad eed tirsaneysay
Ilaah baan kugu dhaarshee
Islaaney i cafi!

SHAMMADO: Cafi iyo musaabax baad iga tahay.
GUULEED: Aakhiriyo adduunkaba?
SHAMMADO: Aakhiro ..... yaa?
GUULEED: Aakhiro iyo Adduunkaba is raaci. Weligood lama kala reebo kuwaase.

SHAMMADO: Haddaad saas doonaysid maxaad anna Xajka iigu dhigi weyday, Guuleedow!
GUULEED: Xajkaa?
SHAMMADO: Haa.
GUULEED: Sannadka dambaa (primo candidato) tahay. Sow war cad ma aha?
Middii iigu darrayd baan illaaway:
Anoo hawl ku asqoobay
Oo itaalkayguna liito
Jimcahaagii illaaway!
Udgoonkaad soo shidanaysiyo
Agtaydaad soo marmareysay
Iyo waxaad eed tirsanaysay
Ilaah baan kugu dhaarshee
Islaaney i cafi!

SHAMMADO: Adduunyooy, xaal Allaa og!. Oo adaaban udgoon kuu shidanaayay kula noqotay miyaa? Mise nafteydaan u shidanayay?
GUULEED: Mayee sidaadaad isaga udgoon tahay, sidaada .... Horta dhabankaaga i ursii! (naaskuu dhabankeeda u dhawaynayaa).
SHAMMADO: Waar iga tag!
GUULEED: Naa waxayga anigaa iska leh!
SHAMMADO: Waar waxba ma lihid ee orod iga tag!
GUULEED: Konton iyo roobbo ! ohoohoo!
SHAMMADO: Waar iga tag haygu ciyaarin e, Guuleedow, haygu ciyaarin!
GUULEED: Naa sharac Alla, sharac Allee waa isla innagiiye ! waxaan ku weydiinayaa ...
SHAMMADO: Hee?
GUULEED: Intee maalmood baadan biyo dhabankaaga sidaa u marin?
SHAMMADO: Bismillaahi Raxmaani Raxiin! Waar maxaad iga su'aali waxaas?
GUULEED: Naa waan ku su'aalayaaye ii sheeg.
SHAMMADO: Siddeed maalmood.
GUULEED: Bal qofkaa daya, dhididkeedaa iska ribidoor ah. Bil haddayan biyo is marin waxba u noqon mayso. Dhididkeeda —ma taqaannaa— lafaha hoosaa barafuun ugu jiraa iyo Cadar-cuud.

Hadda waxba taasi ma aha e. Waan tegayaa. Waa ku kaa reerkii. (Gacantuu garabka ka saarayaa).
SHAMMADO: Iga daa gacanta, Guuleedow hee dheh.
GUULEED: Maca salaama, waan tegayaaye.
SHAMMADO: Waar bal kaalay, horta hee dheh, nin hadduu odayoobo.
GUULEED: Hee?
SHAMMADO: Oo aynigaad tahay gaadho, indhuhu waa himiimyo caqlina daa hadalkiisa.
GUULEED: Caayi godob.
SHAMMADO: Taasi wayga idlaatay e adhaxdaas qof ka duulay, isagaan kabmo aad ah si fiican loogu adkayn.

GUULEED: Yaa?

SHAMMADO: Isagoon kabmo aad ah, kabmo aad ah si fiican loogu adkeyn ma is taagi karaa?

GUULEED: Iska wado!

SHAMMADO: Waa mid aan ... suura gelayn e eraygaassi iiga jawaab!

GUULEED: Waxaan maqli jirey, nin baa reer inuu ka socdaalo damcay. Markaasuu yidhi, «wadeeco Alla» markaasey islaantiisii tidhi, «Reerka wadeeco Alla wax ha loogu daro!» Alkullu xaal Magshuuf.

SHAMMADO: Iigu dhaqso hadalka, Xaaji, kistoo xaajo ah baan leeyahay.

GUULEED: Waa yahay. Horta weligaa waad i liiddaa oo abjed aan wax tareyn iyo oday baad ii qarisaaye. Anigu kaama da' weyni. Waagii aan ku aroosayana afartan afar baa ka dhinnayd.

SHAMMADO: Ayo?

GUULEED: Haahey, runtu ma fantaa? Afar baa ka dhinneyd oo guumeys xagga Eebbe irsiq aan ka sugeyn oo oodan baabad ahayd. Haahoo!

SHAMMADO: Akhrud iyo Aabbe yasir baa lagu yidhi. Ninkaagii i soo balleeyey baa hadda ...!

GUULEED: Oodan baabad ahayd. Ogiyoo iska dhaafay ee adhaxdaa qof ka duulay haddii aan kabmo aad ah si fiican loogu adkeyn ma istaagi karaa iyo eraygaad ku hadlaysay haddii aan caqligeyga iyo aqoonteyda ku laabtay waxay iila egtahay ... waxay iila egtahay ... waxay iila egtahay ... waxay iila egtahay ... ina keen aqalka!

SHAMMADO: Waar waxba ka dooni maayo aqalka ee i daa.

GUULEED: Naa adigu xaaskeygii baad tahay, sow kulama ballami karo.

SHAMMADO: Haa.

GUULEED: Haa ina keen, waan idinla ballamayaa e. (Shallaayo oo daaha gadaashiisa ku dhuumaneysa ayaa markaa soo baxaysa).

SHALLAAYO: Haye Aabbo, maantoo dhan waan idinla taagnaa, wax inaan kuu dirsadaan rabay e.

GUULEED: Aabbo.

SHALLAAYO: Haye, Aabbo.

GUULEED: Oo adigu ma soo jeedday tan iyo haddeer?

SHALLAAYO: Mayee, Aabbo, wax baan akhrisanayey. Berri baan imtixaan leeyahay e.

GUULEED: Imtixaanku sow nagama dhammaado, soo jeedkiisa batay e!

SHALLAAYO: Aabbo, naga daaye, aabbo, hee dheh, anigu waxaan rabaa xajkii wax inaan kaaga dirsado. Aabbo waa inaad iga ballan qaaddo inaad ii keeneysid.

GUULEED: Xajkaa?

SHALLAAYO: Haa.

GUULEED: Maandheey hilqado iyo muriyado lagama helo xajka.

SHALLAAYO: Aabbo, waxaas aad u maleyneysid ma aha ee wax laga helo xajka iga ballan qaad inaad adigu, aabbo, ii keeneysid.

GUULEED: Haa ballan baan kaaga qaaday. Ii sheeg Aabbo!

SHALLAAYO: Aabbo waxaan rabaa, hee dheh.

GUULEED: Hee?

SHALLAAYO: Inaad woxoogaa biyo samsam ah ii keentid.

GUULEED: Adigaa?

SHALLAAYO: Haa.

GUULEED: Ha, ha,ha! Oo maandheey sannadkeedu intee buu ahaa, tolow? Lafteedaa boodday markaasey is moodday wax qaangaadh ah. Dembiba ma lihid, aabbo.

| | |
|---|---|
| SHALLAAYO: | Aabbo, adigu ii keen, bal iska daayoo! |
| GUULEED: | Waa yahay, waa yahay. |
| SHALLAAYO: | |
| SHAMMADO: | Naa naga tag. Necbiyaa carruur saacaddan soo jeedda. AAd mooddo inay waardiye gelayaan! |
| GUULEED: | Maad aragtay? Ha, ha, ha, Naa, Mayee soco, soco, aroorta ayey hawli kuu taallaaye soco! |

## ARAGTIDA LABAAD:

(Diiddan iyo Diiddane ayaa soo galaya)

DIIDDAN: Alla!
DIIDDANE: Alla!
DIIDDAN: Maxaad sheegtay ina adeer?
DIIDDANE: Waa nabad e maxaad sheegtay ina-adeer?
DIIDDAN: Ina-adeer!
DIIDDANE: Alxamdu lilla ! (wuxuu damcayaa in uu gacanta ka dhunkado)
DIIDDAN: Waalid kuuma ihiye hay dhunkan, kow dheh! Alla, maxaad soo naaxdood soo qurux badnaatay.
DIIDDANE: Haye.
DIIDDAN: Waar yaa hee!
DIIDDANE: Hee?
DIIDDAN: Alla, Aabbow! waar ina-adeer suuq ha marin yaan lagu cawryin e dee!
DIIDDANE: Horta mid ma og tahay?
DIIDDAN: Hee? waa tee?
DIIDDANE: Toddobaad idil ayaan magaalada ku jirey, kow dheh.
DIIDDAN: Haye?
DIIDDANE: Sidii la ii lahaa, Alla muxuu cayilay dhejis baa laygaga gooyay weliba, sow waxad garatay ma aha.
DIIDDAN: Oo maxaad sidaan ugu cayishay?
DIIDDANE: Dee anigu waxaan ku cayilay waa, miyigii baan tegay. Waan isa soo qaras bixiyey sidaan caano geel u soo dhamayay. Dee iska daa, miyaanad arkayn quruxda igaga soo baxday e yaa?
DIIDDAN: Waan tegayaa anna doorkan doorka xiga. Fasaxaan tegayaa.
DIIDDANE: Fasaxaa?
DIIDDAN: Haa, waayo meel aan ka maqnaan karoba ma aha meeshani.
DIIDDANE: Caafimaad ku soo qabo, dee! Nacam. Fasaxa yaanay ku dhaafin, een waxaan ku leeyahay, Diiddaney, waataan labadeennu guyaal kala baadnay oo warkeennu aannu is gaadhin oon kala goonni ahayn e, miyaanad weli guursan?
DIIDDAN: Guntanow hadalkaa
Gef weeyaan badidiisu
Oo arrinkii la gorfeeyona
Murti loo wada guuxo oo
Gaaban baa ku habboon
Ee anigu guur taladiisa
Garaadkeygu ma dhaadin
Dibna u soo gocan maayo
Oo anigu waan ku gaboobi!
DIIDDANE: Oo maxaa jira, walaal?
DIIDDAN: Dee guurkii loo xilanaayay baa
Galladdiisii dhammaatoo
Gubtaanyuu ku dambeeyey
Haddii uu gurmad waayona
Sidii goof laga guuroo
Biyihii ka gudheen

Gaddiisuu ku dambeeyn e
Anigu waan garba duubee
Adigu sow ma aad guursan?

DIIDDANE: Aniga sow ma aha?

DIIDDAN: Gabadh saddexqayd sidatuu keenayaa ma aha e kuma tashan isagoo kelidii socduu imanayaa!

DIIDDANE: Naa maxaad tidhi? Maradeeduna guduudan tahay!

DIIDDAN: Caynkaa weeye

DIIDDANE: Haye?

DIIDDAN: Haye.

DIIDDANE: Waxaan ku leeyahay:

Weli Diiddan ma guursanoo
Geddaas aad ku tilmaantay baan
Gacmihii uga laabtay oo
Gacalkii uu lahaa iyo
Xiisihiisii la gawracayoo
Isu soo geliddiisu
Waa googgaa cadaleys
Iyo gudhubaa gudhubaa
Iyo giraan suuqa ordaysiyo
Shabeel gaadmo yaqaan oo
Galabtii isa salaama
Gaban weeye wanaagsan
Gabadh weeye carfoon
Guddoonka aynnu dhammeyno!
Caawa gelbiskii
Berrina waa kala guur
Gogoshiiba la laab
Laguna kala yaac
Fantashiruu fil ardi!

DIIDDAN: Waar hee dheh;

DIIDDANE: Sow waxaad garatay ma aha? Markaa walaaley sidaasaan uga gaabsaday aniga ruuxeyguye, miyaaney gar ahayn?

DIIDDAN: Waar hee dheh;

DIIDDANE: Hee?

DIIDDAN: Guuldarro weeye sidaasi ye,
Haddii guurka la daayo
Lays gargaarsana waayo
Geyigaa goblamaayee
Labadeennan gacmood
Midkee guulle ka daahayoo
Dhaqankii gembiyaaya?
Hadda wax baan ku weydiinayaayee ka fiirso oo sida xaqa ahna u sheeg.

DIIDDANE: Waad i weydiisay sow ma aha!

DIIDDAN: Haa.

DIIDDANE: Aniga miyaa si been ah wax u sheegaya? Qoodh iyo xeraalaan ahaye.

DIIDDAN: Nacam billaahi.

DIIDDANE: Haddaad i weydiisay, dumarkaa Guulle ka daahoo dhaqankii gembiyaaya!

DIIDDAN: Bes, bes, bes,

DIIDDANE: Marxabba.

DIIDDAN: Waar miyaanad awel nin wax la weydiiyo ahayn? Waan iska gartay ee waan kugu eegayey. Haddana sidaan filayaad yeeshay!

DIIDDANE: Maxaan yeelay?

DIIDDAN: Bes, bes, ! Afkaaga heyso!

DIIDDANE: In runta la sheegaad diideysaa? Maxaad ii weydiineysay?

DIIDDAN: Runtii baad sheegi weyday!

DIIDDANE: Maxaad ii weydiisay
Oo maxaad ii weydiisay Diiddan!
Dabuubtaad i su'aashay
Een daacadda uga jawaabay
Haddii aad ka dudayso
Maxaan seh taa kaga daali
Dunjigiinna haweenaan
Dabacooda aqaanne!

DIIDDAN: Oo waar maxaad nagu taqaan? Maxaadse noo caayeysaa? Naga xishoo dee!

DIIDDANE: Idin ma caayine
Runtu waa dacar qooshanoo
Waa deebaaq ma huraan ah oo
Haddii doodda la saaro
Niman kaa u dulqaatee
Dumarku way ka didaanoo
Jidhkooday damaqdaayoo
Hadalka waa loo dusiyaayoo
Gartaa loo debciyaaye
Daah loogama qaadee
Diiddan raalli ahow
Oo danteenna aan wadano

DIIDDAN: Taasi waa dibindaabyo iyo
Dulmigaad ku mamateene
Dubaaqiinnu miyaanu
Dunida is beddelaysa
Doc ka raaci kareyn
Miyeydaan dhaqan duuga oo
Duqooboo laga guuray
Maskaxdiinna dayowday
Ka daweyni kareyn oo
Dowga toosan mareyn

DIIDDANE: Diiddaney aynnu doodno
Runtana aan iska diidno
Deeylqaaf weeye sidaasi oo
Waa dabeecad haween eh
Niman kaa aad dureyso
Haddeydaan ka dambayn
Dabuubtaan ku su'aalo iyo
Maahmaahdaan isku duubay
Diiddaney kala hufoo
Daliilkeeda caddee

DIIDDAN: Diiddanow taan hayey daayee

Dunjigooda haweenka
Adigoon dala'sannoon
la ii dardaar werinin
Maahmaahdaad isku duubtiyo
Duufaankaad igu khuukhin
Igu soo wada daa
Bal inaan ka dabbaasho
Inuu daadku i qaado
Door is mooddaye daawo.

DIIDDANE: Diiddan dab dhaxamooday baan kuugu heesiye daayee.

**HEES:**

1. DIIDDANE: Doc kastoo laga eegoo
Nolosha dunidu waa dabkee
Hadduu dabkii dhaxamoodo
Maxaa lagu diiriyaa?
Waa tilmaan la daahoo
Degdeg kuma habboonee
Adoo deggan u fiirsoo
Ujeeddadaa i deeqsii!

DIIDDAN: Haddii ruux la doortoo
Darajadii la saariyo
Xilkii daryeeli waayo
Dab dhaxamooday weeyee
Waa su'aal da' weynoo
Madaxa daalineysee
Wixii lagu diirinaayo
Dadweynahaa la weydiin

2. DIIDDANE: Durdurkaa laga cabbaa
Biyihii lagu dabbaashaa
Hadduu harraad dareemo
Darkee laga waraabshaa?
Waa tilmaan la daahoo
Degdeg kuma habboonee
Adoo deggan u fiirsoo
Ujeeddada i deeqsii!

DIIDDAN: Qofkii duunyo haystee
Dahabkana barkanayee
Wixiisu deeqi waayeen
Durdur oomay weeyee
Waa su'aal da' weynoo
Madaxa daalineysee
Darkii laga waraabin
Dadweynahaa la weydiin

3. DIIDDANE: Qofkii cudur dilaayo
Dawadaa bogsiise
Haddey dawo bukooto
Maxaa lagu dabiibaa?

Waa tilmaan la daahoo
Degdeg kuma habboonee
Adoo deggan u fiirsoo
Ujeeddadaa i deeqsii!

DIIDDAN: Dallaa'imada diintiyo
Distoorka iyo xeerka
Haddii dabool la saaro
Dawo bukootay weeyee
Waa su'aal da' weynoo
Madaxa daalineysee
Wixii lagu dabiibi
Dadweynahaa la weydiin

4. DIIDDANE: Subagga dufankiisaa
Dadku ku dhaashadaayee
Hadduu dufan basaaso
Xaggee baa dux looga doonaa?
Waa tilmaan la daahoo
Degdeg kuma habboonee
Adoo deggan u fiirsoo
Ujeeddadaa i deeqsii!

DIIDDAN: Dhaqanku dugsi weeyaan
Dalkiisu uu ku dhaatee
Haddii dadkiisu aaso
Dufan basaasay weeyee
Waa su'aal da' weynoo
Madaxa daalinaysee
Xaggii dux looga dooni
Dadweynahaa la weydiin.

DIIDDAN: Hayeh kow Diiddanow! ma i qaaday daadkii mise waan ka dabaashay?

DIIDDANE: Haah! cajeb waa yaab iyo af kala qaad. Diiddan waxan ku leeyahay waan yar wareeraye waa inoo kulan dambe iyo nabadey, nabadey Diiddan!

DIIDDAN: Diiddane ma dhaka-faartay? Waa sidaasoo aan dooddeennii fari ka qodneyn. Nabadey Diiddane Eebbe ha ku caafiyo.

## JILKA LABAAD

## ARAGTIDA KOWAAD:

(Shallaayo oo dariiqa mareysa ayaa Shabeel jirjirka ku qaadayaa oo daandaansanaya).

| | |
|---|---|
| SHALLAAYO: | Heey, Alla bisinka! Waar maxaad isku waaleysaa ood iigu dhaceysaa intaasaadba la'egtahay e. |
| SHABEEL: | Adigu waad gaaban tahay, sow ma aha? |
| SHALLAAYO: | Waar anigu ma gaabni, laakiin anigu kuma doonan ee intaasaad le'egtahay e ! Nimankii hadda waxaa bay keeneen naaguhu inay dariiqa ka mari waayaan! Heedheh, isku xishooda oo naagaha ha dardarina! |
| SHABEEL: | Naa kaalay, kaaly,! Naag baad tahay ee marka hore maxaa dariiqa ku keenay? Intaad dariiqa goysaad weliba is waalwaaleysaa! Marka, haddii Alla kuu roon yahay, dumarkaa isku xishoon jiroo, waddooyinka bannayn jiroo waa adigan yuuban e iska soconayee inkaaran! Haddaad qof kaleeto ahaan lahayd maantay... ! Aad weliba is la jid leedahay, ma isku dhacnay mise anaa kugu dhacay keligey? |
| SHALLAAYO: | Alleylehe aad iyo aad baad isugu ciyaartay! Hee dheh, intaad le'egtahay sow iskuma... ! |
| SHABEEL: | Ruuxaaga haddaad rabto mar dambe, anigu haddeer waa kaa xishoonayaa, qof dambe ha dardarin, haddana iska tag! |
| SHALLAAYO: | Waaryaa ka fiirso hadalladaad leedahay! |
| SHABEEL: | Soco, soco! kaalay, kaalay! Naa kaalay, belaayo.ku aragtaye. |
| SHALLAAYO: | Maxaad ii sheegeysaa? |
| SHABEEL: | Waxan kuu sheegayaa inaan kuu gefay, meelna kaaga dhacay anaana kaa gardaran, markaa iga raalli ahaw! |
| SHALLAAYO: | Waar iga leexaa lagu yidhi! |
| SHABEEL: | Maxaa yeelay, weliba adigoo iga leexday anaa ku soo doontay. Gardarro! Ash-hadu an laa Ilaaha Illa laah! |
| SHALLAAYO: | Waar adigoo isoo doontoo awalba waa laysaga jeedee, hadda maxaad i leedahay. |
| SHABEEL: | Waxaan ku leeyahay, walaaley, innagu horta gardarro isku qabsan mayno, anaa iska leh; laakiin markaan isku dhacayno ama aan kugu dhacaayay, anigu adaan ku doonaayay. Anoo isla hadlaya ayaan an... markaa...saas iiga raalli ahaaw! |

Haa, horta sidii dharab arooryaad
Amase dhool gu'yaal
Ama dheeman iyo luul
Amase dhayda caanaha
Inanyahay, dhalaalkaagaa
Qalbigeyga dhaawacay oo
Hadba soo dhufanayee
Haa, dhuunigii waan ka haayiray
Hurdadii waan ka dhaar maray
Dhawr dhexe habeenkii

Gurigiinna dhiniciisaan
Dhalallada wareegaa
Dhakhtar baan u tagayoon
Idhi dhiigayga miisaan
Badh baa kaa dhucuu yidhi.

SHALLAAYO: Haye?

SHABEEL: Dhudiyey ina-adeer, dhuuxaa i soconayoo. Adaan kuu dhimanayaaye, dhibtaa haygu eegine bal gacan qaadka ii dhiib!

SHALLAAYO: Waar iga tag gacantaada ma aqaan e ! Alla aabbahay Guuleed Cawaalow! yaad sheegeysaa anigatan Shallaayo ahaa?

SHABEEL: Adiga lee waaye.

SHALLAAYO: Dhallinyarada sabankaan
Inanyahaw la dhaygagay
Jeceelkoodu dheef ma leh
Waa dhadiyo ceeryaan
Mar qurey ku dheehdaan
Bay dhay lulaan tusaalaha e !
Adaan dhalashadaydiyo
Magacayga dhaadayn
Jeceelkaad la dhimanaysaa
Dhiirranaa ina-adeer.

Maba dhalan e dhawrtaysan okaa! Hooyaday Shammado Liibaaneey! Waar maxaad ii sheegaysaa?

SHABEEL: Awel aan kugu ogaaye anigu. Aftahannimadaada iyo gabyaagaaga iyo heestaada waan kugu ogaaye markaa taasi waa goonnideeda. Laakiin waxa jira, ma nin aan ku aqoon oo iska kaa baacsanaya oo ciyaala suuq aad ii qaadatay?

SHALLAAYO: Iba garan meysid oo dee, imaba taqaanid e !

SHABEEL: Ma annagii Iskuulka Macallin Jaamac lixdanki isla dhigan jirey! Oo markaan ka soo baxno derbiyada aan kuugu fasiri jirey duruusta, ayaad, haddii Eebbe kuu roon yahay, weliba ima arag leedahay?

SHALLAAYO: Waar aniga iskuul ilama dhigan jirin imana taqaanid e, maxaa jira? Haddaad i garanayso gurigaygaad iman lahayd oo waan ku arki lahaa, i garan meysid aniga e, walaal ha i daalinnine nabadgelyo!

SHABEEL: Naa waan xishood badanahay e, haddii aan magacaaga iyo magaca aabbahaa iyo ka hooyadaa oo sax ah kuu sheego, ka waran? Ma yeeli waxaan kuu sheego?
Haddii aan magacaagiyo, macaaney, habartaa iyo aabbahaagii mudnaa, magacyadoodii aan sheego, amase kuu mariyo, muranka maad iga dayn oo muraadkii aan u socdo, ina-adeer ma dhammayn.

SHALLAAYO: Nacam, taasi hadalba kuma jirto.

SHABEEL: «Al-cahdu dayn liman lahu diin». Axdigu waa deyn laakiin ninkii diin leh buu ku yahay. Hadhow adigu arrinka kama bixi kartid e ogow! Hooyadaa, dambigeeda Allaha dhaafee dembiba ma laha e, waxa la yidhaahdaa Shammado Liibaan. Aabbahaana waxa la yidhaahdaa Guuleed Cawaale, adigana Shallaayo Guuleed Cawaale.

SHALLAAYO: Walaal hee dheh, maxaan kaala hadlayaa! Aniga i garan meysid, kow dheh; laakiin waxaad waxaa ku hindistay nin sixirow aad tahay. Markaa aniga sixirkaaga igu gadan meysid e nabadgelyo!

SHABEEL: Kaalay, walaaley, gacaliso! wax sixir lagu baran karo magacyadooda sixiixoodaba ka badan e kaalay. Aniga nin iska sheex badan baan ahay. Markaa hooyadaa iyo aabbahaa xataa dad meel aan kula soo koray waanan ka xishoodaa ma ahee waad i taqaan, markaa xishood baa waxaa kuu geynaya. Markaa arrinka ii dhammee keliyah, aad iga ballanqaaday, haddi aan magacyadiinna sheego. Hadda caytan iyo waxaas ka gaadhi maayo, mana ihi sixiroole. Ilmo awliyaan ahay anigu.

SHALLAAYO: Maxaan dhammeynaa hadda.

SHABEEL: Waxaan dhammaynaynaa hadda ballankaad qaadatay, sow sidaas ma aha? Haa dheh, dee.

SHALLAAYO: Haahey e waa maxay?

SHABEEL: Haa, waxaan samaynaynaa ... nikaa dhinnix yaan samaynayaa.

SHALLAAYO: Waa maxay nikaax dhinnixihi?

SHABEEL: Qudbo yar oo nikaaxa weyn ka sokeysaan sameynaynaa oo adiga iyo aniga aan isku ognahay.

SHALLAAYO: Waar hee dheh, qudbada dhinnixi ah eed sheegeysid ... sow isku aroos ma aha wuxu?

SHABEEL: Waa nus aroos. Arroska weyn hadhow baan dhiganaynaa sababtuna waxay tahay, anigu horta sida amba aad iiga jeeddo ama aad igu maqashay amase dawladda meel weyn ka haya oo Diritoor ah, shaqo imbortantina ah haya oo tambareeri yaan ahay, tambareeri! Markaa waxa iga maqan saddex, afar bilood mushaharadoodii iyo xaqal ciidkii iyo luuliyadii iyo waxaasaa iga maqan. Markaa haddii aan qaataan kuu samaynayaa aroos weyn. «Shiirkole Ufishaalaan» kugu aroosayaa. Baabuur cad iyo baabuur madow, xataa taksi ha ahaado, baabuur ka baaqdaa magaalada ma leh! Toddoba baxaagii baa hadhay ma aheen oo? Bal ka fiirso adigu maanta waa ku kane: Amaba Jubba korkeeda amaba Shabeelle korkiisa, amaba Tiyaatarka korkiisa.

SHALLAAYO: Haye ?

SHABEEL: Markaa nikaax dhinnixi aan hadda samaynaynaa. Yeelay dheh adigu!

SHALLAAYO: Nikaaxa aad hadda kala qalqalloocinaysid baan ka yaabay.

SHABEEL: Nikaaxani ma qalloocna ee maxaad leedahay?

SHALLAAYO: Sow adigu aroos uun ma aha?

SHABEEL: Haaye, waa aroos. Haaye waa nus aroos!

SHALLAAYO: Waa hagaag hadduu aroos yahay.

SHABEEL: Haahey. Waana isu dhaaranaynaa. Maxaa yeelay, waxa la yidhi, wixii qof ogyahayna waxa sheega jinni, wixii laba ogtahayna qof baa sheega. Si aan waxaasi u dhicin hays sheegin, anna hay sheegin, hana ina sheegin!

SHALLAAYO: Dee ma ciddaan ka qariyaa?

SHABEEL: Ciddaa sheegtaye xataa shimbiraha haw sheegin, inta aan aroos weyn dhammaynayno! Haddana Nikaaxii baa dhacaya e, Sheekh la yiraahdo Sheekhunaa... Sheekh... Adigu Awliyo Alla imanaysa ha ka tegin meeshaa!
(Shabeel baa baxaya)

SHALLAAYO: Waa hagaag.

**ARAGTIDA LABAAD:**

(Waxa soo galaya Sheekh, Saaxiib iyo Markhaati)

SHEEKH: Assalaamu calaykum Shabeel!
SHABEEL: Wa caleykum salaam. Haye Sheekh?
SHEEKH: Ma iska faydoo?
SHABEEL: Ilaahay xamdigiis.
SHEEKH: Annagoo Calyaale joogna baarkoo la yiraa «Night Club Jungle Hotel» Abey oo haddee hilib iyo bariis iyo caano iyo haddii Ilaah kuu roonaado, adeeggaagaa i soo gaaray.
SHEEKH: Maxaa kuu darnaa?
SAAXIIB: Sheekh, saaxiibkay inaan wax su'aalo ma ii oggashahay? Sheekh ii ruqsee!
SHEEKH: Haa, haa.
SAAXIIB: Shabeel beryahan xaggee baad ku maqnayd? Iaguba waaye miyaad naga kibirtay? waa sidee?
SHABEEL: Maya ee waynnu kala raagnaye.
MARKHAATI: Suuqii baa ku xumaaday! suuqii baa ku xumaaday! soo har geli waa!
SHABEEL: Ma anigaa?
SAAXIIB: Maba ictiraafsanid Sheekhan baan ku leeyahay e.
MARKHAATI: Haygu dirin Sheekha! Ash-haddu an laa i Laaha Ilaahay illa Ilaa!
SHEEKH: Wax ii dhiibi jirtee waxaan u baranay meeshii Sheekha haygu dirin! Sheekha haygu dirin!
SHABEEL: Abbow Sheekh, waxa jira horta ee, saddexdeennan qofood waataan ballan lahayn sdeenna.
SHEEKH: Haa.
SHABEEL: Sheekhaagan weyn, Ilaahaa weyn e iyo gacanyarayaalkaba, dadka inaan qatallo.
SHEEKH: Qatallo.
SHABEEL: Dabadeedna aan qarribno.
SHEEKH: Qarribno.
SHABEEL: Marna aan qarxinno.
SHEEKH: Qarxinno.
SHABEEL: Dabadeedna qarinno.
SHEEKH: Qarinno.
SHABEEL: Saddexdeenna qofood qaynuunkii noo degsanaa qodobkiisa lixaad waa tii uu ku qornaa.
SHEEKH: Nacam!
SHABEEL: Qof wanaagsan ee fiican ee quruxdeeda la yaabo ayaan saakay soo yar qafaalay.
SHEEKH: Soo qafaalay.
SHABEEL: Xaqal ciid aan la qaadan iyo qosol aan jirin laabta iyo sidaan been u qubaayay, qalbigeedii iyo keedii yaa Ilaah isku qaaday.
SHEEKH: Fariid! fariid! wad wad!
SHABEEL: Hadda awel adaan wax qabsan oo quraan fiican aqoon e Sheekh Qiyaamo ku noolow!
SHEEKH: Edeb lahaw, edeb lahaw! waad ii gefeysaa!
SHABEEL: Qudbadaadii jabnayd iyo nikaaxaagii qalloocnaa 'caawa iigu

qiyaasi. Qiiq haddaanan ka duulin qaan-gaar aanan ahayn e!

SHEEKH: Marxabba diyaar baan kuu ahay.

SHABEEL: Diyaar sow iima ihid!

SHEEKH: Sug; sug! kaalay intii naag kugu nikaaxay ma ogtahay adiga? ma xusuusataa?

SHABEEL: Intaan kuula imid, haa.

SHEEKH: Sagaashan iyo sagaal baan joognaa.

SHABEEL: Anaa la imid.

SHEEKH: Aniga meeqaad igu nikaaxday?

SHABEEL: Waxaad la timid baan kugu nikaaxay.

SHEEKH: Anaa kuu sheegaya ee tiri! Madiina-kinsi kow dheh.

SHABEEL: Kinsi, laba, kow.

SHEEKH: Miciyo — ma — noogto, kow dheh.

SHABEEL: Afar.

SHEEKH: Muunad — Alif — yeero, kow dheh.

SHABEEL: Lix.

SHEEKH: Maxaa kalee igu xirtay?

SHABEEL: Intaad la timid adiga. Lixdaas lee la timid.

SHEEKH: Hadda waxaad yeeleysaa, qoftan aniga iima dhaaftidoo?

SHABEEL: Tanaa?

SHEEKH: Haa.

SHABEEL: Wax kale iska dhaafe baabuurkii Fanax ee xamarow ahaa haddaad ii keento tan dhaafi maayo. Maxaa yeelay waa qof biyo dhac aad leedahay.

SHEEKH: Haa. Marka waxaad yeeleysaa, iyada xataa ku dibaaq. Halkii kale soo jiri dheh yaa? saaxiibteed ma jirtoo? Too saaxiib la eh? Calaa kuli xaal maqal, hadda waa kuu dhammaynaa, kow dheh, hadhow adaa xaalkeenna dhammayn e, noo keen bax!

SAAXIIB: Horta Sheekh, mid baan ku su'aalayaa.

SHABEEL: Waa intaa hadal ma leh!

(Shabeel baa naxaya)

SAAXIIB: Maya e adiga ma aha e, Sheekhi, mid baan ku su'aalayaa. Anigu waan daba socdaa uuna e hadmaa aniga lay mehrinayaa?

SHEEKH: Diyaar, aniga burunti aan kuu ahay. Ma ku dhihinoo sidee weeye.

SAAXIIB: Adduunyadii waan nacay. Aduun baan kaa xishoonayaa ku daba socdaaye.

SHEEKH: Maya, maya, xishood ma jiro. Sharci waaye. Sharci lee waan kuu dhammaynaynaa. Nabadaada gal. Maslax miskiin walow kaan Caasha dheer!

SHEEKH: Weysaan qabaa hayga jebinin, weysaan qabaa!

SHALLAAYO: Haye, Sheekh.

SHEEKH: Wallaahi, way ka dhacaysaa!

SHALLAAYO: Haye?

SHEEKH: Ii waran bal.

SHALLAAYO: Nabad, Sheekh.

SHEEKH: Islaantii la sheegayey adiga miyaa?

SHABEEL: Islaan ma aha e yartii.

SHEEKH: Haa, yartii, yartii, miyaa? Waan gefay, adigu, kistoo ma taqaan, xis iska dheh, sug, horta aan dhammaysanee. Waxaan ku iri, adiga iyo wadaadkaan ma dhammaysateen xaajadiina?

SHALLAAYO: Haahey Sheekh.

SHEEKH: Hadda gacan-yarihii aa kula hadlee.
SAAXIIB: Sheekh, tani indho wadaad baabay leedahay.
SHABEEL: Ilmo awliyo waaye!
SAAXIIB: Alla, tan dhal awliyaan u maleynayaa.
SHABEEL: Afkaa caalin.
SAAXIIB: Imminka waa li ilbaxay ma aragtay, waxa tihiin labadiinuba laba qof oo dhallinyaro ah. Markaa sow naguma kalsoonid wixii aannu, ma aragtay, annagu meherkaagii aannu ka soo qaadno? sow naguma kalsoonid?
SHALLAAYO: Haa, waxaad garatiin, waan idinku kalsoonahay.
SAAXIIB: Dhal awliyo inaad tahay caynkaa baa lagu garanayaa. Een, imminka dee waa la ilbaxay. Haddaannu kaaga dhigno ka waran, adiga aannu kuu badinno weliba,een, aannu, ma aragtay, Boqolkii shilin aannu kugu meherinno.
SHALLAAYO: Waxba kama qabo haddaad ii garateen.
SHEEKH: Hadda waxaan ku iri, laba weeye nikaaxu, koo yar iyo koo weyn, kee weeye nikaaxaa eed jeceshihiin?
SAAXIIB: Kii yar, kii yar!
SHABEEL: Taasi waan dhammaysanay, midkaa yar.
SHEEKH: Koo saqiiratun weeye, koona kabiiratun waaye.
SHABEEL: Saqiiratu iigu nikaax!
SHEEKH: Haa.
SHABEEL: Maxaa yeelay, midka weyn waan ku nikaaxi lahaaye, iyadaa yar oo waa saqiir tahaye.
SHEEKH: Haa. Iyadaa yar. Wajigeedu foolkeedu ku yaal ma ahinoo? Waxaan ku iri, adduunyada gacalkeeda iyo qaraabadeeda ma ka dhow yihiin?
SHABEEL: Aabbaheed isagoon dembiba lahayn oo yar uun buu xajkii iska aaday, isagoo dadaal uun een dembina lahayn waar dadku waa dad ...

SAAXIIB: Musaafur ah.
SHEEKH: Musaafuratun baciidatun aa la yiri. Kheyr waaye. Tanaa u dhow uun. Xaaji sax ah weeye. Hadda Xaajigii waan u duceyneynaa. Baabal kaaf soo bixi baabahay. Baabul khaa waa adag yahay e qorta, bes, Alla ha kaa saaro adigee, kaaf aa lagu dhahay, kaaf! Haa, waa tan baabul kaaf weeye, intaa laga fiirinayaa ma aheen oo? Sharciga, ma taqaan, baxar waaye. Ma la geli karo hadhow, haa. Hadda nikaaxii baan gelaynaa. Gacantaa ii soo dhiib. Adiga, adiga naftigaaga gacantaada waaye. Waxaan ku iraa is kaga dhawaaq.
SHABEEL: Kaa diidi maayo, Sheekh.
SHEEKH: Khabiltu.
SHABEEL: Khabiltu.
SHABEEL: Khabiltu.
SHEEKH: Wa inkaxtu.
SHABEEL: Wa inkaxtu.
SHEEKH: Wa dalaqtu.
SAAXIIB: Waa furriin.
SHEEKH: Dalaqtu, adiga iska dheh!
SHEEKH: Kal musbaari kabiiri.
SHABEEL: Kal masaamiirin kabiiri.

SHABEEL: Kullukum.
SHEEKH: Cadday Barraw.
SHABEEL: Cadday Barraw.
SHEEKH: Jeellow.
SHEEKH: Jeellow.
SHEEKH: Tuwaar mallow.
SHABEEL: Tuwaar mallow.
SHEEKH: Afay mudow.
SHABEEL: Afay mudow.

SHEEKH: Ku wada bax!
SHABEEL: Ku wada bax!
SHEEKH: Nikaaxii meeshaasuu noogu dhammaaday.

(Sheekhii iyo intii la socotay ayaa baxaya; waxa isku soo hadhaya Shabeel iyo Shallaayo)

SHABEEL: Hadda arrini waa inoo dhammaatay, kow dheh, waxaan ku soo tusayaa guriga bal.
SHALLAAYO: Inaan kuu xaaqxaaqo, markaad maqan tahay miyaa?
SHABEEL: Aniga gurigeygaa?
SHALLAAYO: Haa.
SHABEEL: Xaashaa lilla.
SHALLAAYO: Mm.
SHABEEL: Korontaa afuufta, xay tahay xaaqidduna? Ma anaa kuu geynaya adigoo ina Guuleed Cawaale ah guri u qaadanaya xaaqinta oo fiiqaya? ma anaa ku geynaya? xaraan! Ee waxaan leeyahay, nafley waa meyd e bal maadaama aanan tegi karin guriga intii aan arooska weyn ka dhamaynayno, arooskan yar inta lagu jiro, markaad iskuulka ku socoto, guriga uun le kulan ku suubinno, daymo ahaan xataa.
SHALLAAYO: Waar hee dheh, hee dheh, maa naga deysid, walaalow?
SHABEEL: Maya,maya! waa ku soo tusayaa ayuun baan ku leeyahay.

## (ARAGTIDA SADDEXAAD)

| | |
|---|---|
| **DIIDDAN:** | Waar horta maxaad nooga nixisaa, asbaxe? |
| DIIDDANE: | Naa isku nax oo ha naga nixin! |
| DIIDDAN: | Waar asbax e ha naga nixin! |
| DIIDDANE: | Ma yaraantiibaa lagu dili jirey? |
| DIIDDAN: | Guunyohow |
| DIIDDANE: | Naa naga tag guumeys yahay madaxa dudumo ah leh. Acuudu Billaahi Mina Shaydaani Rajiin ! Naa maxaa ku helay? |
| DIIDDAN: | Waar dadka ha ka nixinnin adigu! |
| DIIDDANE: | Dhegeyso! |
| DIIDDAN: | Waxaannu iminka samaynaynay ma war baad ka haysaa. |
| DIIDDANE: | Maxaad samaynaysay ma daaraad dhisaysay? |
| DIIDDAN: | Wax baad naga kala tuurtay. |
| DIIDDANE: | Walla? Maxaad samaynaysay? Ehe, waxaan ku leeyahay, sheekadeennii yareyd baynnu wadaneynaa. |
| DIIDDAN: | Ina-adeer, maad iga deysid! |
| DIIDDANE: | Naa aan iska wadno! |
| DIIDDAN: | Bal wad. |
| DIIDDANE: | Diiddaney, xeeladdooda haweenka, waa tii Xaawo bilowday ee Jannada Aadan ka xoortay. |
| DIIDDANE: | Diiddaney!<br>Xeelladdooda haweenka<br>Waa tii Xaawo bilowday<br>Ee Jannadii Aadan ka xoortay<br>Xadiiskaaba dhigaayoo<br>Xarrafkii Carraweelo<br>Waad xusuusan tihiin<br>Idinkaa na xumeeya oo<br>Xidhiidhkii dhaqankeenna iyo<br>Xeerkeennii gembiyaayoo<br>Xaalkii guurku lahaa<br>Si kalow xafiddeen |
| DIIDDAN: | Wac-wac! |
| DIIDDANE: | Xarrago aan naf lahayn<br>yaa, dhabankaaga ku xoogso<br>Dayuurad xiinta ku raac<br>Baabuur xiise leh fuul<br>Kan xisaabta ka qaad<br>Kan xariirta ka gooso<br>Kanna xaafadda geeyoo<br>Xogtaada yaan la ogaan!<br>Intaas oon xaq ahayn<br>Yaad xambaarsan tihiin e<br>Ar xaawaley isla yaaba<br>Oo xishoodkii lumay doona!<br>Laa Ilaaha Illa Ilaa, Muxammad Rasuulu-laah! |
| DIIDDAN: | I dhegayso haddaba «Af af loo waayey baa ba'ay», baa Soomaalidu ku maahmaahdaa. |
| DIIDDANE: | Waa tahay. |
| DIIDDAN: | Waar xidhiidhkii dhaqankeenna |

Xumaantaa duminaysa e
Idinkaa leh xajiinta
Kol xiniinyo ku faana
Kolla xoog is bidaaya
Kolla diinta xadaaya
Xaqiiq weeye midkaasi yoo
Xaawalay is ogaatay!
Xamas weeye haween
Iyo xoolahaad tirsataan!
Tan xidh oo tan xabaal
Tanna caawa xareyso
Tanna maanta xumee
Tanna xeebtiyo geeyoo
Calyaale ula xayaad
Tan wax baas u xambaari
Oo nolosheeda xabaal
Yaa xiskiinnii ku ekaadee
Midda aad xulataan
Haddii aad xaslataan
Aad xalaalmaal noqotaan
Dumarku may xad gudbeen e
Idinkaa xujadaa leh
Ee xilkas maad noqotaan?

DIIDDANE: Diiddaney, bal xog wareyso
Oo xumaanta dhalatay
Ee xakamaysay wanaagga
Haddii aan lagu xiiqin
Oo xididdadeeda la eego
Xooggeeduna hanoqaado
Xaqa way dumisaayoo
Xabaal bay ku riddaa

DIIDDAN: Isu sheega!

DIIDDANE: Sow maad garan?
Xaqa way dumisaayoo
Xabaal bay ku riddaaye
Xidhiidhkii dhaqankeenna
Xuubka guudka ka fuulay
Haddaynaan ka xayuubinna
Waa xaaraan nolosheennu
Innagu aan xusul duubno
Xaawalay is xilqaama
Oo ka tiirsha xaggiinna!

DIIDDAN: Waa hagaag e idinku xaggiinna ka soo tiirsha!

DIIDDANE: Annagu awel baan ka tiirinnay

DIIDDAN: Ma jirto. Haddaa ka tiirisaan annana waannu ka tiirin.

DIIDDANE: Guumeys hadal badan baad tahay.

DIIDDAN: Adigu hayla hadlin ! Halkaa imminka ma ku lahaa hadalkaaga iga daa?

## (HEES)

DIIDDANE: Xaajadii qalloocan
Qofkii ku xarragooda
Waa lagu xariiraa
In nalagu xantaa
Xaq miyaa xeer miyaa
Ma idin la xalaal baa?
Idinkaa xujooboo
Xuduudkii ka tallaabsanaayee
Naa, xishooda!

DIIDDAN: Annagoo xorownoo
Xaqayagii midhaystay
Inaad na xakamaysaan
Aad na xidhxidhaan
Xaq miyaa xeer miyaa
Ma idiin xalaal baa?
Idinkaa xujooboo
Xuduudkii ka tallaabsanaayee
Xubin na ssiya!

DIIDDANE: Inaad marada xaydaan
Xaglahana qaawisaan
Xuub caaro huwataan
Xeradii ka baxdaan
Xaq miyaa xeer miyaa
Ma idiin xalaal baa?
Idinkaa xujooboo
Xuduudkii ka tallaabsanayee
Naa xishooda!

DIIDDAN: Xilahuba haddii uu
Xaslan waayo tiisa
Xaawalay dhammaanteed
In nala xumeeyaa
Xaq miyaa xeer miyaa
Ma idiin xalaal baa?
Idinkaa xujooboo
Xuduudkii ka tallaabsanaayee
Xubin na siiya!

DIIDDANE: Daad nimuu xambaaraa
Badbaadada xusuustee
Hanadkaad u xilataan
Inaad xeeladeysaan
Xaq miyaa xeer miyaa
Ma idiin xalaal baa?
Idinkaa xujooboo
Xuduudkii ka tallaabsanaayee
Naa xishooda!

DIIDDAN: Marwadaad xodxodataan
Inaad xagasha goysaan
Ood dhashiinna xoortaan
Aad xannaanin weydaan

Xaq miyaa xeer miyaa
Ma idiin xalaal baa?
Idinkaa xujooboo
Xuduudkii ka tallaabasanaayee
Xubin na siiya!

DIIDDANE: Maxaad tidhi xubin na siiya?

DIIDDAN: Haa

DIIDDANE: Sidaa Alla idiin gawrac!

DIIDDAN: La idin gaowrac idinka!

DIIDDANE: Naa waxaan ku idhi, xubin baad sheegtee annagoo dhan baa na liqdeen. Kabihii baa na soo jeeda.

DIIDDAN: Waar is cun! Mar dambe dariiqa yaan kugu arkin.

DIIDDANE: Waxaan ku leeyahay ...

DIIDDAN: Waxaan ku idhi ciil baa iga kaa qabta.

DIIDDANE: Waar yaa islaama oo tan iga kaxeyta!

DIIDDAN: Waar yaa iga kaxeysta ! Dariiqa gurigeyga loo maro maxaan ammaan kaaga la'ahay?

DIIDDANE: Anigu dariiqa masaajidka aan u maro maxaa maalin walba ku dhigay adiga?

DIIDDAN: Ma adaa tukada?

(Labaduba way baxayaan)

## ARAGTIDA AFRAAD)

(Waxa soo galaya Shammado oo isla hadlaysa)

SHAMMADO: Maba soo socoto, sidee yeelaa? Tii gabadh ahaydna waa besteed! Nimanyohow, naagaha dhakhtar-ku-sheegga ahi maba shaqeysanayaan! Ilaah bay ka tahay! Hurdo iyo waxay ka soo bixi waayeen, een, waxay ahaytoy, een... Hadda armaan mid kale doontaa. Maya, iska sug cabbaare.

(Waxa u imanaysa Kulmiya)

KULMIYA: Hallow, how are you?

SHAMMADO: Maxaad tidhi mandheey?

KULMIYA: Ii warran

SHAMMADO: Haa, nabad. Maxaad la soo raagtay?

KULMIYA: Hadda dad buka ayaan ka imid oon fisito ka qaadayay, ayaaban saacaddan uga soo degdegay. Haye?
Maxaa darraa?

SHAMMADO: Maxaa darraa waa maxay? Sow tii gabadh ahayd besteed maaha?

KULMIYA: Maxaa ku dhacay?

SHAMMADO: Wallaahi garan maayo, laakiin sariirtaba kama kacdo; waxaan u malaynayaa inay Ameebe qabtaa.

KULMIYA: Maxay qabtaa?

SHAMMADO: Ameeba! Ameeba! calooshaasaa loo galay oo besteed weeye, oo waxaan weydiiyey.

KULMIYA: Hm......

SHAMMADO: Anigu hadda uun waxaan idhi; Kulmiya iigu yeedha e goormaad soo noqotay? Ayaan dhaweyd waxaan maqlay inaad timid.

KULMIYA: Haa, anigu waxaan soo noqday ... imminka in laba bilood ah waan joogay, horta Shammadooy ii dhaqso!

SHAMMADO: Haye

KULMIYA: Waxaan kaaga sheekaynayaa waxan dhakhtarnimada la yidhaa dhibtii aan ka soo maray.

SHAMMADO: Waa kaa muuqataa caatada iyo lafahaagaba. Haye?

KULMIYA:
Iskuulkii aan bilaabay
Ayaantaan ka barmoosay
Kooras baan u baxay
Orobbaan u baqoolay
You know Orobba?
Waxaan soo baranaayey
Dhakhtarradii u bislaaday
Ee bidaartu ay ku caddeysay
Cilmigii ay qoreen baan
Hadba beyj rogayey.

SHAMMADO: Waad u egtahay. Haye?

KULMIYA:
Shammadoy kaa basarkiisa
Bartay oo ka bogtay
Horta waa inaan baadho
Halkaa beerkiyo laabta
Bacdaddeeda ogaado
Haddii Eebbe badbaadsho
Innanta waannu bogsiin
Xubintii belbeleysa

Markaa waa biririf
Beenisiliin iyo kaalsho
Iyo kiniin baannu ku baanan.
Laakiin waxaan ku su'aalayaa, maxay cuntaa inantu?

SHAMMADO: Maxay cuntaa baad leedahay, waaba sakaraad e maxay cuntaa?

KULMIYA: Haye, cuntaday cuni jirtay, fitimiinka, fitimiin «C», fiitamiin «A», maxay cuni jirtay?

SHAMMADO: Yaa?
waxay cuntaa waxba kuu qaban mayso e sug.

KULMIYA: Waxay cunto ii sheeg!

SHAMMADO: Belaayo ku degtay!

KULMIYA: Ii sheeg waxay cunto!

SHAMMADO: Oo ma dhigaysaa?

KULMIYA: Oo! Dhakhtarnimadayda ma waxaad moodaysay bilaash? Three year baan baranayay. What do you mean?

SHAMMADO: Maandhey af Carbeedka iga aayare.

KULMIYA: Tell me please! Hadal, Hadal, Hadal!

SHAMMADO: Hadda maandhey, inkastaan reer beled ahay, ma ogtahay inaan af Talyaaniga sidaa u aqoon aad igula hadlaysid!

KULMIYA: Mi dispiace, ila hadal baan ku idhi. Dhaqso iigu sheeg!

SHAMMADO: Waxay cuntaa, basbaas, kow dheh.

KULMIYA: Haye?

SHAMMADO: Beer ceedhiin

KULMIYA: Yaa, yaa?

SHAMMADO: Basbaas iyo beer ceedhiin iyo bataato iyo babay iyo bingaal iyo bursaliid ay mar mar ku laab jeexdo, kaas horta waa bay ku sakaraadaa, way iska jeceshahay uun ma ogiye.

KULMIYA: Listen, what is the bursaliid? what is the meaning of ursaliid?

SHAMMADO: Sow taan ku idhi ma aha, haygula hadlin af Talyaani dambe!

KULMIYA: Waxaan ku idhi bahalkan aad sheegtay ... maxaad tidhi ... digir saliid leh ... maxay tahay?

SHAMMADO: Woho! oo maandhey, laba sanaad maqnayd, ma bursaliid baanad aqoon adigu? Belaayo ku degtay?

KULMIYA: Inantii halkay joogtaa?

SHAMMADO: Qolkaasay ku jirtaa. Mululukh malalakh! Naa, bal kaalay! Aaar illayn calaamo! Naa hee dheh bal kaalay maandhey, hooyo, hooyo, bal ii warran eeddo!

(Shallaayo oo meel agtooda ah jiifta ayay Kulmiya fiirinaysaa)

KULMIYA: Baadhay oo inantii uma baahna dawooyin.

SHAMMADO: Oo eeddo, tan besteed ah!

KULMIYA: Waabad aanad filanayn oo cudurkaa boqol jaad ah.

SHAMMADO: Hayee ma barbarkaa midigtaa, ma bidixdaa la hayaa, ma beerkay ka bugtaa, eeddo sow tan besteed ah. Sow tii bidaartu cilmiga kugu soo gashay waa sidee?

KULMIYA: I am very sory: weliba waan ka xumahay waxaan ka imidba halkii dadka fisitada lagaga qaaday. Ayaamaha oo kalena fisitada ma qaado, Khamiistaannu dadka baadhnaa. Laakiin inantaadii waa loo baxay, in kastoo cilmigaygii uun baan iminka cabbirtee, waan malaynahayaa taas.

SHAMMADO: Maxaa jira dheh, maaa jira dheh ee?

KULMIYA: Haye?

SHAMMADO: Waan iska ogaa, maandhey, in ilcayn u baxayso gabadhaa.
KULMIYA: Yaa, yaa?
SHAMMADO: Waa la cawryey?
KULMIYA: La cawryey!
SHAMMADO: Haa, maxaa jira iska dhaaf iyadu hadda maba ay raacin quruxdayda kow dheh, laakiin aabbaheed inta maal igaga baxday, Allahow naxariistee timahaagaa uma dhawa, ilcayntaa daraaddeed, qardhaas u goo, xidiid u shid, xagga ka laab wadaad u gee, naftii baa ka baxday.
KULMIYA: Oo kaalay, ma cudurkaasaa ku helay beri?
SHAMMADO: Sariir baan la saaraa baan ku idhi afar bilood.
KULMIYA: Miyey waalan tahay? Hadda maxaad naga soo luggoynaysay?

SHAMMADO: Waa runtaa oo awel baan gefay! Maxaa jira haddaan tahliil ama qardhaas u xidho wayba roonaan lahayd. Laakiin ilbax iska dhig baan is idhi, sow taan kuu sheegay.
KULMIYA: Waxaan ku idhi, hadalkeennii waxaan u malaynayaa, wuu is yara jiidhaye, inantaadii uur bay leedahay.
SHAMMADO: Ash-haddu ......
KULMIYA: Waa afar bilood.
SHAMMADO: Alla ba'ay! Ma anaan garan basbaaskiyo beerka ceedhiin! Alla ohoo hoy! Alla adduunka xaggeen ka aadaa? Xaaji GUuleedna iga dambeeyaa, Alla!
SHALLAAYO: Hooyo kaalay, maxaa kugu dhacay?
SHAMMADO: Allooy, ohoo ......
SHALLAAYO: Hooyo maxaa kugu dhacay?
SHAMMADO: Naa iga tag! Alla iga daa!
SHALLAAYO: Hooyo naga aamus dee, maxaa la ooyaysaa?
SHAMMADO: Ee, ihii, ihii ......
Calaacalayey calooshaada waxa ku jira
Calaamaddaan kuu qarsoon caawa maan filayn
Dhakhtarradeennii cuddoonayd codkay tidhi!
Hooyo, carrabkaygii hadal sooba celin waa
Cirkaa igu soo dumoo caafimaad ma qabo
Cammuudiyo hooyo dhulku wayla ciirayaan
Cadradi waa dahab e calafkaagii sow ma dumin?
Ciddaa igu wiirsan oo waygu caayayaan e
Xaggeen, cago bararayey, ceebtaan ula kacaayey?
SHALLAAYO: Hooyo, maxaad leedahay? Kaalay, kaalay, hooyo! Aniga waad i caayaysaa, hooyo. Aniga maxaa Ilaahay iigu jirrabay inaan ilmo wacal ah dhalo?
SHAMMADO: Naa waa maxay waxan caloosha kaaga buuxaa?
SHALLAAYO: Hooyo, aniga ilmahaygu wacal ma aha eaabbuu leeyahay. Haddeer baanan farta kaa soo saarayaa. Intii saddex bilood ahna ..., hooyo

nin baan ku nikaaxsanaa; Isagaa xishood badnaan awgeed, hooyo, aan dadka u imaan ma aha e, hooyo aniga maxaad ii caayaysaa? Adduunka ninka ugu maal badan weeyeba. Ninka adigu aad sheegeysid waa joornalyeeri! Adduunka wax ka maal badani ma jiro, markaasaa waxaad leedahay wacal baad siddaa! Maxaa inan wacal ah ii soo jiiday? Waad i caayaysaa, Hooyo aniga!

SHAMMADO: Naa hoy! Kaalay, ninka ma Hargeysaa loo beddelay sow mid la arko ma aha?

SHALLAAYO: Dee mayee hooyo, isagaa iska xishood badan e haddeer ma kuu keenaa?

SHAMMADO: Ma Shariif baa?

SHALLAAYO: Maya, hooyo dadkoo dhan baabu neceb yahay oo waa iska xishood badan yahay.

SHAMMADO: Maandhey in Ilaahay ku liibaano Adduun iyo Aakhiroba,dhan kasta, midig bidix goor kasta Ilaahay inuu ku liibaano ninkan wax Allaale wax laga rabaa ma jirto. Kuwaasaan u gadayaa! (waxay tuseysaa dharkeedii) kuwaas! Day! Xataa haddaan wax kale waayo Gambadeydaan u gadayaa.

SHALLAAYO: Kaagama baahnaba, hooyo dee.

SHAMMADO: Maandhey, ninka keen! Maandhey, shan daqiiqaan ku sugayaa.

SHALLAAYO: Haddeer anaa kuu keenaya.

SHAMMADO: In Ilaahay ku liibaano ii keen!

(Labadoodii way baxayaan)

(Shallaayo ayaa Shabeel meel waddo ah kula kulmaysa)

SHABEEL: Alla, Shallaayo!

SHALLAAYO: See tahay? Haye?

SHABEEL: Nabad.

SHALLAAYO: Hadda waa markaad jinniyada isku kicin jirtay!

SHABEEL: Maya, Nabad, Nabad.

SHALLAAYO: Markaa, Shabeel, bariido wanaagsan.

SHABEEL: Bariido wanaagsan.

SHALLAAYO: Bishaaro.

SHABEEL: Bilkheyr.

SHALLAAYO: Ballankaynnu lahayn barkhad baa ka dambaysay.

SHABEEL: Naa bal sheeg barkhadda!

SHALLAAYO: Haye, waa markiisii hadda jinniyada uu isku dari jiray!

SHABEEL: Maya, maya, soco,soco iska hadal.

SHALLAAYO: Laba beyn oo xalaal ah wixii Eebbe ka beero barkhad weeye wanaagsan!

SHABEEL: Laba beyn oo xalaal ah wixii Eebbe ka beero barkhad weeye wanaagsan, tanise aad uma buurna oo been been aan ku samaynay.

SHALLAAYO: Yaa?

SHABEEL: Been been aan ku samaynay.

SHALLAAYO: Been been aan ku samaynay yaa?

SHABEEL: Haa.

SHALLAAYO: Bisinka iyo Yaasiinka ! Alla, Beerka! Maxaad tidhi?

SHABEEL: Burjiga iyo alacaanka! Alla Madaxa! Naa maxaad tidhi?
Bilis Xaawaley, bal dhageysta gabadhaa aanan weligey arag e, waddada faraqa i qabsanaysa. Naa indhahaaga iga qari!
Naa kacoo bood weligaa oo

Bilistoo dhan u yeer
Biliis xoog lehna keen
Badweynta isku xoor
Baybaasoo is xabeebi
Dhaaf Baraako Cabdow
Buur Karoole kor u fuul
Baarlamaanka dhex qaad
Baanka Rooma ka bood
Baar ASaana walaaq
Waddada isku baaci
Baabuur ha iska daymoon
Fiyaad baasha ka goy
Liido baallo ka dheel
Beexaani isku maqiiq
Balcad dhaaf iyo Jawhar
Ilaa Boorama gaadh
Amase Balcadba xataa
Barkaad doontoba aad
Isku daadi Bansiin
Baaruudna isku daar
Barkaad doontoba aad
Oo bannaankaa iga qaad!
Haddaadse iga bixi weydo
Biliis kuu wici maayee
Waa Billaahi Tollaahi
Beerkaan kaa tumayaa!

SHALLAAYO: Waa Billaahiyaa? Waa Billaahi Tollaahaa?
Waar ma intaad i belaysay
Oo bahdii aan ka dhashay
Iyo baradii iga saartay
Oo labadeyda boqnood
Aad billaawe ku goysay
Booraan dheer igu tuurtay
Yaad balanbalkaa iyo
Hooggaa i baddaad igu caayi?

Ba'ayey laygu ogaa!
Nabsi biiray ma raago oo
Ma baaqdo oo ma fogaado
Ballankaannu lahayn
Berrituu ku hayaa
Kol hadduu bilo dhaafo
Kaama beydhi yaqaan e
Ilaahay biqihisa
Ku badbaadi nafteyda oo
Ina-adeerow haw badheedhin xumaantaa
In ILaahay ceebtaada asturo!

SHABEEL: Naa, na daa oo na dhaaf! Ilaahay biqihiisa ku badbaadi nafteyda oo, bannaankaa iga mar. Nabsi biiray ma raago, kaama baydhi yaqaan, hayga leexin adigu. Anaa iska leexin e adigu bnnaankaa iga mar.

**(HEES)**

SHALLAAYO: Sidii gool irmaanoy
Dhashii kala go'doomeen
Amase goodir buureed
Gantaali ay ku taal baan
Xalay gelin dhexaadkii
Anoo gaydhamayoo
Hadba gebi ka dhacayoon
Gar waliba ku seegee
Adaa garan waxay gubee
Garwaaqso waad ii geftee.

Nin geel badan lahaayoo
Guluf kala carraabay
Gallad wixii uu haystiyo
Gadhoodkii uu dhamayey
Gego madhan ka joogoo
Dhallaan gaajo haysiyo
Nirgihii ku goobeen
Ganuunsaday sidiisii
Adaan garan waxay gubee
Garwaaqso waad ii geftee.
Gurigii aan aloosiniyo
Rugtaan kuu goglaayiyo
Gartaan gebagebayniyo
Guddoonka iyo dhaartii
Haddii aad ka gubatoo
Garaad-xumo iqaadoo
Cidlada igaga guurtay
Nabsigu kuma gefaayee
Adaa garan waxay gubee
Garwaaqso waad ii geftee!

SHABEEL: Ma tumatay intii tamartaa ah?
SHALLAAYO: Waxaan ku idhi, heedheh
SHABEEL: Haa
SHALLAAYO: Walaalow, mid axsaan iigu samee oo hadal baan ku leeyahay ee iga dhegeyso!
SHABEEL: Hadduu i anfacayo
SHALLAAYO: Aniyo adiga maalintaan is baranay mayga ballan qaaday ciddayda inaad iga doonatid oo reerkayga u tagtid?
SHABEEL: Nacam
SHALLAAYO: Iska daa wax kale e ma tidhi baabuurta magaalada joogta hal baabuur ka hadhi maayo arooskeenna?
SHABEEL: Ilaahay been uma sheegin
SHALLAAYO: Shiirkolo Ufishaale ayaa arooskeenna lagu samaynayaa ma tidhi?
SHABEEL: Wax aad ku saayidisay ma jiraan waa intaan sheegay
SHALLAAYO: Toddobaad-baxayga waxaan ka dhigayaa ama Jubba ama Shabeelle ama meeshatan maxay ahayd ... may tidhi?
SHABEEL: Heli ogaa, ma qofkaan u sheegaynaa? Nacam

HALLAAYO: Wixii oo dhan ka soo kac!
HABEEL: Waa ban ka soo kacay
HALLAAYO: Wax lagaaga baahan yahay ma laha
HABEEL: Waaban layga helayn
HALLAAYO: Wax kastaba ciddayadaa dhiibaysa. Ama gurigii ama alaabtii, wax kastaba e walaalow, hee dheh, in Ilaahay ceebtaada asturo, maanta inta i asturtid, yaa! walaalow, wax kasta ciddayadaa dhiibaysa e ciddayadii keliyah soo bax iila tag!
HABEEL: Ma dhammaysay?
HALLAAYO: Waan dhammaystay
HABEEL: Kaa yeeli maayo
HALLAAYO: Waar ina-adeerow
HABEEL: Kaa yeeli maayo
HALLAAYO: Waar ina-adeerow
HABEEL: Kaa yeeli maayo
HALLAAYO: Waar ina-adeerow
HABEEL: Kaa yeeli maayo ! No !
Inta aan naago sagsaagay oo
Khudbo aan sax ahayn iyo
Meher aan sal lahayn iyo
Jujuub aan ku sameeyey
Taasi waa ku siddeetan
Haddeer sii socotaa
Siraadkii waddadii iyo
Su'aashii qabrigiinna
Kollay way sugayaan e
Waar ragow saan wax idhaa
Ma wadaa mise waan joojiyaa?
Saaxi ma aha naftoodu
Oo iyaba waa na siraan
Saaxiibtay Marka joogtaan
Salaanteeda ku maqnaa
Suuqanaan yar gaadhay
Shineemaan gelayaa

Marna koombe koombey saliid ku guraan. Meel ay geynayaan ma ogiye!
Waar saaxi ma aha naftoodu ye
Haddii aad yar su'aashona
Sannadkaa lama joogee
Igu hayso sideyda Hadday saa socon weydona
Sagaalkaaga carruuraan
Subixii kuu dhigayaayoo
Suuqaan gelayaa
Bay jawaab kaaga dhigayaan
Ilaa aan geeyo sagaashan
Oo boqol aan ka sameeyo
Oo saantooda aan bi'iyo
Salkaba u dhigi maayo
Saasaan ka wadaa!

## JILKA SADDEXAAD

## (ARAGTIDA KOWAAD)

SHAMMADO: Arbaca, Khamiis, Talaado... oo kaalay, kuwii la lahaa ila tali bay dadka uga jawaabaan, tolow! Waa horaan warqad u dirtee miyaanay sooba jawaabayn? Mise kii wax ii qoraa faataadhugle ahaa oon waxba aqoon? Allaylee dhakhtaradii bidaaraystay in aan u dhiibtaa la ii qaatay!

COD: Halkani waa Raadiyo Muqdisho, codkii Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya. Ila tali, ila tali, waa barnaamijka ay dadweynuhu dhibaatooyinkooda nagala soo tashadaan, ayna warqad noogu soo dhigtaan. Anaguna aan uga jawaabno sida ay noola tahay.

Barnaamijkayagan maanta warqadda u horreysa waxaa noo soo dirtay gabadh la yiraahdo Shammado Liibaan oo Muqdisho joogta, warqaddeedaasi waxa ay ku tidhi:

SHAMMADO: Maxay ku tidhi? Maxaan idin lahaa? Wax ma aqoon ninku, magacii uun buu dhigay. Ilaahay bay ka tahay wax kale. Waa ii xarxarriiqay oo maan dhakhtaraddiiba la baryo haddaan cid kale u waayay. Sug muxuu ahaa?

COD. SHAMADO: Indhaha nuurkoodii
Aan adduunyada ugu jeclaa
Aan keligeed ubad lahaa
Ma Aar baa igala tegey?
Miyaa la afduubay oo
Afmiishaar baa gudbaday?
Way! Sagaal uurkaan ku siday
Sagaalna ilmay ahayd oo
Dabkaan ka ilaalin jiray
Sagaalna aadaabta iyo
Af Soomaaligaan ku baray
Afar iyo toban bay jirtoo
Aqalka kama soo baxayn
Oo ardaaga ma gaadhi jirin
Anaa dhaaran kara, iga Wallaahi
Abidkeed ma aradin oo
Dhibaato iyo gaajo iyo
Harraad iyo oon ma arag
Assaageed eray dhib iyo
Korkeed ul lama dhicin
Haddaba ma anoo meel aaday
Bay ilqooraad kala hadleen?
Daleelaha ka arkoodeen?
Ma inta odaygii maqnaaday
Daleelaha ka arkoodeen?
Yaa! Isku soo wada duub
E aayaheeda dambeetiyo
Abaalkaan ka filaayiyo
Asluubtii ay lahayd

Inantaydii illowday
Oo irdhowdoo carartay
Ibliis bay iga raacday
Oon raadkeedii arki waayey
Waa anigaan urugooday
Oo ka ooyayaa bannaankaa e
Inta aanu iman ee
Odaygii aanu ogaan
Unuun kuu iga goyn oo
Xabaal buu igu aasiye
Xaggeebaan u kacaa?
Alla, Ilaahayow, ceebtayda iyo ta muslinkaba astur!

CODKII: Warqaddii ay noo soo dirtay Shammado Liibaan oo intaa ku eg, annakuna haddii aan Raadiyo Muqdisho nahay waxaan ka nidhi:

Adduunyadu inay iilatay
Oy aakhir sabaan joogto
Ubadkii oo eegan jirey
Ee loo arriminaayey
Edebtiyo asluubtii la baray
Bay kala illaaweene
Eraygii uu faro waalidkood
Ma oggolaadaane
Aabbe iyo hooyo
Abaalkoodii lumiyeene
Ilmihii dadkoodii ka tegay
Aayatiin ma leh e
Khiyaarku meeshii uu dhigo
Waaba la ogaan e
Ayaantay kacaanto
Ee sidii ubaxa geysheyso
Inantii ardaagay fadhiday
Looga imanayey
Ururka iyo ijaabada
Gabadhii lagu aroosaayey
Arooray ka doorteen
Hiddihii aaminka ahaa ye
Ibliis baa kaxaystay oo
Cidladaa laga ugaadhaa ye
Qawlaha afduubaya
Ee adhaxda goynaayay
Goortuu ammaan been ah
Iyo sheeko ku afuufo
Uma fiirsadaan xaadhintuu
Dhigay asaaggood e
Islaan yahay ilmaysay e
Haddaad na arrin weydiisay
Urugada ku haysiyo
Xumaanta aad ka ooyayso
Asaaggaaba way kula qabaan

Uurku taallada e
Iska aammus oo samir
Mar uun bay guuli kuu iman e!
Barnaamijkii ila tali maanta wuxuu ku egyahay jawaabtaas warqadii ay noo soo dhigtay Shammado Liibaan. Halkani waa Raadiyo Muqdisho codkii Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, tan iyo kulankeenna dambe nabadgelyo iyo ammaano Alla.

SHAMMADO: Iska aamus oo samir! Ma anaa waano u baahan, markaa gabadhii xaggay joogtaa baan soo idhiye. Bal muslin Allow eega! Raadiyowgoonna ma ahaa e ibtilo idin asiibtay idan Alla.

**(ARAGTIDA LABAAD)**

(Shallaayo oo dhalo Sun ah sidata ayey Diiddane waddo ku kulmayaan)

DIIDDANE: Iska warran! iska warran!

SHALLAAYO: Maxaad sheegeysaa, walaal?

DIIDDANE: Maxaad sheegtay baan ku idhi. Maxaad sheegtay?

SHALLAAYO: Waxba ma aan sheegin e maxaad i leedahay?

DIIDDANE: Waxaan ku idhi, nabad ma sheegtay, baan ku idhi

SHALLAAYO: Nabad aniga iima aha e

DIIDDANE: Nabad iima aha aa? oo maxaa ku haya?

SHALLAAYO: Maxaa iiga qaban kartaa waxa i haya haddaan kuu sheego? Maxaad iga wareerinaysaa, walaal?

DIIDDANE: Oo ma adaa waxbaba ii sheegay, waxaan uun ku idhi, maxaad sheegtay, adna, nabad iima aha baad tidhi ye, maxaanay nabad kuugu ahayn? Maxaa dhacay dee? Bal wax iga taabsii, maxaa jira, dee?

SHALLAAYO: Walaal, hee dheh, anigu adduunka inaan ka tagaan rabaa, maxaa jira, adduunyadii baan silic iyo saxariir ka mutay, markaas inaan iska tagaan doonayaa. Geeddan aan wataana waad u jeeddaa inay sun tahay, inaan cabbaan rabaa. Addunkana inaan ka tagaan doonayaa.

DIIDDANE: Adduunka miyaad ka tageysaa? Anna waan ku raacayaa ina mari hadda

SHALLAAYO: Oo maxaad iga daba doonaysaa? Mushkiladda i haysataa miyaa ku haysata, adiga?

DIIDDANE: Adigu waxaad kaga rooraysaan anna kaga roorayaa, dee ina mari! sow adiguba iskaga tegi maysid?

SHALLAAYO: Walaal Addunka adigu ka tegi maysid e, waxba hay wareerin e orod iga tag, ina-adeer

DIIDDANE: Kaalay, haddaba, kaalay,kaalay! waxaan ku weydiiyay, waxaad ii macnaysaa waxaad adduunyada uga tegeyso. Wax baa lays dhaadhacsiiyaa, ma ogtahay? bal horta waxaad uga tegeyso iga dhaadhici!

SHALLAAYO: Anigaa kaa dhaadhicinaayee dhegeyso:
Qoommamooday oo ciil anaa qaba
Qasaaro hagoogan bay helay
Anaa qurux la'aan naftaydii qasbee
Qayrkay ka hadhee xaggeen qaban?

DIIDDANE: Qoomammooday oo ciil anaa qaba!
Qayladu waa mid aan qarsoomayn
Maxaa ugu weyn qasaaraha?
Qofyohow ooyaya wixii aad qabtee

Ilmada u qubayso noo qiro!
Horta intaadan hadalka gelin alaabtanna aan kuu hayo e keen.
Haye wad!

SHALLAAYO: Ninbaa i qarriboo, i kala qubay
Oo intuu i qarsaday, ma qabo yidhi
Ee qudhaan dili, oo qabraan geli

DIIDDANE: Qabrigu ma leh qaayo loogu ordoo
Qudhaan jari, way qadhaadhahay
Qayrkaa baa kula qaba, qamuunyada
Ee ha quusan e, quuddarree nolol!

SHALLAAYO: Qayrqayray e waan qayrqayraa
Oo qosolkaa i hodoo qamiinsaday e
Belaayadan qoorta ii sudhan
Bay qasaastay e qiil ma ii heli?
Ina-adeer, ama hay daalin!

DIIDDANE: Dhibaatada qarsoo, qabooji naftoo
Ha quudhsan e, qaado waanada oo
Qisadaada u sheego qaaddiga oo
Ha quusan e quuddarree nolol!
Oo hee dheh, waxaad tan iyo maanta la cabaadaysay ee, dunidaan ka tegayaa yee, dunidaan ka baxayaa ye, dunidaan kan ku samaynayaa yee, ee ku dilayaaba ba, een ... Soomaalibaa? Ma alaabtanaa-? Eeg looma baahna dad dhinta, looma baahna, bal adigu eeg, laba qof baad imminka leedahay... Naf baan isku dilayaa, eeg! Adigu haddaad tegeysona qofkan kale xaggeed geyn?
geyn?

SHALLAAYO: Waar, dhegeyso, hee dheh, warka badan hadda iska daa, waad i waanisay, wiil walaalkay aad tahay. Waanadii waan kaa qaatay, waxaan awel igu jirin baad hadda i gelisay. Waad mahadsan tahay e nabad gelyo!

DIIDDANE: Haw noqonnin nacasnimadaas. Nabadgelyo!

## (ARAGTIDA SADDEXAAD)

(Waa Maxkamad Qaaddi)

QAADDI: Haye?
ASKARI: Subax wanaagsan
QAADDI: Waa wanaagsanaan jirtey. Waxaan ku leeyahay, shaqo deg deg aan leeyahay, dibaddaan aadayaa maanta. Cid Maxkamadda sugeysa hadday jirto dhakhso ha u timaaddo.
ASKARI: Hagaag. Tan yar baa joogta
QAADDI: Haa, ha is keento
SHALLAAYO: Subax wanaagsan Sheekh
QAADDI: Haye?
SHALLAAYO: Sheekh, dacwaan qabay
QAADDI: Dacwaad qabtaa?
SHALLAAYO: Mmm.
QAADDI: Yaad dacwaynaysaa?
SHALLAAYO: Nin baan dacwaynayaa, Sheekh
QAADDI: Nin baad dacwaynaysaa?
SHALLAAYO: Mmm.
QAADDI: Magaalada ma joogaa?
SHALLAAYO: Waa joogaa
QAADDI: Magaciis maxaa la yiraahdaa?
SHALLAAYO: Shabeel
QAADDI: Shabeel ... Adiguna?
SHALLAAYO: Shallaayo
QAADDI: Shallaaya, Waa laba magac oo yaab leh. Waxaan ku weydiiyay: Maxaad ka ashtakaynaysaa ood ka cabanaysaa?
SHALLAAYO: Sheekh, waxa jirta, ninkaas waan is mehersannay
QAADDI: Haye?
SHALLAAYO: Qudbo dhinnix ah miyaa, ma aqaan, wax buu sheegayay. Waannu is mehersannay aniyo isagu, ma garatay?
QAADDI: Haye?
SHALLAAYO: Dabadeed uur baan u yeeshay
QAADDI: Haa
SHALLAAYO: Markaan uur u yeeshay, ilmahan, uur baan leeyahay, markaa wuxuu yidhaahdaa, haddaad iga ag tagi weydo waan ku garaacayaa
QAADDI: Haa, waxa la yidhi: «Cimrigaaga iska dheeraaday geel dhalayuu ku tusaa». Hadda ma waxa cimrigaagii lala sugayay qudbo dhinnix ah? Warqaddan u gee!
SHALLAAYO: Haye?
QAADDI: Warqaddaa keeneysa
SHALLAAYO: Dee Sheekh. Adigu warqad baad i siisay haatan, laakiin haddaanba u tago oo uu wajigeyga arko, waxaaba suurtowda ilmaha inuu meeshaa iiga soo rido xataa.
QAADDI: Ma dhici karto waddanku ammaan weeye, Biliis ka adagna waa leeyahay
SHALLAAYO: Dee hadda, sheekhow, sidee yeelaa? keligay uma tegi karo e
QAADDI: Uma tegi kartid? Askariga, waa haween oo kolley dee iska beer nugul yihiin e, in kastoo waxaan ay sheegeysaa una dhici karin.

Haa, cid maanta ugu hanjebi kartaa calanka hoostiisa cid kale aanay dhici karin, haddana waa haween ee bal raac oo ninka ay ku tusto keen. Dhakhsona dee!

(Isla Maxkamaddii ayaa waxa soo galaya Shabeel oo askarigii wado)

QAADDI: War cad ahaa! Een! Een, magacaa, walaalkaygii?
SHABEEL: Faral miyaa inaan kuu sheego?
QAADDI: Haa, Maxkamadda ka faral weeye
SHABEEL: Shabeel

QAADDI: Shabeel, gabadhaan ma taqaan?
SHABEEL: Gabar lee ahaa!
QAADDI: Haye, ma taqaannaa, ama hore ma u aragtay? Aqoon ma u leedahay?
SHABEEL: Markii hadda ay warqadda sidday ka hor ma arkin, kadibna arki maayo
QAADDI: Haye, gabadha, ninkan maxaad ku dacweynaysay?
SHALLAAYO: Sheekh, haddeer waxaan ku dacwaynayay waa anigii hore kuu sheegay
QAADDI: Isagoo maqlaya sheeg!
SHALLAAYO: Ninkani waa i mehersaday, Sheekh, uur baan u yeeshay. Dabadeed wuxuu i yidhi kuma aqaan, weligay kuma arag, haddaad iga ag tagi weydona beerkaan kaa tumayaa!
QAADDI: Beerkaan kaa tumayaa! Hmmm, haye, maxaad ka leedahay dacwaddaa? Maxaad ka qabtaa?
SHABEEL: Waa been
QAADDI: Waa been?
SHABEEL: Nacam
QAADDI: Markhaati ma haysataa, gabadha?
SHABEEL: Ma been baa markhaati leh?
SHALLAAYO: Sheekh, markhaati way jireen laakiinse haddaan arkona garanba maayo. Meel ay joogaanna ma aqaan
QAADDI: Warqaddii lagugu mehriyey ma haysaa ee nikaaxa
SHALLAAYO: Inay jirtoba uma malaynayn warqadi
QAADDI: Sidaas miyaa?
SHALLAAYO: Haa Sheekh
QAADDI:Meeshii lagugu mehriyey iyo cidda ku mehrisay ma garanaysaa hadda?
SHALLAAYO: Sheekh, hee dheh, adiga hadda mid ma ku su'aali karaa?
QAADDI: Wad
SHALLAAYO: Buur — Karoole habeen hal saac iyo nus iyadooy tahay, Sheekh, adigu naag ma ku mehrisay?
QAADDI: Hmmm
SHALLAAYO: Naag ma ku mehrisay ayaan ku idhi, Sheekh?
QAADDI: Waxaan ku idhi, annagu Maxkamad baan fadhinaa, bayaan ah oo cad. Buur-Karoole iyo kaymaha haweenka kuma nikaaxno: Haa adiga duqa, soo dhawow
SHABEEL: Waa lagu hayaa adna
QAADDI: Intee baan mid qasiis ah oo
Qawlaystoo la habaaray oo
Dariiqii qummanaa iyo
Qaanuunkii burburshay oo
Qaroomeeya haweenka
Kolba qoor isu taaga

Tan qabo tanna qaawi iyo
Qol madow ku xerayso
Qarrib oo ka dhaqaaq iyo
Beenbeenta ku qadhaabta oo
Qaladkaa ku shaqaysta
Gabadhii uu qasaafay
Qaylo noola yimaadeen
Buuggan iigu qorreyd oon
Anna qiiqa kaga duushay! Bul! Haa!

SHABEEL: Qiiq naga duuli

QAADDI: Artikalka koow iyo siddeetanaad baa ku haysta

SHABEEL: Halka sagaashanaad aa ku haysta adna

QAADDI: Waxaan ku leeyahay, haddii muddicigu, muddacalayhigu inkiro oo muddicigu markhaati waayo, markaa waa maxay waajibaadkeedu? Waxa weeye wajabal-yamiinu, alqasm. Dhaar baa halkaa ka saarta. Waad dhaaranaysaa

SHABEEL: Labadeennuba waan dhaaranaynaaye, horta wax ma lagu su'aali karaa intaan dhaarta la gaadhin?

QAADDI: Maya

SHABEEL: Waa in lagu su'aalo!

QAADDI: Ama dhaaro ama qiro!

SHABEEL: Ma been baan qirtaa?

QAADDI: Ama qiro ama dhaaro! Kitaabkan gacanta saar! Duqa, hadal badan looma baahna

SHABEEL: Dhaaro, adiga waayee

QAADDI: Maxaan ku dhaartaa?

SHABEEL: Waxaad ku dhaarataa, hal saac iyo nus, Buur-Karloole, yartan inaanad igu mehrin

QAADDI: Ha,ha,ha ha,... Taasi war lee ahaa! Dacwaddu aday kugu furan tahay e, maxkamad kale ha lay soo furo aniga, markaasaan ka garbixiye ahay

SHABEEL: Oo hadda bay ku haysataa!

QAADDI: Maya, garbixiyaad tahay hadda. Adigaa iiga horreeyee wad!

SHABEEL: Kitaabka aan isu qabanno e, kolkaaga ii qabo, hayna waalin e!

QAADDI: Adaa horreeya e wad, ay dacwaddu kugu socotee

SHABEEL: Haye

QAADDI: Inaanad gabadha aqoonin

SHABEEL: Inaanan aqoonin

QAADDI: Aanad meher ku xidhin

SHABEEL: Aanan ... ku xidhin

QAADDI: Aanad ilmaha uurkeeda ku jira lahayn

SHABEEL: ...........

QAADDI: Ma wallaahi baa?

SHABEEL: Wax kale ma aha

QAADDI: Ma Kitaabkaa Qur'aankaa?

SHABEEL: Weligay ma arag

QAADDI: Laa Xawla Walaa Quwata Illaa Billaahi Caliyil Cadiim! Innaa Lillaahi Wa Innaa Ilaahi Raajicuun! Subxaan Alla!

SHABEEL: Sow iskama tago markaa?

QAADDI: Waad iska bixi kartaa. Haye gabadha, nabad gelyo hee. Nabad gal haddee, hee

SHABEEL: Sheekh, maxaan ku tagaa hada?

QAADDI: Maxaa ku tagi? Waxaad ku tagtaa, dhegayso:
Shuqshuqda iyo shukada qarsoon
Beenta lagu showro
Nikaaxa la shaamahay gabdhaha
lagu shakaalayey
Shaki bay ku beereen geyiga
Shar iyo ceebaale
Sharcigaa la xadayaa kharribay
Shaygii waajibay e
Ruuxii shirqool aamminaa
Dib u shalleytooye
Haddaad sharafka dhawrtaan
Shabeel idinma laayeen e
Shib dheh oo hoos u oy!
Waxa ku dilay, taladii shaydaane
Yaad aalan? Naftaada aallo!

SHALLAAYO: Hee dheh, Sheekh, waxaan ku leeyahay, Anigu haddaan nimankii markhaatiga ahaa...

QAADDI: Hee?

SHALLAAYO: Ama qaadigii i mehriyey...

QAADDI: Haa?

SHALLAAYO: Haddaan arko waan garan karayaa. Markaa maxaan ku qabsan karayaa haddaan nimankii dariiq ku arko?

QAADDI: Taasina waa dhici kartaa! Waxaan ku leeyahay, tallaabadii aad qaaddoba Jamhuuriyadda Istasyoone Boliisiye aan seexan habeenkii, aan maalintii caajisin ee indhahoodu furan yihiin baa ah. Haddii aad aragtoo la kulanto ciddii shirqoolka kuu samaysay, farta ugu fiiq oo gacanta ka saar. Iyagaa sida korontada ugu dhegi doona, halkaan keeni doonaa iyagoo garba duuban e

SHALLAAYO: Dee mayee, Sheekhow, meel aan Boliis ka dhoweyn haddaan ku arko, haddaanan waxaan ku soo wato haysan meeshii mushkilad weeye. Markaas maad xaashi i siisid aan ku qabsado nimankii?

QAADDI: Xaashida isaga uun geyn meysid. Taas waa daw, xaashiyaha, meeshii, markaad aragto; intaad halkan iman lahayd ee ay haddana kaa lumi lahaayeen, markaad iyaga aragto; warqaddaadii oo aad qarsanayso bolisiya farta ka saar dabadeetona iayagaa shaqadooda qabsan doona. Warqaddiina waa taas.

SHALLAAYO: Haye, waad mahadsan tahay Sheekh.

QAADDI: Waxay tidhi, naagtii, awrka aroortii ku dabartay duleedka, ee galabtii markuu hallaabay, halkii timi, way madoobadayuurow! Markuu awrku halkan joogay dooh lahaayeen. Arrinkaasi dhaar ma lahayn e, baadhis buu lahaa. Allow, yaa rag rag ah dabo dhiga! Fag! ha la soo saaro markaasba e. Laakiin muraayad cayn xun baa naga saaran annaga!

ASKARI: Haye

QAADDI: Maxkamaddu waa xidhan tahay

ASKARI: Xaaji Qaaddi ......

QAADDI: Aha?

ASKARI: Oo hee dheh, Xaaji Qaaddi ......

| | |
|---|---|
| QAADDI: | Aha? |
| ASKARI: | Xaaji Qaadiyow ...... |
| QAADDI: | Ehe? |
| ASKARI: | Xaaji Qaaddi ...... |
| QAADDI: | Ehe? |
| ASKARI: | Horta waxaan ku weydiiyey ...... |
| QAADDI: | Ehe? |
| ASKARI: | Xaaji Qaaddi ...... |
| QAADDI: | Ehe? |
| ASKARI: | Xaaji Qaaddiyow ...... |
| QAADDI: | Ehe? |
| ASKARI: | Waxaan Qaaddi ...... |
| QAADDI: | Wad! |
| ASKARI: | Waxaan ku weydiiyey, ma ogsoon tahay ninkan hadda ka hortow ugu yaraan toban jeer baa maxkamadda la keenee |
| QAADDI: | Ehe? |
| ASKARI: | Oo waxa lagu keenay ma aragtay, adiga wax caynkaas oo kaleeto ah |
| QAADDI: | Ehe? |
| ASKARI: | Inkiraad caynkaas ah oo kale ah oo uu ku dhaaranayo. Markaas ninkaan waa in fiiro gaar ah loo yeeshaa oo aynnu ka dabo shaqaynaa |
| QAADDI: | Haa, taasi waa jirtaa, annaguba waan ognahay waxyaalaha nooc-aas ihi waa jiraan; laakiin mar uun baa qabatadii qabanaysay iyo korontadii soo duubaysay la heli doonaa. kow dheh |
| ASKARI: | Kow |
| QAADDI: | Haatanse xaalku wuxuu ku eg yahay, haddii muddicigu arrinka inkiro dhaar oo keliya yaa lagu leeyahay. Uma dhaafi karo halkaa. |
| ASKARI: | Hagaag |
| QAADDI: | Maxkamaddu waa xidhan tahay; Nabad gelyo! |

## (JILKA AFRAAD)

## (ARAGTIDA KOWAAD)

DIIDDANE: Waxaa ku leeyahay caawa ma gunnimadii baad rabtaa inaad ka baxdo?

DIIDDAN: Waar gunnimadayada maxaa kaa galay? Anigu ma guun baan ahay? Adaa guun ah e.

DIIDDANE: Caawa sidaad isu dhisayso wallaahi iyo Billaahi, yaa?

DIIDDAN: Waar gacantayda inaan bannayn ma ogtahay aad khalad ku taataabanayso?

DIIDDANE: Taataabanayso?

DIIDDAN: Haa.

DIIDDANE: Ohoy! Taydaa laguu banneeyee taataabo!

DIIDDAN: Waxba taaban maayee iga daa!

DIIDDANE: Maxaa iga raacaya gacantaadan qallalan?

DIIDDAN: Maxaa kaa raaci waayey? Ma gacantaydaa qallalan? Taadaa qallalan e!

DIIDDANE: Waa runteed ee Nacam!

DIIDDAN: Horta ina-adeer hayla hadlin aniga. Khaati inaan kaa joogo ma ogtahay oo maalin walba dariiqa intaan kugu arko aad hadal igu rogto!

DIIDDAN: Aan kugu rogo! Haahey! Anna aanad i xabeebinnin!

DIIDDAN: Waa tahay, caynkaas weeye. Yaynaan is la hadlin!

DIIDDANE: Waa tahay, caynkaas weeye. Yaynaan is la hadlin!

DIIDDAN: Dee maxaad iilaba hadli?

DIIDDANE: Dee waxbaba, maxaan kuula hadli ba?

(Waxay maqlayaan qaylo wiil yar, wax yar ka dibna waxay arkayaan wiilka naftirkiisa)

DIIDDAN: Acuudu Billaa! Waar maxaa qaylinaya?

DIIDDANE: Alla! Alla! Naa soo qabo! Yarka lacag baa laga qaatee.

DIIDDAN: Alla! Alla! Carruurtaa boobtay! Ma caruurtii ... Waa la boobay! Maxaa laga qaatay, hooyo? Maxaa ku helay?

GABANKII: Gaajaa i haysa.

DIIDDANE: Hooyo miyaanad lahayn?

GABANKII: Maya.

DIIDDAN: Aabbana?

GABANKII: Maya.

DIIDDAN: Acuudu Billaahi mina shaydaan ... Waa maxay, hooyo ma lihi, aabbana ma lihi? Miyay dhinteen?

GABANKII: Mayee, ma dhiman.

DIIDDANE: Hee dheh.

GABANKII: Hee.

DIIDDANE: Waa ilmo yar e bal haatan aan weydiiyo.

DIIDDAN: Bal adigu weydii!

DIIDDANE: Adeer, hee dheh.

GABANKII: Hee.

DIIDDANE: Horta ha nagu ciyaarin e, kow dheh waxaan ku leeyahay, waxaad tidhi aabbe ma lihi iyo hooyo, mana dhiman. Sidee noola hadlaysaa? Maxay ku dhacay?

GABANKII: Hooyday nin kalaa qabaa, aabbahay naag kaluu qabaa. Haddaan hooyaday u tago ninkeedaa i soo erya, haddaan aabbahay u tago naagtiisaa i soo eryeysa!

DIIDDAN: Alla, wadnahayga iga taabo! Wadnahayga iga ... Alla, wadnahayga iga taabo! Alla, Diiddanow! Alla!

DIIDDANE: Alla!

DIIDDAN: Diiddanow weligay abidkay iyo intii aan dab ka baydhay. Arrimihii i damqayay, maantuun bay iigu darrayd. Indhahayga bal daawo. Ilmadaa iga da'aysa e sidii daad qulqulàya dhabankayga dareeri Diiddanow, bi'i waaye, miyaanad ii damqanayn?

Bal inankaas day, bal anna wadnahayga iga taabo! Alla, way!

DIIDDANE: Diiddanay, iga aammus oo waxaan ku idhi: Diiddanay, indhahaaga, ilmada ka da'aysa iyo hilibkaagan dubaaxshay, ma dabeecad haween baa? Ma dalkaanad ogayn, ma daah baad ku jirtaa?

Cunugga daranayaysan,
Ee korkiisa diiftu ku taallo
Ee waalidkiis dayaceen
Haddii uu ku damqaayo
Waa nin daaqsan karaayoo
Dibkuu suuqa la boobi
Hadday geeridu deyso
Dacas loogama yaabo
Ee wax kaloo ka daran
Markaan Diiddanay xusuusto
Qalbigaa i dakaama
Wadnahaa i dillaaca
Oo dibnahaa i gariira
Intee baa inan diib leh oo
Dahab ah oo asturreyd
Oo dadkoodu aad u jeclaa
Intey qaar u duseen
Dabin baas u dhigeen
Oo sharafteedii dileen
Oo kolkii ay dacarootay e
Caloosheeda dareentay
Nafteedii daldashay
Oo dunida ka tagtay
Intee bay ilmo door ah oo
Dayaxaasi la moodo
Xadhig ay ku dabeen
Oo dibedda loo tuuray
Oo dugaaggu uu kala goostay
Intee wiil dananaya
Inta Suuf lagu duubo
Kolka uu dadku seexdo
Dambiil ay ku rideen oo
Derbiga lagu tiirshoo
Kolka waagu dillaacay
Oo dabadeedna korriinka
Dadkiisii garan waayey
Oo dafiray Soomaali

DIIDDAN: Bismillaahi Raxmaani Raxiim!

DIIDDANE: Bismiallaahi Raxmaani Raxiim! Dafiraya Soomaali! Waxba yaanan

ku daaline, isku soo wada duub oo dulmiga aynu sheegnay, dembigeeda ciddii lihi siday maanta ku deyso, innagu aan ku dadaallo.

DIIDDAN: Waa hagaag. Giddigeenba aan ku dadaallo sow ma aha?

DIIDDANE: Sidaa weeye.

**(HEES)**

DIIDDAN:Gorayadu ilmaheeda,
Aroori bay dhigtaa yoo,
Aboodigu ku laayaa,
Shimbirtuna aroos ay,
Ilaxidhoo ammaan ah,
Bay ubadkeeda seexisaa,
Kala awran labadu ye,
Edebtiyo aqoontiyo,
Asluubtay isku dhaafeen,
Caqligii wanaagsani,
Itaal inuu ka roon yahay,
Bal eegoo, u fiirsadaa,
Ilka weynow maroodigu,
Aradda uu mirtaa baa,
Cadawga ka ugaadhaa,
Aboorkuna dundumadaan,
Aragnay buu dhistaayoo,
Naftiisa ku ilaaliyaa,
Kala awran labaduye,
Edebtiyo,
aqoontiyo
Asluubtey isku dhaafeen,
Caqligii wanaagsanii,
Itaal inuu ka roon yahay,
Bal eegoo u fiirsadaa.

Ma ogtihiin sagaaradu,
Awaarahay qoddaayoo,
Saaladeeda ku aastaa,
Libaaxuna ma asturee,
Hilimaduu ka arooruu,
Digadisa ku aslaa,
Kala awran labaduye,
Edebtiyo aqoontiyo,
Asluubtey isku dhaafeen,
Caqligii wanaagsanii,
Itaal inuu ka roon yahay,
Bal eegoo u fiirsadaa
Bal eegoo u fiirsadaa.

DIIDDANE: Waa run! Caqligii wanaagsani Itaal inuu ka roon yahay!

DIIDDAN: Haa.

DIIDDANE: Maxaa jira, eeg,eeg, bal Aboor iyo Maroodi day intay isu jiraan! ciddidiisaba ma le'eka; Aboorkuna dundumuu dhistay, Maroodiguna ilkaha waaweyn buu dhgayaa, waa inuu meelihiisa gebgebleeyaa, geb,geb, yaa!

DIIDDAN: Weynaan iyo yaraan ma aha ee wax walba ......

DIIDDANE: Waa caqliga dadka Ilaahay geliyey. Waa caynkaas. Waxaanse ku leeyahay. Gorayadu ilmaheeda aroori bay dhigtaayoo... Maxay ahayd?

DIIDDAN: Dee waxa weeyaan nimanku carruurtooda arroori bay dhigaan.

DIIDDANE: Waxaan ku idhi, he dheh, haddaynnu run sheegno, gorayada ilmaheeda arooriday dhigtaa, waa haweenka.

DIIDDAN: Waar, hayla hadlin, ciil baan halkaa joogaaye!

DIIDDANE: Halkeed joogtaa?

DIIDDAN: .......................juuq ha ii odhan! Halkaasaan ciil joogaa!

DIIDDANE: Inanka yar u yeedh!

DIIDDAN: Kaalay, hooyo!

DIIDDANE: Adeer hee dheh.

GABANKII: Haa.

DIIDDANE: Haddaannu ku korinno oon wax ku siinno maad nala joogi?

GABANKII: Aan idinla jooo e, labadiinnu ma is qabtaan.

DIIDDANE: Bes, bes, bes, maxaannu nidhaahnaa bal haddaba? Waar hee dheh, hee dheh, yarow, adiga ruuxaagu yar hadal miidhan ah baad tahay. Waar hee dheh, waar annagaa ba'nay, sideennu wax ugu sheegnaa? Adeer hee dheh, iska daayoo, hee dheh, annagu adaanu ku caawinaynaa oo aannu... iskuul ku geynaynaa oon wax ku siinaynaaye, hee dheh, haddannu is guursanno, waan is guursanaynaaye, ma nala joogi?

GABANKII: Aan idinla joogee, hooyaday iyo aabbahay isqabid la'aantaan uga tegey!

DIIDDANE: Ma i maqlaysaa?

DIIDDAN: Haa... kuba maqli maayo.

DIIDDANE: Naa, waxaan ku leeyahay, ianankani waxaynu moodayno ma aha.

DIIDDAN: Waan yaabay anba.

DIIDDANE: Kow dheh.

DIIDDAN: Haye.

DIIDDANE: Anigu waxaan u malaynayaa inuu Khadar yahay e suulka bidixda taabo. Laf ma leeyahay?

DIIDDAN: Waa leeyahay.

DIIDDANE: Ma laf buu leeyahay, iska daa haddaba ma aha e iska daa! Waa wax kaloo Alla inoo soo direy e, bal eeg wuxuu belaayo isu keenay! Hooyaday iyo Aabbahay is qabid la'aan baan uga imi, labadiinnu miyaad is qabtaan, yaab! Waa mid wax laynugu tusayo! Adeer hee dheh...

GABANKII: Hee.

DIIDDANE: Hee dheh, i maqal, haddaannu is guursanno.

GABANKII: Hee.

DIIDDANE: Maad nala joogi?

GABANKII: Haa.

DIIDDANE: Naa sow is guursan mayno?

DIIDDAN: Haa.

DIIDDANE: Inanku haynala joogo e sow is guursan-mayno?

DIIDDAN: Haa.

DIIDDANE: Haa.

DIIDDAN: Laakiin aniguu inankaygii yahay. Waa inankaygii aniga, laakiin......

DIIDDANE: Xaggeed ku dhashay?

DIIDDAN: Dee anigaa kaxaysanayoo, anigaa helay. Ma adaa shuqul ku leh?

DIIDDANE: Waa tahay e waa wada leenahay e inoo wada kexeeyoo adna cuntaad siinaysaa, anna dharkiisa iyo iskuulkiisa iyo waxa...

DIIDDAN: Hadhow baanad waxba keenayn intaad halka ka tidhaa!

DIIDDANE: Adigu xisaab saayid ah uun hay saarn!

DIIDDAN: Waxba ku saari maayo.

DIIDDANE: Bes, bes, orod oo kexee haddaba inanka waa wada leenahay e.

DIIDDAN: Waar waxba ilama lihid!

DIIDDANE: Illayn hadda adna hooyaad u tahay, anna aabbaan u ahay e.

DIIDDAN: Anaa hooyo u ah, adiga aabbe maxaa kaa galay?

DIIDDANE: Naa orod, hadal badanidaad ku sheegan doontaa ilmo islaameed! Naa ninka inoo hay baan ku idhi.

## (ARAGTIDA LABAAD)

## (GURIGA XAAJI GUULEED)

GUULEED: Hooddi?
SHAMMADO: Alla, waa Guuleed! Iska warran, Guuleed?
GUULEED: Alxamdu Lillaahi Rabbil Caalamiin! (wuu u ducaynayaa).
GUULEED: I daa?
SHAMMADO: Waar i daa! Bismillaahi......
SHAMMADO: Waar xishoodkii miyaad Xajka uga soo timi?
GUULEED: Oo ma iska tagaa?
SHAMMADO: Mayee ha tegin e fadhiiso, laakiin......
GUULEED: Haa, wax yar, wax yar.
SHAMMADO: Haye.
GUULEED: Middaan iga qabo! Waa qabaqosta cusub. (hadiyaddii buu tustusayaa)
SHAMMADO: Alla, qurux badanaa! Haye.
GUULEED: Waa tii aad odhan jirtay wadaaddaan iska yabaaraynayaa, waa malkhabaddii.
SHAMMADO: Gartay.
GUULEED: Middaan waa taqaannaa. Dakeenna dharkii laga dhoofiyey weeyaan oo Jiddaan ka soo gaday.
SHAMMADO: Oo soo celisay?
GUULEED: Hmm, iyo Qaahira meel u dhexeysa.
SHAMMADO: Haye, oo magaceed meeshaas Jidda iyo Qaahira u dhexaysa?
GUULEED: Baxrayn baa la yiraahdaa. Waa kala siibanaysaa, midkan waxaad yeeshaa......
SHAMMADO: Ee? Waa laba.
GUULEED: Waxaa iyo waxaa waa alaabtiisii, waa kor iyo hoos.
SHAMMADO: Iyo hareeraha weeyaan midkaasi, midkan adiga iska qaado!
SHAMMADO: Oo muxuu yahay?
GUULEED: Mayee qaado kaas, kan kuu sheegi maayo, goortaad qaadanaysid caqligaaga ka dhammayso!
SHAMMADO: Oo Guuleed, aaway dahabkaan kuu dirsaday?
GUULEED: Xaggaa lagu jiraa. Qabaqoystaada hadhow baad fetishi doontaa. (Shandad kale oo dhulka taalla ayuu farta ugu fiiqayaa)
SHAMMADO: Waa yahay.
GUULEED: Ee gabadhana aan siiyo alaabteeda ee meeday?
SHAMMADO: Waad soo kululaatee, iska siib kabaha oo kursiga ku fadhiiso!
GUULEED: Mayee dayuuradda wax dhib ah kuma aanan arag e, adiga iga maqnaa. Anta faqad qaayib!
SHAMMADO: Oo ma tacliin baad ku maqnayd mise Xaj?
GUULEED: Yaa?
SHAMMADO: Ma tacliin baad soo baranaysay, mise Xajkii baad jirtay oo dembigaa iska soo maydhaysay?
GUULEED: Mayee Shammadoy, waan iqiinay Carabiga e adaan afna aqoon oo aanan kugula hadli jirin.
SHAMMADO: Anigau Faransiis baanba mooday.
GUULEED: Haa, gabadhii meeday,gabadhii?
SHAMMADO: Kayd baan kuu dhigayee ma keeg baad ku horreyn, mese kumbisaan isku shiilay?

GUULEED: Salaadba wakhtigeedaa la tukadaa, markiisaan cunayaa kaas.
SHAMMADO: Guuleedow, kidhli shaah ah iyo karuur geel kala dooro.
GUULEED: Shammado!
SHAMMADO: Oo tani culusaa haddee, Guuleed!
GUULEED: Middaa ma wax ka khafiifsan baad rabtay? Illayn habraha cusub baad tahay e! Gabadhii meeday baan ku idhi?
SHAMMADO: Kimistii way bisishahay e, cad ma kuu kariyaa, Guuleed?
GUULEED: Allahu akbar! Naa hee dheh, hee dheh, gabadhii meeday?
SHAMMADO: Allaylehe, filimada Hindiga markaad gelaysay inaad heestooda baranayso waa isaga jeeday.
GUULEED: Gabadhii meeday?
SHAMMADO: Hee yii... waar hee dheh, hadda kalluunka waa la helaa iyo kackac kaa doontid.
GUULEED: Questo vecchio internazionale! I dhegayso, habaryahay foolasha fargeetiga leh!
SHAMMADO: Aniga caytami maayo, maxaa jira, markaan is kululeeyo adba dib waad u garan doontaa!
GUULEED: Haa, waxaa xun waad garanaysaa, ee waxa san baanad aqoon! cayda waad iska celinaysaa, sow ma aha? Naa gabadhii meeday? Gabadhii!
SHAMMADO: Kooka Koola qabow iyo Kafee Neero i sii baa?
GUULEED: Shaki la'aan labada dhegood baa dhukay ka galay, waa in aan ka afuufaa Huf!

SHAMMADO: Waar iga daa neefta! Iimaanka Alla kaa qaadye, miyaa lagu soo maray?
GUULEED: Naa hadalka kii la rumeysto iyo kaftanka ii kala saar oo horta keen inantii.
SHAMMADO: Waar dhagayso, ama wareersanow ama ha wareersanaan, anigu saacaddan qaxwe karin maayo.
GUULEED: Shaki la'aan, laa shaki laasiim haadaa mariida! Naagtan illaaba illaa waa xanuunsan tahay, waar tolow munishiibiyadii wax daaweyn jirtay meeday? Naa gabadhii, gabadhii meeday?
SHAMMADO: Yaa?
GUULEED: Gabadhii meeday?
SHAMMADO: Kooras bay u baxday.
GUULEED: Kooras? Koorasku waa ku xaggee yah?
SHAMMADO: Ku baas u kacday, kun faceed la cadaab.
GUULEED: Ku baas bay u kacday! Oo maxaad gabadha iila sugi weyday intaad meelahan dhawdhawo u direysid?
SHAMMADO: Halkee?
GUULEED: Anaa dhul fiican u diri lahaaye, yaa? Goormey tagtay?
SHAMMADO: Anigu waan kari waayay, oo kolkii aad naga dhooftay kadinkaa ka baxdoo malaa waa la kaxaystay.
GUULEED: Naa ma gabadhaan korinaayay ee koolkoolinayaa aayar laysku kaxaystay! Ma kiish baa lagu siiyay?
SHAMMADO: Xaasha! Hay caayin, anigu ma gato gabdhaha e.
GUULEED: Meeday gabadhii haddaa?
SHAMMADO: Wallaahi wax daran baad iga doonaysaa?
GUULEED: Allaahu akbar! Hadda Shammado waan aqaannaa! Maalintii aan qandhada ka soo daahay oo aan meesha sidibta ah ku simbiririxday bay waxay moodday inay iga adagtahay! Alla! Naa joog! I maqal, ii sheeg gabadhii!

| | |
|---|---|
| SHAMMADO: | Naa, eeddo Kulmiyay, kaalay oo u warran! |
| GUULEED: | Maxay tahay Kulmiyadu? Naa ma turjubaan aad qoratay baa? |
| SHAMMADO: | Haye, gabadhii waxa weeyaan... kaagama sheekeyn karo. |
| GUULEED: | Gabadhee? Asalaamu calaykum! |
| SHAMMADO: | Eeddo u warran! |
| KULMIYA: | Yaa? |
| SHAMMADO: | U warran! |
| KULMIYA: | Haye, Xaaji. |
| GUULEED: | Iga raalli ahow, kumaande, ma ragga cirkaad tahay? |
| KULMIYA: | Maya. |
| GUULEED: | Hee? |
| KULMIYA: | Kuwa raajiga ka shaqeeyaan ahay e! |
| GUULEED: | Yaa? |
| KULMIYA: | Miyaad bugtaa? |
| GUULEED: | Anigu ma buko ee naa kaalay, jirro kugu dhacday e! |
| SHAMMADO: | Maxaa dhacay? |
| GUULEED: | Oo ma meeshii aan adiga dhakhtar kaaga dooni lahaa baad iiga keentay aniga? |
| SHAMMADO: | Mayee dhakhtarad weeyoo...... |
| GUULEED: | Hee, maandhey, dhegaha ka dawee! |
| SHAMMADO: | Waar, bal u kaadi. |
| KULMIYA: | Bal gacanta keen. |
| | Maxaa tidhi? Eeddo, waa sidee adna ma kanaad raacday oo waalan? |
| KULMIYA: | Miyaanad ogeyn inaan dhakhtarad lagu cayaarin? Waa maxay? Waa idin sidee? Nala hadloo maxaad rabteen? |
| GUULEED: | Wax kale oon ku cayaaraba! Wallee, dhakhtar kuma cayaarin, aniguse colka cirka ayaan ku moodayay. Naa dhakhtaradda ha ku cayaarin. |
| SHAMMADO: | Gabadhii, Gabadhii, xaalkii ku dhacay uga warran odaygan kharafka ah! |
| KULMIYA: | Gabadhii waxa ku dhacay, in kastoo ay ku wanaagsanayd inay iyadu sheegto; laakiin waxa la yidhi, runi dadka waa ka nixisaa waxse ma yeesho. Gabadhii waxa iigu dambaysay iyada oo toddoba bilood ah. |
| GUULEED: | Ash—haddu an laa...... |
| SHAMMADO: | Way kan. |
| GUULEED: | Waxaan ku leeyahay, ma joogtay gabadha markii la yeedhinayay? |
| SHAMMADO: | Waar ma anaad saas igu leedahay? |
| GUULEED: | Naa kaalay. |
| SHAMMADO: | Kaalay! maxaad tidhi? Bal ku noqo waxaad tidhi! Nin haddaad tahay, car, car, ku noqo! |
| GUULEED: | Waxaan ku idhi...... |
| SHAMMADO: | Hee. |
| GUULEED: | Markii gabadha xaalkeeda la gelayey, ma ogeyd? |
| SHAMMADO: | Ilaahow, yaan Ilaah iyo islaan ka biqin e labada indhood gooya! |
| GUULEED: | Indhagoys waa ka weyn yahay midkani ye! Iiga warran gabadhii? |
| SHAMMADO: | Guuleed, hee dheh. |
| GUULEED: | Waa la i qaboojinayaa, baraf baa laygu shubayaa! Haye? |
| SHAMMADO: | Mayee gabadhii aan kaaga warramo xaalkeedii. Gabadhii way bukootay. Iyadoo afar bilood sariir saaran. Anigoo cudurkii |

ameebe mooday iyo waxyaalo kalee, ayaan dhakhtaraddan u yeedhay. Waxay igu tidhi, uur bay leedahay. Markaa waan waydiiyay, waxay i tidhi nin baa i qaba oo i qudbasiraystay.

GUULEED: Alxamdu Lillaahi Rabbil Caalamiin! Neef baa iga soo booday. Waan ladnahay. Waxaad yeelaysaa meel walba guryaha wax alla waxa ku jira oo dad ah ka bixi.

SHAMMADO: Balaw, balaw!

GUULEED: Bannaanka u saar. Waxaan doonayaa meel walba iyada iyo ninkeedu... inay iyadu meel gasho... guryahay... abaartamento kaleeto inay galaan iyagu... mid kale inay booyasadu gasho, mid kaleeto kuwa u shaqeeyaa inay galaan.

SHAMMADO: Haa, waa tahay.

GUULEED: Guryaha oo dhan, dhallinyarada, ragga akhyaarta ah, ragga ma taqaannaa ee... ee inta habar ah ood saaxiibka tihiin oo xalwadda si fiican ...inta micidaloosha oo dhan u yeedh!

SHAMMADO: Haye?

GUULEED: Ma i maqashay?

SHAMMADO: Haa.

GUULEED: Waxaan yeelayaa... muusigga anigu ma doonayo afar is urursatay. Shan iyo labaatan orkeystarka. Raadiyaha ayaan waxaan rabaa inay tumaan Dhin,dhin,dhin,......

SHAMMADO: Tii aad dhagaysan jirtay, Jaas miyaa la yidhaa! maad ku dartid, taasna?

GUULEED: Jabjab oo caynak! Naa jaaska laftigiisu haddeer ... Jaas Soomaali ahi inuu jiro ma ogid? U kaadi waaba wakhtigiisiiye i sii raadiyaha!

SHAMMADO: Ku siin maayo!

GUULEED: Naa na sii raadiayaha! wuxuu dhega adkaa! Qofkaa jirran wakhtigiisii baa la joogaa baannu ku leenahay! Kaalay, kaalay, adna mar mar kaama maarmee mawjadeedu horta xaggay ahayd? Iska dhaaf! Faraha ha saarin!

(Raadiyihii oo muusiko tumaya ayuu dhagaysanayaa iyadana gacanta ayuu soo qabanayaa.)

SHAMMADO: Waar iga daa, faruhu kaa go'e, idam Allee!

GUULEED: Biis, biis! Illayn raadiyuhu biis ma yaqaan! Biis, biis!

SHAMMADO: Ba—bo—bo—bo—... oo kaalay, Xaaji bal aan ku weydiiyo......

GUULEED: Haye? Horta bal muusiggaan u saarayo kanaa ugu liita. Ma ogtahay? Gabadhayda waxan doonayaa meel walba inaan u cammiro oo ka tumo xalan. Ma garatay? Maxaa loo qarqaarinayaa? U yeedh! sagaal biloodba ha ahaatee ummushaan ku aroosinayaa.

SHAMMADO: Ma dhammaysatay?

GUULEED: Haa.

SHAMMADO: Gabadhii iyadoo uur laan arkay, inkii keen baan idhi, ishii baan u lahaa.

GUULEED: Subxaan... kaalay, Shammadoy, waxan ku weydiinayaa, ninkii baan raadinayaa miyay ku tidhi?

SHAMMADO: Haa, soo mana ay noqon.

GUULEED: Waan aqaannaa ninkaas.

SHAMMADO: Waa kuma? Oo illaa nin aad taqaanid adigu, kiishkaad sheegaysayna aad ka cuntaad aniga iigu factirinaysay!

GUULEED: Ushsh! Afkaaga laba liire saar! waan kacsanahay e xumaan hayga shaqaysan!

| | |
|---|---|
| SHAMMADO: | Oo yaad wax ka cunaysaa? |
| GUULEED: | Haahay. Layga kaa raac! I soo halabso! Ee ninkaas magaciisa Shariif Cabdalla Naaji Axmed Shafiif baa la yidhaahdaa. Nin la yaqaanno ma aha, waa toban nin oo is ku dhex jira. Ma garatay? Inaga daa kaas! Biyo ii keen waa oommanahay e. Nin baa wuxuu yidhi:<br>Cadho geela waxa kaaga rida,<br>Ama candhooleeya,<br>Dhiishaada caanaha ku jira,<br>Waxa candiideeya,<br>Ragannimo caddaanood lahayd,<br>Hoos waxa u celiya,<br>Ay uunku kugu caayaan,<br>Ciriqa weeyaan.<br><br>Raggii aniga ila mid ahaa miyaan inta u tago aan la murmi karaa? Raggii aan u foolaxgootayn jiray oo aannu shaxda isku caayi jirnay, ma la shixi karaa anigu?<br>Laba hal oon damcay caawa, dumarka waan iska daayay oo garta waa duduwaan e. Raggow ii kala doora, naagi maragayga ma gasho.<br>Gabadhaan dugsanaayay,<br>Habartii dayacday,<br>Inaan caawa dalaaqoo,<br>Saddexdeedii dul saaro,<br>Iyo inaan uun iska daayo,<br>Dermadey ii fidisaa,<br>Digsigay ii karisaa,<br>Dufankay ii marisaa,<br>Mar mar waan ku durkaa,<br>Inaan iska daayo,<br>Raggow ii kala doora!<br>Ma dalaaq baa? Iska daa? |
| SHAMMADO: | Aashunkiiba waa qallalan yahay oo Cabdulle Raage ayaamahan kibir! Biyaba ma keeno. |
| GUULEED: | Dhegeyso! |
| SHAMMADO: | Haye? |
| GUULEED: | Oo maxaa Cabdillaahigan idiin geeyay?<br>Fanax baa rukun idiin ahaaye, xaggee buu ka baxay? |
| SHAMMADO: | Mooji, wallaahi. |
| GUULEED: | Haddii kaleeto Maxamuud Diirshaa salaaddii la soo jarmaadaya. |
| SHAMMADO: | Bal waan ka fiirsan doonaa. |
| GUULEED: | Haa, waxaad yeeshaa, shiray. |
| SHAMMADO: | Haye. |
| GUULEED: | Waxaan ku shiray; horta ilmahaagu kuwa saqiiray iyo ku waa waaweynaan ku dhintay intaba waa leeyihiin. Hase ahaatee, gabadheenni tagtay! |
| SHAMMADO: | Bardu waa dhali doonaa. Waxba ma aha, ilmo waa layska helaa! |
| GUULEED: | Goormaa dhalmo kuugu dambeysayna? |
| SHAMMADO: | Afar iyo toban sano ka hor! |
| GUULEED: | Afar iyo toban sano! Ha, ha, ha,... Waa khayr haddaad dhalmo |

| | |
|---|---|
| | bilaabi doontid e waa inoo roon tahay e. Waxaad yeeshaa uun gabadhii hadday xumaatay, adigu is ilaali! |
| SHAMMADO: | Oo maxaan iska ilaaliyaa? |
| GUULEED: | Yaa? Haan iyo Hirrowaha iyo wixii uun ... is ilaal adigu! Ma garatay? Yaa! Sow ma garan? Is ilaali! |

## (ARAGTIDA SADDEXAAD)

(Diiddan oo jid mreysa ayaa Shabeel ka hor imaanayaa oo garabka ku dhufanaya)

SHABEEL: Waa sidee?

DIIDDAN: Waa maxay? Maxaad ii joojisay?

SHABEEL: Ee, ee......

DIIDDAN: Maxaad ii joojisay?

SHABEEL: Maya e ma ... Ma waxaad ka xanaaqday waraaqdaad ii soo qortay berigii hore een kaaga soo jawaabi waayay?

DIIDDAN: Ayo?

SHABEEL: Adiga.

DIIDDAN: Waad jeceshahay inaan waraaqo kuu soo qoro ayay ila tahay, helise meysid!

SHABEEL: Ha, ha, ha... Waa iska kaftanka dumarka e horta anigu:
Orobbo iyo Aasiya iyo,
Afrikaanka magacii,
Amase Ustaraaliya,
Nin Adduunka so maray oo,
Aqoon weyn leh baan ahay,
Inta laga ugaadhsado iyo,
Afgooye xataa tegay,
Imana ogid e inan yahay,
Adiga aawadaa baan,
Oontii uga go'ayyoon,
Hurdada uga oodnahay,
Marka aanan ku arag baan,
Sida ayro geeloo,
Ilmaheedii laga dilay,
Is moogaan u ololaa,
Asliyay ina-adeer,
Jaceyl igu ilkeystoo,
Uurkeyga gubayaan,
La adkeysan waayee,
Ina-adeer i daawee!

DIIDDAN: Iga daa faraha horta!

SHABEEL: Ma diiddaa?

DIIDDAN: Ummuurtan iyo yaabkan,
Iyo Jacaylkan ii asqaysan,
Ee indhaha iska ridaya,
Iyo ammaakaaggan daawada,
I dhegeyso inanyohow,
Eraygaad i leedahay,
Aniga wayga weyn yahay,
Oo aabbaan u leeyahayee,
Orod aad adoogay.

SHABEEL: Ee horta inanyahay, ujeeddada arrinka aan ku leeyahay adigaa u aabbe ah.

DIIDDAN: Uma ihi!

SHABEEL: Kac oo adoogayna,
Waa laga ilbaxay oo,

Asluubtii gabowday iyo,
Aflagaado weeye e,
Ma oggli amuurtan,
Cid kale inay ogaatee,
Annagu ma is aroosnaa?

DIIDDAN: Arki jiray adoo kale,
Ibliisyohow hagoogani,
Afkaagaa macaan baa,
Asaaggayba eedee,
Kuwaad adhaxda goysaa,
Aramidi la jiifee,
Inanyohow adoogay,
Arrin aanan gaadhiin,
Abidkay ma yeelin oo,
Horaan uga irdhoobee,
Orod iga tag weligaa,
Axdi yeelan mayno e.
Mar kale halkaa haddaan kugu arkana Wallaahi iyo taan aabbahay iyo intuu dhalayba waayaa, biliis waxaan ahayn haddaan kuu dhiibo!

SHABEEL: Naa kaalay, kaalay dee! Duqda kaalay! kaalay!

DIIDDAN: Waa maxay?

SHABEEL: I maqal, waan kaa shaqaysan waayee, mar aad telefoon soo dirayso, mar dambe haddaad aniga afkaaga ila soo gasho. Halkaasaan ku qabanayaa. Soco ka bax meesha!

DIIDDAN: Waad jeceshahay laakiin heli meysid inaan adiga telefoon kuu soo diro e, gabadh kalena heliba meysid e, halkaa ku caarid! Mar dambe haddaad ii yeedhona Wallaahi iyo Diinta Maxamed! Waxaaga xun baan wax kaa tusayaa! Mar dambena hay soo celin! Khasiis! Kir (Way baxaysaa)

SHABEEL: Naa kaalay! Waar yaadha hee! Naa kaalay! Uuh! Nimanyohow, arrintii waa xumaatay. Waxaan ballan idiinka qaaday naagoo dhan inaan faceed ka reebo!

(Kelidii buu daweynaha la sii hadlayaa)

## (ARAGTIDA AFRAAD)

(Diiddan iyo Shabeel ayaa kulmaya. Ka dib markey dhawr eray is dhaafsadaan ayey heestan darandooriyayaan).

SHALLAAYO: Nagaadiga Adduunyada,
Qayb kuma laha naaguhu,
Xeerkii sidaa naqay,
Nimankaa samaystee,
Alla, Alla! Nimanku,
Waa nacab aan korinnoo,
Naaskeenna nuugoo,
Naafeeyey dumarkoo,
Nabad lama wadaagnee.

DIIDDANE: Nimanka iyo Naaguhu,
Waa laba nafood oo,
Nuday qudh ah ka beermoo,
Naa hoy! Naa hoy! Nimanku,
Nolosha wadaagee,
Waa naq iyo raaxiyo,
Nafaqada haweenkoo,
Waxaan nahay hal iyo nirig,
Midba mid u nuurtee.

SHALLAAYO: Naagti jeclaatay,
Nuuxnuuxsadeen oy,
Naannaabiyaan e,
Alla! Alla! Nimanku,
Waa nacab aan orinnoo,
Naaskeenna nuugoo,
Naafeeyey dumarkoo,
Nabad lama wadaagee.

DIIDDANE: Nin baa lagu nastaa yoo,
Lagu neefsadaa yoo,
Nicis kuu jafaa yoo,
Nimca kaa waraabshee,
Naa hoy! Naa hoy! Nimanku,
Waa naq iyo raaxiyo,
Nafaqada haweenkoo,
Waxaan nahay hal iyo nirig,
Midba mid u nuurtee.

SHALLAAYO: Nin baan kaa naxayn oo,
Naxli kugu abuuroo,
Markaad nadar u qaaddoba,
Nabsi kaa gelaayee,
Alla! Alla! Nimanku,
Waa nacab aan korinnoo,
Naaskeenna nuugoo,
Naafeeyey dumarkoo,
Nabad lama wadaagnee.

DIIDDANE: Naxariis ninkii leh baa,
Naanaabisaan oo,

Ma lihdiin naruuro e,
Naa hoy! Naa hoy! Nimanku,
Waa naq iyo raaxiyo,
Nafaqada haweenkoo,
Waxaan nahay hal iyo nirig,
Midba mid u nuurtee.
Waxaan nahay hal iyo nirig midba mid u nuurtee! Annagaa u soo joognay, walaal, waxay na soo marsiiyeen e nabadgelyo!

DIIDDANE: Naa orod naga tag, sawiryahay! Mid waloo rag weydoba annagay nagu soo ordaysaa. Naa orod, naga tag!

## (ARAGTIDA SHANAAD)

(Fasal Dugsi oo ay Diiddan Bare ka tahay)

| | |
|---|---|
| DIIDDAN: | Arooryo wanaagsan! |
| ARDADII: | Nabad! Nabad! Nabad! |
| DIIDDAN: | Adigu kaalay, ayaamahan waad maqnayd e, maxaad ku maqnayd? |
| ARDAYADDII HORE | Waan jirranaa. |
| DIIDDAN: | Laakiin habsankaagii, adiga, wuu batay! |
| ARDAYADDII HORE | Waa yahay. |
| DIIDDAN: | Saaka waxaan bilaabanaynaa dersigeennii oo waano iyo waddani isugu jira. Aan idiinku horreeyo waanada e ma taqaannaan Shabeelka? |
| ARDAYADDII LABAAD | Shabeelkaa? Kan buugga ku sawiran lee ma ahoo? |
| DIIDDAN: | Maya, ma aha. |
| ARDAYADDII SADDEXAAD | Kan duurka joogee dadka cuna miyaa? |
| DIIDDAN: | Ma aha. Ma qaldanidine kuwaas waa jiraan, ku kalena waa jiraa. |
| ARDAYADDII LABAAD | Kan kale sidee lagu kasi karaa? |
| DIIDDAN: | Waxa lagu kasi karaa ka kale waa nin shaadh iyo surwaal buu gashan yahay sida wiilka wax idiin dhiga e Diiddane oo kale. |
| ARDAYADDII LABAAD | Haa. |
| DIIDDAN: | Waxa lagu garan karaa, markaad guriga ka timaaddee iskuulka ku socoto, guriga iyo iskuulka dhexdooda uun buu joogaa. |
| ARDAYADDII LABAAD | Haye? |
| DIIDDAN: | Markaasuu wuxuu ku yidhaahdaa, yartanee, adigaan kula hadlayaa ye gurigiinnu ma kaasaa? |
| ARDAYADDII LABAAD | Haye? |
| DIIDDAN: | Ma ku sii dhoweeyaa? Haddii kale oo uu nin gaadhi wata yahayna wuxuu idin odhanayaa, waa duhur oo milicdu waa kulushahay e ma idin sii dhaweeyaa. Ama, iskuulkii waa ka habsaamaysaan, ama dhakhsaan idiin gaadhsiinayaa? |
| ARDAYADDII LABAAD | Haye? |
| DIIDDAN: | Shabeelkii weeyaan e kaas waa inaydaan arkin maqlinna! |
| ARDAYADDII SADDEXAAD | Kii baabuur noo joojiya ee yidhaahda, waan idin dhaweynayaa, waxaad tidhi, Shabeel waaye, miyaa? |
| DIIDDAN: | Haa, Shabeel waaye. |
| ARDAYADDII LABAAD | Haa, haddaan kasay! |
| DIIDDAN: | Kii kalee yidhaa, gurigiinnu waa xaggee ee hadalka ceynkaas ah idin weydiiyana waa Shabeelkii. |

ARDAYADDII LABAAD: Haye, haye.

DIIDDAN: Ee markaa waxaan jeclahay Shabeel inaad iska jirtaan. Gabdho yar yar baad tihiin oo hadda soo koraya, gabadhuhu markay sidiinaas oo kale carruur yihiin ee u yar yar yihiinna, waa ubax oo kale oo looma oggola aabbeheed iyo hooyadeed iyo walaalkeed iyo macallnkeeda iyo macallimadda wax u dhiga mooyee cid kale looma oggola! is jira!

ARDAYADDII LABAAD: Haye.

DIIDDAN: Yaa.

ARDAYADDII LABAAD: Haye.

DIIDDAN: Alla waanada haydinku duwo!

ARDAYADDII LABAAD: Marxabba!

DIIDDAN: Inta kale waxaan geleynaa dersigeennii waddaniga ahaa. Had iyo jeer waxaan heesaha waddaniga ah u barannaa, wax barasho kel ah uun ma aha, ee waa inaan waddankeenna u qiiroono oo fikraddaa innakoo ka haysanna waddanka wax u qabanaa. Markaa, waxaan bilaabaynaa heestii khamiistii dhaweyd aan idin baray, kow, laba, saddex, afar!

ARDAYADDII: Dhulkayagiiyow! annagoon wax dhaafin
Waxna kuu dhimaynin, dararam
Annagoo dhisayna dhaqaalahaaga
Iyo dhaxalgalkaaga, dararam
Annagoo ku dhiirran dhankayaga
Cadaawaha kugu soo dhawaada, dararam
Dhulka — dararam — yagiiyow — dararam
Dharaar iyo — dararam habeenba — dararam
Waannu kuu dhawaaqnaa dararam
Kuu dhiidhiyeynaa, dararam
Waa lagaa dhur sugayaa, dararam
Waa lagaa dhur sugayaa, dararam
Noo dhega nuglow oo, dararam
Dhaqso noogu hiilli, dararam.

DIIDDAN: Si fiican ayaa heestii u keenteen.

ARDAYADDII LABAAD: Haye.

DIIDDAN: Sidaasna waxaan jeclahay inaad had iyo goor u dadaashaan ee aydan buugga waxa ku yaalla had iyo goor eegan e heesaha waddaniga ah iyo wixii waddakeenna anfacayaba saas ugu dadaashaan.

ARDAYADDII LABAAD: Marxabba!

DIIDDAN: Yarta habsanka badan leh bal hadda ka baydh, aan la hadlee! Soo dhawow! Gabdhuhu markey wax baranayaan adigu waad foorartaa had iyo goor. Maxaa ku haya? Maxaad la fekertaa? Maxaad la foorartaa? Wax ma maqashid! Afka uun baad dhaqdhaqaajisaa, hablaha waad ku jirtaa ma aha e waad kibir badan tahay. Habsankaagiina wuu batay. Asenti baan hadda kaa qorayaa adiga, ama

anigaaba ku eryaya. Maya e ku eryi maayo, inan Soomaaliyeed oo wax baranaysaad tahay; laakiin saddex beri ha imannin iskuulka. Edeb bay kuu noqonaysaa! Hays ku iman saddex beri!

(Way baxaysaa)

ARDAYADDII LABAAD — Meskiin iskuulka laga joojay saddex beri. Naa kaalay! kaalay! Alla meskiin, marka iskuulka lagaa joojay aad dhuuman lahayd e.

ARDAYADDII AFRAAD: — Waad iska carari miyaa? Meskiin!

ARDAYADDII HORE — Hadda idinku maxaad rabtaan inaad ku hadashiin?

ARDAYADDII AFRAAD: — Macallimaddayadu maanta duruustay noo dhigtay way wanaagsanayd ma aragteen?

ARDAYADDII LABAAD — Haa.

ARDAYADDII AFRAAD: — Bella!

ARDAYADDII SHANAAD: — Aad iyo aad!

ARDAYADDII LABAAD — Iska dhaaf!

ARDAYADDII AFRAAD: — Waxaas oo kale weligeed nalooma dhigin!

ARDAYADDII SADDEXAAD — Macallimadeennu dersigay maanta noo dhigtay dersi ka fiican weligeedba nama siinin!

ARDAYADDII LABAAD — Haa, runteed waaye!

ARDAYADDII SADDEXAAD — Perche waxay tiri: Ma taqaanniin, Shabeel-naagoodka... iska ilaaliya, kan oo baabuurka wata oo idin dhaha: Waan idin sii dhawayn... iyo waxaas idin dhaha, iska ilaaliya! Ilmaha intay yar yar yihiin macallimaddoodii iyo habartooda iyo adoogood ay ilaalinayaa ay tiri: Ma ogtahay?

ARDAYADDII AFRAAD: — Haa.

ARDAYADDII SADDEXAAD — Iyadoo saas jirto, yaa goonni ahaan qof walba isagaa naftiisa is ilaalin kara, ma ogtihiin horta?

ARDAYADDII AFRAAD: — Haa.

ARDAYADDII SADDEXAAD — Warkaas isagoo jira, ma aragtay, yaa haddana qof walba sharaftiisa isagaa is yaqaan.

ARDAYADDII HORE — Macallimadda maxaa caqli iyo cilmi Ilaahay siiyay! Naagtaas guumeysta ah oo goomankeedii godmeen oo guureytida ah! Annagay doonaysaa inay guurkeenna na gefiso! Ani ninkaan arko waan la sheekeysa haa!

ARDAYADDII AFRAAD: Wallee!

ARDAYADDII LABAAD: Qaraaraa kaa keenay e waad ka bixi, saddex beri iskuulka lagaaga joojiyay waxaas.

ARDAYADDII HORE: Adiga, sug saaqidaa, sug, sug, sug! Adiga, isku asxaab aannu ahayn e, halkeenna gees is kala wadnee hadmaad toobad keentay?

ARDAYADDII LABAAD: Hadda, waan ka baxay halkaas.

ARDAYADDII HORE: Waa is naqaan, laakiin!

SHABEEL: Buona sera.

ARDADII: Nabad, nabad.

SHABEEL: Haye? Maxaad ka samaynaysaan meesha?

ARDADDII: Iskool baan ka nimid.

SHABEEL: Bravo, bravo, bravo! Waa loo baahan yahay carruur yar yar oo haddana gabdho ah oo wax baranaysee. Xaggee mareysaa tacliintiinnu?

ARDAYADDII LABAAD: Meel fiican ayey mareysaa.

SHABEEL: Aniga naftaydu waxaan dhigtaa Istituto, idinku, idinku, meelaha ka sokeeya unifersitaha... Intaa ka liidatiin......

ARDAYADDII SADDEXAAD: Istitutaa? Oday weyn aabad tahay e istituto maxaa weeye, ina-adeer?

SHABEEL: Carruur ma ihid e cunta xumaa ku haysee, hadda iga raalli ahaada, yartanaan rabaa inaan la showro e.

ARDAYADDII SADDEXAAD: Yartee? Tan?

SHABEEL: Haa.

ARDAYADDII SADDEXAAD: Sug!

ARDAYADDII LABAAD: Waxaan ku idhi lahaa, intii tan la hadli lahayd, horta aniga ila hadal!

SHABEEL: Nasiibkaa baad qabtaa, inaan ku jeclaado waa suurowdaa, i sug!

ARDAYADDII LABAAD: Waa kaa diiday, mana kaa yeelin warkaas! Horta i dhagaayso aan kula hadlee!

SHABEEL: Mayee, aniga hayla hadlin e iska hadal!

ARDAYADDII LABAAD: Horta gabartan ma taqaannaa adiga?

SHABEEL: Yaa?

ARDAYADDII LABAAD: Tan ma taqaannaa?

SHABEEL: Tanaa?

ARDAYADDII LABAAD: Haa.

SHABEEL: Haa. Waaba jeclee sidaanan u aqoonba?

ARDAYADDII LABAAD: Hadal ma taqaanno, laakiin.

| | |
|---|---|
| SHABEEL: | Sidey u taqaan baan ula hadlaa. |
| ARDAYADDII LABAAD | Haddaba i dhegeyso, anaa kula hadlaaya. |
| SHABEEL: | Iska hadal adigu! |
| ARDAYADDII LABAAD | Hablaha sharaftooda, shirqool-halleeye Shabeelnaagoodka shartiisa. |
| ARDADII: | Na mooti! |
| ARDAYADDII LABAAD | Dab-baas-shidanaye. |
| SHABEEL: | Dab ku dhac! |
| ARDAYADDII LABAAD | Ku dhac horteyda! Dab baas-shidanaye ku shiil Shabeelnaagoodka shartiisa...... |
| ARDADII: | Na mooti! |
| ARDAYADDII AFRAAD: | Sug, anaa kula hadlaya, markan e. |
| SHABEEL: | Horta waxa la yidhi, qof wixii laga filanayo kuna ammaan ma aha, kuna eed ma aha. Dadkan madaxa xun e qudhaanjo leh waanan kheyr ka filaneyn. |
| ARDAYADDII SADDEXAAD | Adaa madaxa qudhaanjo leh! Ha caytamin! |
| SHABEEL: | Qofka amaba aan tabay aan la damacsanaa inaan la hadlo waa adiga. |
| ARDAYADDII AFRAAD: | Shabbada — caarcaarshe, afduuban-ku-shaqeeye Shabeelnaagoodka. |
| ARDADII: | Shartiisa na mooti! |
| SHABEEL: | Awel aa waxa la yidhi, dherer iyo dhugmo layskuma helo! Wiiqan! Naa naga tag! |
| ARDAYADDII LABAAD | Waa qaraar e, laakiin. |
| ARDAYADDII SADDEXAAD | Sheekooyin-macaane sharbaad qabanqaabin Shabeelnaagoodka. |
| ARDADII: | Shartiisa na mooti! |
| SHABEEL: | Waxaasaa ku leh, iskuul baan dhigannaa, oo Wallaahaan alif wax ma leh weligiin laydiin dhigin! Sow iskuulka adaab lagama barto? Maxaa Shabeelka ku baray intan aad la egtihiin? |
| ARDAYADDII SADDEXAAD | Macallimaddaa noo sheegtay Shabeelka. |
| SHABEEL: | Ma adaa macallinba leh? Guumeys aad tahay guriga joogi jirtay! |
| ARDAYADDII SADDEXAAD | Adna guunkaad tahay. |
| ARDAYADDII HORE | Adiga gabarna kuma rabtee maxaad rabtaa? |
| SHABEEL: | Ma dhammaysateen warkiinnii? |
| ARDAYADDII LABAAD | Ma dhammaysan e i dhegeyso, anaa ku maslaxaayee! Awelba anaa cayda bilaabay haddana anaa ku maslaxaayee dhegeyso! |
| SHABEEL: | Ilaahow wax kheyr leh, haye? |
| ARDAYADDII | |

LABAAD    Markii uu ku shakaaloo xaqaagi u shareero Shabeelnaagoodka shartiisa.

ARDADII:    Na mooti!

ARDAYADDII LABAAD    Haddee, iska raalli ahow, adeerow, dhegeyso, haddana aan kula hadlee, adeerow, raalli ahow!

SHABEEL:    Haye, eeddo!

ARDAYADDII LABAAD    Eeddo hay dhihin aniga!

SHABEEL:    Oo filkaa adduunka yaa ka nool?

ARDAYADDII LABAAD    Adeerow, dhegeyso.

SHABEEL:    Haye, eeddo?

ARDAYADDII LABAAD    Hees fiican oo adiga faalladaada ay tahay ma kuu qaadaa?

SHABEEL:    Faalladaadee? Hee?

ARDAYADDII LABAAD    Adiga, adiga.

SHABEEL:    Horta faallada been ah ma hadda aad waddeen mid u eg miyaa?

ARDAYADDII LABAAD    Maya! Maya! Ma aha! Mid ka fiican ma ahaan oo?

ARDADII:    Shabeelka, shabeelka, shabeelnaagoodka, shuftaygaa shartiisa na mooti!

Shuqshuqda iyo beenta hablaha ku shubaysee
Haweenku sharaystee haa, shirkii laga qaatay.
Haa wallee lagu sheeg!
Shabeelka, shabeelka, shabeelnaagoodka
Shuftaygaa shartiisa na mooti!
Shantii meel mareysa shaydaanka u yeelan
Sheex ma yaqaanka, haa, waxaa ku shaqaysta
Haa wallee lagu sheeg!
Shabeelka, shabeelka, shabeelnaagoodka
Shuftaygaa shartiisa na mooti!

SHABEEL:    Kaalay, kaalay!

ARDAYADDII LABAAD    Haye, adeer?

SHABEEL:    Waad i maslaxdeen, ma aheen oo?

ARDADII:    Haa.

SHABEEL:    Bariid mantag!

ARDAYADDII LABAAD    Bariid mantag adba!

SHABEEL:    Waxaad yeeleysaan, idinkuna kolkiinna dhegeysta!

Shuka isku qarshooyin,
Shangaani galooyin,
Sidii shufta duusha,
Waddada ku shirooyin,
Shan saac habeenkii,
Showr bas u kacooyin,
Shimbiraha, shimbiraha,
Shimbira-nimadoonka,
Shartooda na mooti iyo,
Shurufkooda amase Shiirkooda.

Sigaar shitooyin,
Khamrigana shubtooyin,
Shaneema iyo baarka,
Iyo shaydaanka jeclooyin,
Ninkii shilin haysta,
Sheedda iska tusooyin,
Shimbiraha, Shimbiraha,
Shimbira-nimadoonka,
Shartooda na mooti iyo,
Shurufkooda amase Shiirkooda.

(Ardaydii baa baxaysa, isna kelidiis buu isla hadlayaa)

Horta markaan caawa arkayay,
Tan casiin ee dheer iyo,
Midda coomme gaaban iyo,
Tan cambuurka madow,
Carruurtaa yar-yarkaan,
La cayaar is lahaa,
Illaa waa dad cirroobay oo,
Cutiyoo kici waayoo,
Colkii ay la socdeen,
Cunta la'aanu ka reebtay,
Cimrigiin Alla gooyoo,
Cagaarrow idin laa,
Haddii aan iska caayo,
Coomanka xun-xunka ah,
Ma ciil baan qabi lahaa?

Bal naag dambe haddaan mar dambe isku duugo inaan iska caayo mooyiye! Yaa! Billaash aa isu waalaysiin ma ahee, ways naqaan ee raalli ahaada! Haddaan, waar waxaan luggooyo aan u sii taagnahay ee aammus, waan heli, haddii Ilaahay idmo e. Haddaanan waayin, ballan anaa idinka qaaday inaan wax luggooyo yaa! Horta, mayee, adduunka waxaan ogahay waa waqti waqti kolkiisuu igu niikiyey adduunku. Laakiin anaa ka shaqayn. Iska dhaaf! Intaa inay idinku ba'do ha ka baqina! Markii af ba'an kolna ku samri maayo. Sidaan yeeloba iyo meeshaan ka laabtoba, inaan sidaa ku samro ka baqi meysid. Xaaraan! Haa. Shabeelka Shabeelka......

(Askari baa soo galaya isagoo wada Sheekh iyo Saaxiib)

ASKARI: Alla, yaa Shabeel! Sow nabad ma aha?

SHABEEL: Kama shaqeeyo nabadda. Haa aniga haddaad iigu socotay nimankan isku xidhan e aad waddo, muddo bilo ah dhexdeeda sagaal goor aan ka soo furay Xabsiga Gaalshire. Markaa hadday ku yidhaahdeen ninkaasaa noo oday ah oon is xignaa, Allahay Alla! Anigu waa daalay. Dadkii madaxda ahaa waa isku weji go'nay. Sidaan u lahaa nimankan ha la furo, markaa. Allahay Alle! Waa kuwaas e haddaa rabto xir, cunto xataa u keeni maayo anigu!

ASKARI: Warkaagii dhegeystee anna keyga dhegeyso.

SHABEEL: Haye?

| | |
|---|---|
| ASKARI: | Nimankaan ma is taqaanniin? |
| SHABEEL: | Oo nimankaan waa niman khaati Billaahi aan kataagnahoo saacad walba waa la xidhaa. Soo fur...... |
| ASKARI: | Waa garannay, waa garannay. Iska dhaaf! Sheekh ninkaan mays taqaanniin? |
| SHEEKH: | Ninkaannee hadlaa? |
| SAAXIIB: | Ninkan, mayee weligayo isma aannu arag. |
| SHABEEL: | Waa runtiis. |
| ASKARI: | Adna? |
| SHEEKH: | Intiis ka dhinto beenaas sheegay. Godkaan ninka na geliyay usaga waaye. Meel aad u fakanaysid ma jiro. |
| SHABEEL: | Labadaa nin, labadaba anaa kaaga aqoon badan. |
| ASKARI: | Haa. |
| SHABEEL: | Ninkan weyn, maanakoobiyaa hadda laga soo furee nin wax og ma aha. Warkiisa ha qaban, waa waalan yahay e. Ninkan odayga ah oo Sheekha ah oo xaggaa taagan mooyee ninka kale warkiisa hay qaban aniga. |
| ASKARI: | Waxaad yeeleysaa, dacwadda xafiiskaan ku furi doonnaa, kow dheh, waxaan doonayaa inaad i raacdidi. |
| SHABEEL: | Asalaama calaykum. |
| ASKARI: | Calaykum a salaam. |
| SHABEEL: | Maxaad tahay adigu markaad dadka aad ku qaylinayso? |
| ASKARI: | Dhib ma leh taasi. Waxaan ahay waa la arki doonaa. |
| SHABEEL: | Biririf! Saddex bilood oo hor laa Fiyeeradii ku dhammaatay e, Fiyeerada ku gal! |
| ASKARI: | Haye, ee kaalay! |
| SHABEEL: | Bal waxaad noo keentay day! Waar naga tag! |
| SAAXIIB: | Kii biliiska oo run ah waaye! |
| ASKARI: | Gacnaa is saaro! Is saaro gacnaha! |
| SHABEEL: | Aar, waxa jira meelo kaloo... Buuggan ... yar? |
| ASKARI: | Markaa hadal! |
| SHABEEL: | Waa xidhanahay e xaggaa naga taga! |
| SAAXIIB: | Saajin, adiga wax ma ku u'aali karaa? |
| ASKARI: | Adigu maxaad i su'aalaysaa maba taqaanid isaga e. |
| SAAXIIB: | Mayee, wax ma ku su'aali karaa horta? |
| ASKARI: | Iska wad! |
| SAAXIIB: | Maxaa na lagu haystaa? |
| ASKARI: | Xaggaan kuugu sheegi doonaa. |
| SAAXIIB: | Mayee dee horta e ... yeel. Dariiq weeye. |
| ASKARI: | Haa. |
| SAAXIIB: | Ujeeddada dhammi waa ii dhaadhacsan tahay. Horta annaga waxa nalagu haysto ... Horta waxay ila tahay ... Annagu inaan wax hagaajinay bay ila tahay. Maxaa yeelay, waxa la yidhaahdaa, Soomaalidu ha badato, annagu dad uun baannu soo kordhinnay. |
| ASKARI: | Waxaasi dhib ma leh. Waajibaadkiinnaa laydin marsiinayaa sidaa u kordhiseen. |
| SAAXIIB: | Waa caynkaa. |
| ASKARI: | Waa la khayrayaa, ha biqin! |
| SHABEEL: | Haddii ee ... horta i maqal. |
| SAAXIIB: | Ninkan weeye, camalkoo dhan, ninkan weeye! |
| SHABEEL: | Ninkan weeye, laakiin meeshaan aniga oo awelba...... |

SAAXIIB: Belaayada caloosha buuran leh baa waxaasoo dhan wada!

SHABEEL: Haddaad idinku gacan gasheen......

SHEEKH: Waaryaa, waa la cunaa hunguriga e, ka cun aad cayishid ee.

SHABEEL: Mayee, laakiin haddaad idinku gacan gasheen oo idinka laydin xidhay maxaad ninka iila soo doonteen biliiska ah? Anigu aan cunto idiin keeno oo abbiil aan idiin qaado oo aan wax idiin sameeyee.

SHEEKH: Waar waxba ha noo samayn, haddaannu dacwad aannu ku jirno, nagula jir, aan leeyahay.

ASKARI: Saaka rag idiinkoo kale ah aan raadinnoon hore u saarray.

## (ARAGTIDA LIXAAD)

DIIDDAN: Waad ku afgobaadsanaysaa, waxaad u badheedhay inaad markaan dariiqa aqalkayaga ku socdoba jidka isu kay taagto.

DIIDDANE: Haye.

DIIDDAN: Iga daayoo wasakhi iguma taallee!

DIIDDANE: Naa boodhka ma kaa bi'iyaa?

DIIDDAN: Waar boodhka maxaa ii yeelay?

DIIDDANE: Waxba.

DIIDDAN: Dee iga daa!

DIIDDANE: Sheekadeennii yareyd aynnu wadanno!

DIIDDAN: Mayee iga daa!

DIIDDANE: Mayee, mayee waa wadanaynaa!

DIIDDAN: Mayee iga daa sheekada!

DIIDDANE: Soo dhowow. Waa wadanaynaa. Taasi innaga dhammaan maysee, naf kaleba ma hayno aan hadalkaa ahayn e aan sheekadeenna yar wadanno!

DIIDDAN: Oo yaan naf kale hayn?

DIIDDANE: Cajaayib?

DIIDDAN: Adigaan malaha naf kale kugu hadhin.

DIIDDANE: Bal waxaa ... war xun. Waar annagaa ibtilo aragnay! Waxaan ku leeyahay, Diiddaney!

Dareenka dhex yaal rag iyo dumar
Danteenna dayowday waxaa dilay
Haddaa dibindaabyo deysaan
Cudurka dawo looma waayeen Diiddaney!

DIIDDAN:

Ruux aan dembi gelin dagaal ku day
Dadyohow hayga qaban haddaan dilo
Dalaaqdaada hoo, haddaa deysaan
Cudurka dawo looma waayeen Diiddaney!

Dabbaan shidayaa dalkaan gubayaa
Berraan dudayaa haddaa deysaan
Cudurka dawo looma waayeen Diiddaney!

DIIDDANE:

Dunidaan rarayaa wax baan dilayaa
Dabbaan shidayaa dalkaan gubayaa
Berraan dudayaa haddaa deysaan
Cudurka dawo looma waayeen Diiddaney!

DIIDDAN:

Aan daawado tii direys xidhan
Ka daba tago oo darxumo mudo
Dibjirkaa barateen haddaa deysaan
Cudurka daawo looma waayeen.

DIIDDANE: Af nooliba waa hadlaa! Waxa la yidhi Anigoo dayax iyo daruur u eg, yaa!

DIIDDAN: Yaa sidaas is yidhaahda?

DIIDDANE: Idinkaa is yidhaahda e dhegeyso, haa!

Anoo dayax iyo daruur u eg
Maxaa i dul dhigay nin ii daran

Ma daah baan ahay haddaa deysaan
Cudurka dawo looma waayeen Diiddaney!

DIIDDANE: Duug bay noqotay e mid kale dayo
Doqon aan gaadhaynin dahab saar
Damaca idin galay haddaa deysaan
Cudurka dawo looma waayeen.

DIIDDANE: Inaan kaa aamus wax iiga rooni ma jirto!

DIIDDAN: Adigu iska kay daa! Horta markaan runta kuu sheegona waxaad tidhaahdaa guun baad tahay oo waa waxaad ku hadal baratay.

DIIDDANE: Waxaas oo dhan innaga daa, kow dheh, kow dheh Diiddaney! Waxaas oo dhan ka kaalay.

DIIDDAN: Haye.

DIIDDANE: Quraanka maxaa isku fuuqsaday? kufu'an axad! ... axad?

DIIDDAN: Haa!

DIIDDANE: Wixii oo dhan ka kaalay.

DIIDDAN: Haye?

DIIDDANE: Waxaan ku leeyahay, waa kan oo labadeennuba cimri biliseed baynnu joognaa, kow dheh.

DIIDDAN: Yaa cimri biliseed jooga?

DIIDDANE: Labadeennuba.

DIIDDAN: Ma anigaa?

DIIDDANE: Guun iyo Guumeys beynnu nahay.

DIIDDAN: Bal hadda i soo daawo inaan cimri biliseed joogo iyo in kale. (Masraxey xarrago soconeysaa)

DIIDDANE: Maxaa kaa daawadaa? Cajaayib! Boqol, boqol iyo konton, boqol iyo konton! Naa bes, bes, bes!

DIIDDAN: Ma naagtaasaa cimri biliseed joogta?

DIIDDANE: Waa run! Laafyihii baad kolba mar qaadaysaa.

DIIDDAN: Kolkaan sidaa u qaado dhallinyaradoo dhammi way dhacdaa.

DIIDDANE: Way dhacdaa?

DIIDDAN: Maxaa sheegeysaa?

DIIDDANE: Haddaba waxaan ku leeyahay, wallaa hee dheh.

DIIDDAN: Hee?

DIIDDANE: Hadday laafyo wax tarayaan,

DIIDDAN: Hee?

DIIDDANE: Daayeerka wax ka laafyo qurxooni ma jiraan hadday laafyo wax tarayaan. Sow wax aad garatay ma aha? Balse anigaba i eeg, waa kaas e eeg (Isna tallaabo giijisan ayuu ku hor marayaa)

DIIDDAN: Oo maxaad kordhisay imminka?

DIIDDANE: Dee haddaanad adigu markii hore wax kordhin, anna wax ma kordhin.

DIIDDAN: Anigu waan kordhiyey, sow taan ku idhi waa la daadanayaa.

DIIDDANE: Marxabba.

DIIDDAN: Cimri biliseedna anigu ma joogee mar dambe haygu odhan!

DIIDDANE: Shan iyo toban jir miyaad ka weyn tahay?

DIIDDAN: Ma aniga? Waan ka weynahay e ha habaar tamin! Habaar weeye waxaad ku hadlaysid!

DIIDDANE: Shan iyo toban sow kama weynid?

DIIDDAN: Waan ka yarahay.

DIIDDANE: Haye, alif wax ma leh iyo wax buu leeyahay ha odhan e adigu bal kala saar! Haye?

DIIDDAN: Anigu shan iyo toban jir uma dhowi. Goor taan dhashay ma kuu sheegaa?

DIIDDANE: Sheeg!

DIIDDAN: Calankii baan dhashay.

DIIDDANE: Calankee?

DIIDDAN: Kii Jamhuuriyadda.

DIIDDANE: Ma calankii ee ... Calankii, Talyaani kicii?

DIIDDAN: Haa.

DIIDDANE: Sow ma aha?

DIIDDAN: Haa.

DIIDDANE: Talyaani kicii baad dhalatay?

DIIDDAN: Ayo? Kii Jamhuuriyadda Soomaalida ayaan dhashay aniguye, lixdankii.

DIIDDANE: Hayee. Talyaanikaca xataa sow ma aha?

DIIDDAN: Talyaani maxaan ka aqaan?

DIIDDANE: Ka aynnu xornimada ku qaaddanay, sow ma aha?

DIIDDAN: Haa.

DIIDDAN: Haa.

DIIDDANE: Haddaba anna goortaan dhashay ma kuu sheegaa?

DIIDDAN: Haa.

DIIDDANE: Lix casheynnu kala horreynay. Anigu Ingiriiskicii baan dhashay.

DIIDDAN: Beentaa weeyaan! Beentaa weeyaan! Gabdhayahow, sow lixdankii ma aan dhalan?

GABDHIHII
DAAWANAYAY: Haa.

DIIDDAN: Lixdankii baan dhashay. Way wada ogaayeen.

DIIDDANE: Haddaba waxaan ku leeyahay, haddii markhaati been ah laysu furay,

DIIDDAN: Been ma aha kaygu.

DIIDDANE: Waar ragyohow, sow lix casho ma kala weynin.

RAGGII
DAAWANAYAY: Haa.

DIIDDANE: Kow dheh, taasi naga daa! Kow dheh.

DIIDDAN: Haye?

DIIDDANE: Naa waxaan ku leeyahay, walaaleey, waxaan ku idhi innaga daa!

DIIDDAN: Haye?

DIIDDANE: Waxaas oo dhan iska daa!

DIIDDAN: Haye?

DIIDDANE: Dhegeyso.

DIIDDAN: Hee?

DIIDDANE: Haatan midkeenna ma weyna.

DIIDDAN: Haye?

DIIDDANE: Malakulmowdkii meel uu jiro lama oga.

DIIDDAN: Dee bal taaba aan diido. Iyadoo da'i jirin, Malakulmowd baa ka soo horreynaya.

DIIDDANE: Malakulmowd baa ka soo horreynaya.

DIIDDAN: Waa run.

DIIDDANE: Waqti aynnu dhiman doonno lama oga.

DIIDDAN: Waa run.

DIIDDANE: Haddaynnu sidaas uun ku dhimannona waa geeri iyo mag la'aan.

DIIDDAN: Haa.

DIIDDANE: Ilmahii yaraa yee aynnu dariiqa ka qaadannaay ...

DIIDDAN: Ilmahaygii?

DIIDDANE: Haa, keennii.

DIIDDAN: Shuqul kma lihid adigu!

DIIDDANE: Adna kuma lihid e.

DIIDDAN: Waa taad dhakhtarkii u keeni weydee.

DIIDDANE: Haddaba iga qaado, waxaan ku leeyahay, kiibaa wax dad ah inoo jooga.

| | |
|---|---|
| DIIDDAN: | Haye? |
| DIIDDANE: | Kow dheh. |
| DIIDDAN: | Inanakaygii? |
| DIIDDANE: | Haa, inankaagii oo waxaan ku leeyahay, maxay kula tahay, haddeynnu, ee na ... yaa ... isku weyso dhawranno? |
| DIIDDAN: | Weysadhawrku waa waxaan ka hadlayey oo aan diidayay weeyee, weysadhawrku waa maxay? |
| DIIDDANE: | Naa habar ma ihid ... |
| DIIDDAN: | Haygu odhan! Weysadhawrku waa ka habraha e. |
| DIIDDANE: | Waa tahay, marxabba. |
| DIIDDAN: | Haygu odhan! |
| DIIDDANE: | Haa, waa tahay, maxay kula tahay, haddaynnu ... yaa? Yaa? Maxay kula tahay, yaa ... tolow yaa? |
| DIIDDAN: | Yaa? |
| DIIDDANE: | Haddaynnu waraso reebno. |
| DIIDDAN: | Hee? |
| DIIDDANE: | Oynu wax carruur ah ka tagno. |
| DIIDDAN: | Hee? |
| DIIDDANE: | Maxay kula tahay? |
| DIIDDAN: | Intii aan ku idhi haddaad deyso. |
| DIIDDANE: | Hee, |
| DIIDDAN: | Waa hagaag. |
| DIIDDANE: | Intii aad i tidhi, |
| DIIDDAN: | Haa. |
| DIIDDANE: | Anna intii aan ku idhi ma deynaysaa? |
| DIIDDAN: | Dee waa hagaag adigu. |
| DIIDDANE: | Dee anigu waan deynayaa, adigu sow deyn meysid? |
| DIIDDAN: | Markaad deysaan deynayaa anigu. |
| DIIDDANE: | Adigu igaga horrayn meysid? |
| DIIDDAN: | Adigaa waxa oo dhan wada e ... |
| DIIDDANE: | Waa tahay, Marxabba. Waan oggolahay. |
| | Samcan wa daacan! Anaa ku hooreynaya oo anaa joojinaya. |
| DIIDDAN: | Haye. |
| DIIDDANE: | Marka waynu is raacaynaa, he, he, he ... Waxaynu sii maraynaa, ma aragtay, Qaaddi Huurshe aynu sii maraynaa halkeer ah. |
| DIIDDAN: | Maxaynu odhan? |

| | |
|---|---|
| DIIDDANE: | Maxaynu odhan waa maxay? Adigu sow maynu dhammaynin? |
| DIIDDAN: | Haa. |
| DIIDDANE: | Sow is raaci mayno? |
| DIIDDAN: | Haa. |
| DIIDDANE: | Sow wixii la hagaajin maayo? |
| DIIDDAN: | Haa. |
| DIIDDANE: | Dee bes, maxaad ciicda la haysaa? |

## HEESTII XIDHITAANKA:

Hooballadii:

Hagran mayno oo dhaqanka
Waan u hawl galeynaa.
Hurdow toos! Hurdow toos! Hurdow toos!
Xaqiyo baadilkaan kala hufaynaa!

DIIDDANE:

Hawraarta loo maro murtida,
Hadalka soo koobta
Hees iyo buraanbur iyo gabay,
Hello iyo Jiifto
Hiddaha iyo taariikhda,
Lagu hadaaqayo
Halyeeyadii habeeyey ee
Higgaaddooda kala qaybshay
Dhaxalkoodii baan haysannaa
Hilinkii toosnaaye

Hooballadii:

Hagran mayno oo dhaqanka
Waan u hawl galaynaa
Hurdow toos! Hurdow toos! Hurdow toos!
Xaqiyo baadilkaan kala hufaynaa!

DIIDDANE:

Hugumada harraatida dahsoon
Hugunka gaagaaban
Hagardaamada iyo beenta
Sheekada hadhqodaarka
Nikaaxa hadoodilan gabdhaha
Lagu hallaynayo
Hallaasaha qarsoon ee jidhfaha
Lagu hagoogaayo
Hatagada inaan muujinnaa
Way habboon tahay e

Hooballadii:

Hagran mayno oo dhaqanka
Waan u hawl galaynaa
Hurdow toos! Hurdow toos! Hurdow toos!
Xaqiyo baadilkaan kala hufaynaa!

DIIDDANE:

Hawo madhan qabyaaladiyo hayb
Haybad lagu waaye
Hawshii timaadda iyo dhibtii
Hibasho reebaysa
Haddaan laga hortagin goor dambaa
Dabkaan hurinnay Soomaali
Hadduu u leeyahay e
Sidii hebedka naaskiisa
Kii hoos geliba nuugo
Hagran mayno oo dhaqanka
Waan u hawl galaynaa
Hurdow toos! Hurdow toos! Hurdow toos!
Xaqiyo baadilkaan kala hufaynaa ye

| | |
|---|---|
| Hooballadii: | Hagran mayno oo dhaqanka<br>Waan u hawl galaynaa<br>Hurdow toos! Hurdow toos! Hurdow toos!<br>Xaqiyo baadilkaan kala hufaynaa!<br>Lagu halgaamaaye<br>Halkaan haabanayno iyo<br>Asluubteennii waxa haysta<br>Waa laba hab oo kala fog<br>Aan haab isku lahayn e |
| Hooballadii: | Hagran mayno oo Dhaqanka<br>Waan u hawlgaleynaa<br>Hurdow toos! Hurdow toos! Hurdow toos!<br>Xaqiyo baadilkaan kala hufeynaa! |
| DIIDDANE: | Horreysiyo dambeysaba horseed,<br>Heegan aan nahay e |

MINISTRY OF EDUCATION, TEXTBOOKPRESS MOGADISHU 11-83 50.000